ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in Maamulka Biyaha Xamar uu noqdaa Hay'ad iskeed isu maamusha shaqsiyad qaynuunna lahaato dibna loo habeeyo sharcigii hore ay ku dhisneed oo loo yiqiinay «Wakaaladda Biyaha ee Xamar»;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee XHKS iyo Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

ABUURIDDA WAKAALADDA

Wakaaladda Biyaha Xamar ayaa sharcigan lagu dhisay, waxaana hadda ka dib lagu tilmaamayaa Wakaalad.

Qod. 2aad

Wakaaladdu waxay ka mid tahay Wakaaladaha dawladda ee Madax-bannaan, waxayna leedahay jirid iyo astaan sharci.

Qod. 3aad

Wakaaladdu waxay u hoggaansami doontaa sharciyada iyo xeerarka saameeya Wakaaladaha Madax-bannaan ee Dawladda, gaar ahaan:

b) Xeerka Lr.16 ee 1.4.1970 ee ku saabsan faaqidaadda xisaabaha Wakaaladaha Madax-bannaan;

t) Xeerka Lr. 58 ee 31.7.1972 ee Lacagta Wakaaladaha Dawladda;

j) Xeerka Lr. 56 ee 22.4.1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Ma-

Qod. 4aad

MEELEYNTA WAKAALADDA

Wakaaladda Biyaha ee Xamar waxaa lagu meeleeyay derejada ah «B», xarunteedana waxay tahay magaalada Xamar, waxayna ku yeelan doontaa Laamo Degmooyinka uu ka kooban yahay Gobolka Banaadir.

Qodobka 5aad

UJEEDDADA WAKAALADDA

Ujeeddada Wakaaladda ama xilkeeda wuxuu yahay sida soo socda:

1) Inay sahmiso, soo saarto qaybisana biyo caafimaad qaba oo ku filan Gobolka Banaadir;

2) Inay biyo caafimaadka qaba ka haqab tirto magaalada Xamar (Gobolka Banaadir);

3) Inay u samayso magaalada Xamar dhuumamka Biyaha qaada iyo meelo biyo laga dhaansado;

4) Inay u sameeyso dhuuman biyaha geeya guryaha iyo meelaha caanka ah, iyadoo kiro ka qaadanaysa;

5) Inay ururiso kana faa,idaysato war ururin ku saabsan biyaha dhulka iyo kuwa sare (underground and surfece water date) ee Gobolka

6) Inay si cilmi ah u baarto sida ugu haboon ee biyaha Gobolka loogaga faa,idaysan karo;

7) Inay yeelato awood farsamo oo ay ku fulin karto Mashruuc Biyood oo Gabal, iyadoo ku talo gelayso qorshaynta, dersidda, xaradhka, kormeerka xannaanada wadidda iyo shaybaarka ;

8) Inay habayso, dibadda ka dirto alaabta, qalabka iyo baahitirka hawsheeda la xiriirta;

9) Inay aqoonta shaqaalaheeda kor u dhigto gees kastaba;

10) Inay abaabusho, fuliso, socodsiiso hawshii kale oo loo xilsaaro guud ahaan, gaar ahaan dhismaha Mashruuca «Muqdisho Sawerage»

QOd. 6aad

AWOODDA IYO XUQUUQDA WAKAALADDA

1. Wakaaladdu waxay leedahay awood buuxda oo ay ku fuliso ujeeddooyinka loo abuuray, xilkeeda iyo xuquuqdeeda sharciga uu siiyey, iyadoo mar waliba dhowreysa kuna dhaqmeysa sharcigan, sharciyada u degsan Wakaaladaha Madax-bannaan iyo mabaa'diida guud ee Maamul-

2. Wakaaladda waxay leedahay xuquuqda soo socda:

a) In loo horeysiiyo baahideeda dhulka iyo baneynta meelaha hawshu ka socoto (public or private right of way or public utility easement);

b) Inay mariso ama ku isticmaasho jidadka ee meel kasta dhuumamka biyaha la marinaayo;

t) In ay sicirka biyaha iyo qiimaha biyo-gelinta turyaha gooyso isla markaana awood ay ku socodsiiyo xeerka biyo-gelinta yeelato, iyo isticmaalka biyaha (service connection regulation);

j) Hadday lagama maarmaan noqoto mashruuca biyo sifayn ah ku dhisto agagaarka webiga Shabeelle ama ceelal ka qodo Gobollada deriska la ah Gobolka Banaadir si magaallo-madaxda biyo ku filan u hesho.

x) Wakaaladdu waxay yeelaneysaa awood oo ah inay saxiixdo heshiisyo la xiriira hawlaheeda oo qodobbadiisa ka mid noqon kara canshuur ka dhaafid hawlaheeda free charges or livies) iyadoo ay kala tashanayso Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda oo oggolaanshahiisa ku xiran tahay;

kh) Xuquuqda, awoodda iyo xilka ku tilmaaman sharciga iyo xeerka hoos ku sheegan oo ku saabsan Dhismaha Wakaalada hore ee Biyaha xamar wixii sharcigan ka soo horjeeda ama uusan la socon mooyee:

i) Sharciga lamb. 2 ee 11.12.1967 oo lagu dhisay Wakaaladda Dhismaha Biyaha Xamar;

ii) Xeerka lamb. 181 ee 8.8.1968 ee nidaaminaaya lana xiriira fulinta sharciga dhismaha Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar.

Qodobka 7aad

KORMEERKA IYO AWOODDA WASIIRKA

1) Kormeerka Guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo biyaha;

2) Wasiirka wuxuu awood u leeyahay inuu had iyo jeer siin karo awaamiirta iyo talooyin ku saabsan maamulka sidii sare loogu qaadi lahaa Wakaaladdana waxtar ku noqon lahayd;

3) Isagoo tixgilinaya qod. 1aad ee bedelaadda sharciga lamb. 36 ee 22.3.1972 Wasiirku wuxuu ku leeyahay wakaalada awood iyo mas,uuliyad buuxda sida ku tifaftiran sharciga lam. 17 ee 21.4.1974.

Qodobka 8aad

DHISMAHA WAKAALADDA

1) Wakaaladdu waxaa ka madax noqon doona Maareeye Guud

2) Wakaaladdu waxay yeelaneysaa: Maareeye Guud waaxyo

Qodobka 9aad

MAGACAABID IYO XILKA

1) Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Biyaha Xamar waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saxiixo Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinayaa talada Wasiirka Wakaaladda Macdanta iyo Biyaha;

2) Maareeyaasha waaxyaha Wakaalada Biyaha Xamar waxaa lagu magacaabi doonaa xeer uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

3) Madax kasta wuxuu mas,uul ka yahay habsami u socodka qaybtiisa dhan hawleed, dhan dhaqaale iyo dhanka asluubta shaqaalaha.

Qodobka 10aad

XILKA MAAREEYAHA GUUD

1) Maareeyaha Guud wuxuu leeyahay awood iyo mas,uuliyad la siman tan uu agaasimaha Guud ee Wasaarada, sida ku qeexan qod. 3aad ee xeerka lamb. 316/ee 17.12.1962 ;

2) Maareeyaha Guud Xilkiisa wuxuu yahay

b) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka ka tahay, isagoo oggolaansho ka haysta wasiirka wasaarada Macdanta iyo Biyaha;

t) Inuu mas,uul ka yahay habka maamulka shaqada Wakaalada wuxuuna awood u leeyahay inuu saameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan Maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda:

j) Inuu ku dhaqaaqo wixii qaraar ah oo deg-deg ah, isagoo isla markaas ogaysiinaya wasiirka wasaaradda Macdanta iyo Biyaha

x) Inuu bixiyo wixii amaah lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;

kh) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada Wakaaladdu ee caadi ah isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

3) Markuu ka maqan yahay Maareeyaha Guud shaqada ama ay jiraan asbaabo ka reebaya shaqada waxaa hawsha si ku meel gaar ahaan

Qodobka 11aad

XUQUUQDA QAYNUUNIGA IYO DHAQAALAHA EE SHAQAALAHA WAKAALADDA

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha, Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona xeerka lam. 36. ee 22.4.1872, kuna saabsan shaqaalaha Wakaaladda iyo Wakaaladaha Madaxa bannaan.

Xuquuqda shaqaalaha oo maalinta sharcigan dhaqan galayo ka tirsan maamulka biyaha, Xamar waxaa lagu wareejiyay Wakaaladda Biyaha Xamar, iyagoo loo aqoonsaday shaqadii hore in ay tahay mid sii socota (riconoscimento di continuita, di lavoro e di anzianita di servizio dalla data di assunzione), laga bilaabo maalinta qof kasta la qoray, waxayna la mid yihiin dhanka xuquuqda iyo dhaqanka dhaqaalahaba shaqaalaha Wakaaladda ay qoroto.

Qodobka 12aad

QAABKA WAKAALADDA

1) Wakaaladdu waxay yeelanaysaa qaab la xiriira dhismaheeda;

2) Qaabka Wakaaladda Biyaha Xamar waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., isagoo tixgelinaaya talada uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

Qaabka Wakaaladda waa in lagu dhammeeyaa muddo 6 (lix) bilood, laga bilaabo maalinta sharcigan uu dhaqan galo.

Qodobka 13aad

HANTIDA WAKAALADDA

Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay ;

1) Lacagta u keydsan maamulka hore ee Biyaha Xamar;

2) Lacagta kasoo geleysa iibka biyaha guryaha meelaha ganacsiga ama Hay'adaha Dawladda;

3) Wixii lacag ah oo deeq ahaan loo siiyo Wakaaladda iyo wixii deyn ah oo ay ku fulinayaan Mashaariic cusub ee hawshooda la xiriirta.

Qodobka 14aad

AMAAH SHARCI AH

1) Wakaaladdu si ay u hirgeliso hawlaheeda lacag waxay ka amaahan kartaa Bankiyada Dawladda iyo meelihii kale oo ku habboon, ayadoo haysata guddoonka Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

2) Marka amaaha lagala xaajoonayo Bankiyada dibedda ah ama Hay'adaha kale Wakaaladdu waxay tahay mid si sharci ahaan wakiil ka noqon karta Dawladda Soomaaliyeed.

Qodobka 15aad

XISAABTA SANNADKA

Xisaabta sannadka wuxuu ka bilaabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna dhammaanayaa 31 Disheembar ee sannad waliba.

Qodobka 16aad

MIISAANIYADDA WAKAALADDA

a) Miisaaniyadda socota (preventivo):-

1) Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30 Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta, waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda caadiga ah iyo tan horumarinta ee ku saabsan sannadka soo socda, isagoo faahfaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, waxaanu hor dhigi doonaa si loo oggolaado Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda ;

2) Sannadka lacagta ee Wakaaladda wuxuu billaabanayaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31 Disembar ee sannad walba.

b) Xiritaanka Miisaaniyadda (Consuntivo) ;-

1) Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo iska hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka iyo khasaaraha Wakaaladda, taana uu u gudbiyaa Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda.

2) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta & Biyaha inuu oggolaado xiritaanka miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixineyso Wakaaladdu.

Qodobka 17aad

MAAMULKA IYO KORMEERKA XISAABAHA

1) Wakaaladdu had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan, iyadoo ilaalinaysa sida habboon ee qawaaniinta iyo xeerarka qaranka ku xusan

2) Wakaaladdu waxay hawsheeda ku maamuli doontaa dakhliga kasoo xerooda hawsha ay qabato waana inay lacag u kaydisaa qiimaha alaabta, sida ugu haboon u maamushaa kaydkaas.

3) Xisaabaha wakaaladdu Wasiirka Wasaaradda Macdanta & Biyaha ama cid isaga ka wakiil ah ka sokow waxa kormeeri doona Laanta goonida ah ee Wakaaladaha Macdanta iyo Biyaha.

Qodobka 18aad

Qalabka iyo alaabta u soo dega Wakaaladda Biyaha Xamar lana xiriira soo saarka, socodsiinta iyo qaybinta biyaha,waxaa laga dhaafay canshuuraddа furdada (import duty).

Qodobka 19aad

XEER GUUD

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu soo saaro xeer nidaamiye oo lagu faahfaahinayaa sharcigan laguna hirgelinayaa habka ugu wacan oo hawsha wakaaladda ay ku fulin doonto ama looga hortaagayo dhibaatooyinka ka iman kara fulinta xilka Wakaaladda.

Qodobka 20aad

TIRTIRID

Sharci ama xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 21aad

DHAQAN GELID

1) Sharcigan hore ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

2) Sharcigan waa inuu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah ee J.D.S.

3) Qof waliba waa inuu dhowraa, tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale inay dhawraan sharcigaa.-

Muqdisho 6 Abriile 1978

MADAXWEYANHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 20 Abriile 78, Xubno ka tirsan Golaha Dhexe ee lagu magacaabay kormeerayaal Gobalada.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarradoodu yihiin 1, 17, 18, 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay XHKS/3545/77 ee 18 Noofember 1977 oo ku saabsan Gunnooyinka Madaxda Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 21 ee soo baxay 27.11.1969 oo ku saabsan Gunnooyinka Wasiirrada Dawladda;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. yahay 3 ee soo baxay 5 Jen. 76, oo ku saabsan Gunnooyin habeen dhax ah ee Wasiirrada Dawladda ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 27 ee soo baxay 18 Setember 1976 oo ku saabsan gunno habeen dhax ee Golaha Dhexe ee XHKS,

ISAGOO AQOONSADAY : Baahida weyn ee loo qabo in Xubnaha Golaha Dhexe ee XHKS oo lagu magacaabay kormeerayaal Gobollada iyo kuwo loo xilsaaray hawlo khaas ah, ayadoo la tixgeliyey duruufta adag oo ay kala kulmayaan xagga nolosha;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aankii Golaha Dhexe ee XHKS 8-9 Febraayo 1978 ee ku saabsanaa in Xubno ka tirsan Golaha Dhexe lagu magacaabo Kormeerayaal Gobollada;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee HXKS ee 20ko Febraayo 1978;

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA :

Qodobka 1aad

Marka laga billaabo 12 Febraayo, 1978, Xubnaha Golaha Dhexe ee lagu magacaabay kormeerayaal Gobol waxay xaq u yeelanayaan gunno xil oo la siman tan ay qaataan bil kasta Madaxda Hoggaamada Golaha Dhexe ee XHKS iyo 2000 (Laba kun) Shilin oo gunno habeen dhex qiyaas ah (Forfetario).

Qodobka 17aad

MAAMULKA IYO KORMEERKA XISAABAHA

1) Wakaaladdu had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan, iyadoo ilaalinaysa sida habboon ee qawaaniinta iyo xeerarka qaranka ku xusan

2) Wakaaladdu waxay hawsheeda ku maamuli doontaa dakhliga kasoo xerooda hawsha ay qabato waana inay lacag u kaydisaa qiimaha alaabta, sida ugu haboon u maamushaa kaydkaas.

3) Xisaabaha wakaaladdu Wasiirka Wasaaradda Macdanta & Biyaha ama cid isaga ka wakiil ah ka sokow waxa kormeeri doona Laanta goonida ah ee Wakaaladaha Macdanta iyo Biyaha.

Qodobka 18aad

Qalabka iyo alaabta u soo dega Wakaaladda Biyaha Xamar lana xiriira soo saarka, socodsiinta iyo qaybinta biyaha,waxaa laga dhaafay canshuuddda furdada (import duty).

Qodobka 19aad

XEER GUUD

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu soo saaro xeer nidaamiye oo lagu faahfaahinayaa sharcigan laguna hirgelinayaa habka ugu wacan oo hawsha wakaaladda ay ku fulin doonto ama looga hortagaayo dhibaatooyinka ka iman kara fulinta xilka Wakaaladda.

Qodobka 20aad

TIRTIRID

Sharci ama xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 21aad

DHAQAN GELID

1) Sharcigan hore ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

2) Sharcigan waa inuu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah ee J.D.S.

3) Qof waliba waa inuu dhowraa, tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale inay dhawraan sharcigaa.-

Muqdisho 6 Abriile 1978

MADAXWEYANHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 20 Abriile 78, Xubno ka tirsan Golaha Dhexe ee lagu magacaabay kormeerayaal Gobalada.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarradoodu yihiin 1, 17, 18, 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay XHKS/3545/77 oo 18 Noofember 1977 oo ku saabsan Gunnooyinka Madaxda Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 21 ee soo baxay 27.11.1969 oo ku saabsan Gunnooyinka Wasiirrada Dawladda;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. yahay 3 ee soo baxay 5 Jen. 76, oo ku saabsan Gunnooyin habeen dhax ah ee Wasiirrada Dawladda ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 27 ee soo baxay 18 Setember 1976 oo ku saabsan gunno habeen dhax ee Golaha Dhexe ee XHKS,

ISAGOO AQOONSADAY : Baahida weyn ee loo qabo in Xubnaha Golaha Dhexe ee XHKS oo lagu magacaabay kormeerayaal Gobollada iyo kuwo loo xilsaaray hawlo khaas ah, ayadoo la tixgeliyey duruufta adag oo ay kala kulmayaan xagga nolosha;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aankii Golaha Dhexe ee XHKS 8-9 Febraayo 1978 ee ku saabsanaa in Xubno ka tirsan Golaha Dhexe lagu magacaabo Kormeerayaal Gobollada;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee HXKS ee 20ko Febraayo 1978;

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA :

Qodobka 1aad

Marka laga billaabo 12 Febraayo, 1978, Xubnaha Golaha Dhexe ee lagu magacaabay kormeerayaal Gobol waxay xaq u yeelanayaan gunno xil oo la siman tan ay qaataan bil kasta Madaxda Hoggaammada Golaha Dhexe ee XHKS iyo 2000 (Laba kun) Shilin oo gunno ha-

Qodobka 2aad

Gunnooyinka lagu tilmaamay Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa xaq u yeelan kara qof ka tirsan Golaha dhexe ee XHKS oo lagu magacaabay howl khaas ah oo la mid ah, ama la siman midda kormeerka joogtada ah ee Gobalallda.

Qodobka 3aad

Gunnooyinka ku xusan Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa la bixin karaa oo qura mudada uu qofku gudanayo waajibaadka iyo xilka khaas ah oo lagu caddeeyey qoraalkan ee uu saxiixay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhqaan geliyaa marka laga bilaabo 12 Febraayo 1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 10 Abr. 1978.

MADAXWEYANHA J.D.S.
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 23 ee 25 Jen. 1978 Dhismaha Qaabka Wasaaradda H. Guud.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharci lamb. 74 ee 3.6.1962 kuna saabsan dhismaha Qaabka Dawladda ee lagu Beddelay Xeerka Madaxweynaha J.D.S., lamb. yahay 198 ee 20 Juun, 1964;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 55aad ee Sharciga Shaqaalaha Dawladda lamb. yahay 29 soona baxay 1.4.1970 ;

ISAGOO ARKAY : Xeerka Madaxweynaha J.D.S. lamb. yahay 23 ee soo baxay 26 Sebteembar 1971 kuna saabsan Qaabka dhismaha Wasaaradda Hawlaha Guud;

IYADOO LA TIXGELINAYO : Baahida loo qabo in dib loo dhiso Qaabka Wasaaradda Hawlaha Guud kaddib markii la abuuray Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed.

IYADOO LA TIXGELINAYO : Talada Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud ;

MARKUU DHEGEYSTAY: Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ;

WUXUU XEEREEYEY :

Qodobka 1aad

In Dhismaha Qaabka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Xafiisyada hoos yimaado loo habeeyo sida hoos ku qoran, kaasi oo aan waxba ka baddaleyn tirada guud ee Waaxaha ;

+ WASIIRKA W. HAWLAHA GUUD
— AGAASIMAHA GUUD
— WAAXDA QORSHAYNTA IYO TABABARRADA
— WAAXDA MAAMULKA IYO SHAQAALAHA

Qodobka 2aad

Gunnooyinka lagu tilmaamay Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa xaq u yeelan kara qof ka tirsan Golaha dhexe ee XHKS oo lagu magacaabay howl khaas ah oo la mid ah, ama la siman midda kormeerka joogtada ah ee Gobalallda.

Qodobka 3aad

Gunnooyinka ku xusan Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa la bixin karaa oo qura mudada uu qofku gudanayo waajibaadka iyo xilka khaas ah oo lagu caddeeyey qoraalkan ee uu saxiixay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhqaan geliyaa marka laga bilaabo 12 Febraayo 1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 10 Abr. 1978.

MADAXWEYANHA J.D.S.
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 23 ee 25 Jen. 1978 Dhismaha Qaabka Wasaaradda H. Guud.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharci lamb. 74 ee 3.6.1962 kuna saabsan dhismaha Qaabka Dawladda ee lagu Beddelay Xeerka Madaxweynaha J.D.S., lamb. yahay 198 ee 20 Juun, 1964;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 55aad ee Sharciga Shaqaalaha Dawladda lamb. yahay 29 soona baxay 1.4.1970 ;

ISAGOO ARKAY : Xeerka Madaxweynaha J.D.S. lamb. yahay 25 ee soo baxay 26 Sebteembar 1971 kuna saabsan Qaabka dhismaha Wasaaradda Hawlaha Guud;

IYADOO LA TIXGELINAYO : Baahida loo qabo in dib loo dhiso Qaabka Wasaaradda Hawlaha Guud kaddib markii la abuuray Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed.

IYADOO LA TIXGELINAYO : Talada Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud ;

MARKUU DHEGEYSTAY: Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ;

WUXUU XEEREEYEY :

Qodobka 1aad

In Dhismaha Qaabka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Xafiisyada hoos yimaado loo habeeyo sida hoos ku qoran, kaasi oo aan waxba ka baddaleyn tirada guud ee Waaxaha ;

+ WASIIRKA W. HAWLAHA GUUD
— AGAASIMAHA GUUD
— WAAXDA QORSHAYNTA IYO TABABARRADA
— WAAXDA MAAMULKA IYO SHAQAALAHA

— WAAXDA MEKAANIKADA & HOOSOOYINKA

— WAAXDA JIDADKA

— WAAXDA DHISMAHA & DAYACTIRKA

— WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALOOYINKA.

— XUBNAHA GOBOLLADA.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan geliyaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho: 13.3.1978

MADAXWEYANHA J.D.S.

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

(W.S. Maxamed Xawaadle Madar)

Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud

N U Q U L.-

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 101

MUQDISHO, 5 APR. 1978

Ku Xigeenka Hantidhawraha Guud

Sax. Yuusuf Cali Nuur.-

XEER MADAXWENYAHA J.D.S., L. 24 ee 13 Maarso 78, In Jaalle Ardo Dhoore Guuleed la siiyo lacag dhan Shs. 35.000/- oo ah magdhaw.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 21 ee 3.2.1977 maamukla Gobollada iyo Degmooyinka;

ISAGOO ARKAY: Warqad lam. GG/8-1382 ee 31.3.1977 ee Agaasinkii hore ee Dowladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga;

ISAGOO ARKAY: Warqadihii Madaxtooyada kuna kala lambaraysnaayeen MJDS/S/2/A-710 ee 6.4.1977 MJDS S/2/A-755 ee 18.4.77 iyo MJDS/S/2/A-7627 ee 27.2.1978;

ISAGOO ARKAY: Warqaddii Wasaaradda Maaliyadda lambar 111/201/06 ee 12.3.1978;

ISAGOO TIXGELIYAY: Dambigii ay gashay qoladii ceelka ka qoday barkadda dusheed aiyo amarkii hore ee ahaa in berkadda Degmadu kala wareegto Jaalle Ardo Dhoorana loo celiyo qiimihii Barkadaha;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in arrintaas oo soo jiitamaysay muddo badan dhibaatadana ka gaartay Jaalel Ardo Dhoore xagga dhaqaalaha in si cadaalad ah lagu dhammeeyo;

ISAGOO DHAGAYTSAY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyada iyo Dowladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

In Jaalle Ardo Dhoore Guuleed la siiyo lacag dhan Shs. So. 35.000 oo ah magdhaw qiimihii laba (2 Barkadood ee ku yaal Tuulada Matabaan ee ka tirsan Degmada Beled-Weyn Gobolka Hiiraan ee go,aanka lagu gaaray (eeg warqadda Madaxtooyada lambar. MJDS/S/2/A-76 ee 27.2.1977

Qodobka 2aad

In Barkadaha ay la wareegto Degmada Beled-Weyne - Tuulada Matabaan, taasoo u dhisan sida ku qoran warqadda GH ee 31/140/QAR/77 ee 5.9.77 ee Gobolka Hiiraan.

Qodobka 3aad

In Guddoomiyaha Gobolka Hiiraan uu hubiyo la wareegidda barkadahaas iyo diiwaan gelinta barkadahaas oo ka mid noqonaya hantida Dawladda marka lacagta magdhawga gacanta laga saaro Jaalle ARDO DHOORE GUULEED.

Qodobka 4aad

Degmada Beled-weyne waa in ay bixisaa lacagta magdhawga kana bixisaa miisaaniyaddeeda sannadkan 1978.

Qodobka 5aad

Barkadaha waa in loogu isticmaalaa ilaha dhaqaalaha ee Degmada si habsami ahna loo maamulo.

Qodobka 6aad

Xeerkan wuxuu dhaqan geliyaa marku uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda Wasiirka Maailyadda

Muqdisho 13.3.1978

MADAXWEYANHA J.D.S.
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Wasiirka Dowladaha Hoose iyo H. Miyiga
S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib

Wasiirka Maaliyadda
Maxamuud Yusuf weyrax

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANEGLINAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 102
Muqdisho 6 Abriile 1978
ku xigeenka Hantidhowrka Guud

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 25 ee 16 Maarso 78, Magacaabid Maareeye Guud ee Wakaaladda Sahayda Maraakiibta Tirada Alaabta iyo soo bixinta dhoofinta alaabta.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada L. 17, 18, iyo 19 ee 1da Luulyo 76;

ISAGOO TIXGELINAAYA : Baahida loo qabo in la magacaabo Maareeye Guud ee Wakaaladda Sahayda Maraakiibta, Tirada Alaabta iyo soo bixinta-dhoofinta alaabta oo dhawaan la dhisay;

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda :

Qodobka 1aad

Waxaa Jaalle Maxamed Cabdi Cali Bardacad oo hadda ah Maareey eWaaxda soo Saaridda iyo Diridda Alaabta ee Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta loo magacaabay Maareeye Guud ee Wakaaladda Sahayda Maraakiibta, Tirada alaabta iyo soo bixinta-dhoofinta alaabta oo dhawaan la aasaasay.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan geleyaa markuu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 16 Mar. 1978

MADAXWEYNAHA JAM. DIM. SOOMAALYA

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaa Barre)

Waan Aragnay ee Diiwaan gelinay

Diiwaanka lam. 1 bogga 102

Muqdisho 6 Abriile 1978, ku

Xigeenka H. Guud

LIFAAQA KU XUSAN QODOBKA 14aad EE SHARCIGAN

QAYBTA SAHAYSIINTA IYO NADIIFINTA MARAAKIIBTA

1. Khidmadda hawleed ee sahaysiinta Maraakiibta waxaa laga qaadayaa sida soo socota :-

b) — Shs. So. 100/- ilaa Shs. So. 10.000/- oo lagu kharash gareeyo cunto loo iibinaayo Maraakiibta, amase alaab kale oo loo gado waxaa laga qaadayaa korsaar (per centuale) . . . Shs. So. 10%

t) — Shs. So. 10.000/- wixii ka badan oo Maraakiibta wax loogu soo iibiyo waxaa laga qaadayaa korsaar (Per centuale) Shs. 5%

2. — Khidmadda laga qaadayo wixii batrool ah ee la siiyo Maraakiibta, fuustadiiba ama galaan waa Shs. So. 2/-

3) — Khidmadda laga qaadayo biyaha la siinaayo maraakiibta 1) halkii tan waa . . . . . Shs. So. 55/-

QAYBTA SOO BIXINTA ALAABTA

4) — Khidmadda hawleed ee soo bixinta alaabta waxaa laga qaadayaa sida soo socota :

b)	1 Kiilo ilaa 50 Kiintaal	Shs. So. 300/-
t)	50 Kiintaal ilaa 100 kiintaal	» 400/-
j)	100 Kiintaal ilaa 500 oo kiintaal	» 800/-
x)	500 Kiintaal wixii ka badan waa taalkiiba.	Shs. So. 2/- kiin.

QAYBTA DIRIDDA ALAABTA

5. Khidmadda hawleed ee dhoofinta alaabta waxaa laga qaadayaa sida soo socota.

b)	1 kiilo ilaa 50 kiintaal	Shs. So. 350/-
t)	50 Kiintaal ilaa 100 kiintaal	» 450/-
j)	100 Kiintaal ilaa 500 oo kiintaal	» 1.000/-
x)	500 Kiintaal iyo wixii ka badan taalkiiba.	» 2/- kiin.

QAYBTA TIRADA ALAABTA SOO DEGTA IYO TAN LA DHOOFIYO

6. Khidmadda hawleed ee tirada alaabta soo degta iyo tan la dhoofinaayo waxa laga qaadayaa sida soo socota :-

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 26 ee 1 Abr. 1978, Magacaadib Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashido 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda H. iyo Tacliinta Sare.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle Axmed Ashkir Bootaan waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda H. iyo Tacliinta Sare.-

Qodobka 2aad

Dhaqan Gelin

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

(Jaalle S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 27 ee 1 Abr. 1978, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka.-

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka looga bilaabo 1da Arbiile 1978, Jaalle Keenadiid Axmed Yuusuf waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka, Cirka iyo dhulka

Qodobka 2aad

(Dhaqan Gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIM. SOOMAALYA

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaa Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 28 ee 1 Abr. 1978, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY: Qaanuunka ku saabsan Dhismaha dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradd aGarsoorka iyo Arrimaha Diinta.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle Axmed Shire Maxamuud waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

Qodobka 2aad

(Dhaqan gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

(Jaalle S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 29 ee 1 Abr. 1978 Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Beeraha.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda Beeraha.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laba bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle G/Sare Axmed Xasan Muuse waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

Qodobka 2aad

(Dhaqan Gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

(Jaalle S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 30 ee 1 Abr. 1978, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaamo Wasiir Wasaaradda Warfaafinta iyo H. D. W.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle Cabdisalaam Shiikh Xuseen waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.

Qodobka 2aad

(Dheqan Gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

(Jaalle S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 31 ee 1 Abr. 1978, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1d Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da luulyo 1976;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda Ganacsiga.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle Maxamed Ibraahim Axmed waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

Qodobka 2aad

(Dhaqan Gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOO. SOOMAALY/

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 32 ee 1 Abr. 1978, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Dawladda Hoose iyo H.R.M.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo H.R.M.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo H.R.M.

Qodobka 2aad

(Dhaqan Gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

Muqdisho; 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 33 ee 1 Abr. 1978, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada;

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle Maxamed Buraale Ismaaciil waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Qodobka 2aad

(Dhaqan Gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho. 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 34 ee 1da Abriille 1978 Magacaabid Wasiirka Wasaarada Isboortiga.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Qhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda Isboortiga;

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle Cabdiqaasim Salaad Xasan waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Isboortiga.

Qodobka 2aad

(Dhaqan Gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abriile 1978,

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

(Jaalle S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 35 ee 1 Abr. 1978, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 oo soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddel laadii ka dambeysey ;

ISAGOO TIXGELINAAYA : In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wasiir Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.

Qodobka 2aad

(Dhaqan Gelin)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

(Jaalle S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 36 ee 1 Abr. 1978, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

MARKUU ARKAY : Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeysey ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda Madaxtooyada J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii ka soo baxay Guddiga Siyaasadda Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Magacaabid Wasiir)

Marka laga bilaabo 1da Abriile 1978, Jaalle Cumar Carte Qaalib waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada J.D.S.

Qodobka 2aad

(Dhaqan Gelin

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 1.4.1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abriile 1978.

MADAXWEYNAHA JAM. DIMOQ. SOOMAALYA

(Jaalle S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA SDADEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED)BAYL)

Waxaa dhammaan laysagu yeerayaa saamileyda Shariikadda Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (Bayl) inay ka soo qayb galaan shirka saamileyda caadiga iyo aan caadiga ahayn oo lagu qaban doono xarunta shariikadda ee Xamar, saacaddu maraky tahay 17/ama shanta galabnimo, bisha Maajo 23keeda, 1978ka, hadduu Shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maajo maalinta ay tahay 30ka isku saacadda kor ku qoron:

Saamileyda Shariikadda oo lahaashada saamiyaasha ku qoranu aaney ka hubsaneyn Maamulka Shariikadda «Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (BAYL), waxaa laga codsanaya inay shan maalmood ka hor ay keenaan saamiyaasha saldhigga Shariikadda ilaa intii Shirku ka dhammaado.

ARRIMAHA DOODDA

1) Oggolaadka dheellitirka xisaabaadkii sannadkii 1977ka
2) Kordhinta Raasumaalka Shirkadda
3) Wixii kale ee soo raaca ee door la bido in laga doodo:

Muqdisho, 20/4/1978

GUDDIGA MAAMULKA

L. 214

OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSKA IYO MARISKA

Waxaa dhammaan laysagu yeerayaa saamileyda Shariikadda Warshadda Saabuunta QUbeyska iyo Mariska inay ka soo qayb galaan Shirka saamileyda caadiga ah oo lagu qaban doono xarunta Shiriikadda ee Xamar, saacaddu markay tahay 17/ama shanta galabnimo, bisha Juunyo 4teeda 1978ka, hadduu Shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Juunyo 11keeda saacadda kor ku qoran.

Saamileyda Shariikadda waxaa laga codsanayaa in ay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran saldhigga Shariikadda ilaa iyo intii Shirku ka dhammaado.

ARRIMAHA DOODDA:

1) Oggolaadka dheellitirka xisaabaadkii sannadkii 1977ka,
2) Wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga doodo.

Muqdisho, 20/4/1978

GUDDIGA MAAMULKA

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU: Arkay dacwadda kor ku qoran;

MARKUU: Arkay waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU: Arkay qod. 69 D.L.9/9/65 N. 2; lumidda Buuga keydka L. 11350 oy ku qoran tahay di Sh.S. 14.507 bangiga ganacsiga iyo keydka L. 2aad.

WUXUU AMRAYAA/

In loo cusboneysiiyo Buuga keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub la sameyn doono gacanta la saaro MAXAMED XASAN AXMED ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 15.4.78

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA dhapM
Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir
(Cabdullahi Daahir Barre)

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HDAUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

HADUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogaysiiska Bangiga;

HADUU ARKAY: qod. 69 D.L.9/9/65 N.2 lumidda Buugga kaydka L. 11433 oy ku qora tahay di ShS. 1.108, Bangiga Gancsiga iyo kaydka L. 2aad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buugga kaydka ka dib markii ay ka soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Cabdulqaadir Muuse Maxamuud ama qof isaga sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 25 4 1978.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

(Cabdullaahi Daahir Barre)

L. 215/Bis

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho 1da Maajo 1978 L. 5

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

SAXID QALAD

Waxaa la tirtiray lifaaqa xeerka Madaxweynaha J.D.S. tir. yahay 25 ee 16.3.1978 kuna soo baxay Faafinta Rasmiga lam. 2 R 4 taariikh 25.4.1978.

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER WASAARADA HAWLAHA GUUD L. 37 ee 15 Feberaayo 1978, Dhul Dawladeed la siiyay gacantana loo geliyay Jaalle Xaaji Xasan Cusmaan — Bogga 244

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 38 ee 18 Febaraayo 1978 Qaadid Guri dan guud awgeed ee waqti hore lahaa Moxamedali M. Cabdullaahi — » 246

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 39 ee 7 Maarso 1978, qaadid Derbi wareegsan iyo marshibiyeedi dan guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Jaale Maxamed Cali Dacar. — » 248

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 40 ee 16 Maarso 1978, qaadid guri dan guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Jaalle Maxamed Cabdullaahi Faarax » 250

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 41 ee 16 Maarso 78, Qaadid guri ZL/3/11 dan guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Bulella Antonio. » 252

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 42 ee 16 Maarso 1978 Qaadid guri dan guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Xaaji Cumar Maqadam. » 253

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGAYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaale Maxamed Cawaale Fariid L. 216 » 255

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Dhame Maxamuud Nuur L. 217

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Xaawo Xirsi Jaamac L. 218 » 256

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaale Shamsa Xaaji Faarax L. 219

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Jaamac Yuusuf Cabdullaahi L. 220 » 257

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaaaae Cabdi Cusmaan Saciid L. 221

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Muumin Kulmiye Saydow L. 222 » 258

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Cabdiqafaar Xaaji Xuseen L. 223

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Safiya Sheekh Cali L. 224 » 259

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Faarax Cigaal L. 225

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Ibraahim Taani L. 229

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Xabiiba Faarax Nuur L. 230 » 262

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Rufaaci Xaaji Munye L. 231

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Cabdalla Xuseen Beexaani L. 232 » 263

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Xaaji Yuusuf Cali Yuusuf L. 233

WARSHADDA DHEEFTA XOOLAHA ee Xiirey Qaasim Weheliye L. 233/Bis. » 264

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 1.4.78, lumid jeega wareega L. 206204 ku qoran ShS. 3.000/ uu leeyahay Maxamed Geedi Ibraahim L. 234

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, lumid Jeeg wareega lamb. 109973 ku qoran Shs. 50.000/- uu leeyahay Xuseen Xasan Jaamac L. 234/Bis. » 265

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Caydaruus Maydhane Warsame L. 226 » 260

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Idiris Maydhane Warsame L. 227

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30.3.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Maydhane Warsame L. 228 » 261

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 37 ee 15 Feb. 78, Duhl Dowladeed la siiyey gacantana loo geliyey Xaaji Xasan Cusmaan.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

—WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA—

ANNAGOO ARAGNAY: Warqaddii koowaad, labaad iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ANNGOO ARAGNAY: Sharciyada lamb. yihiin 17,18,19, soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kasaanka Soomaaliyeed;

ANAGOO ARAGNAY: Xeerka Sharcigan dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Settembar 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 144 soona baxday 23kii Maajo 1961;

ISAGOO ARAKY: Arjigii uu keensaday Cali Maxamed Hiraawe, taariikdhu markay ahayd 7.10.1961, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSAN : Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaanna loogu dhajiyey looxa Dowladda Hoose ee Xmaar ,laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, iyadoo aan cidna horistaagin ;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. yahay 12800, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horey u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho — fadhigoodi 300aad taariikhduna ahayd 19 NOF. 1962;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 111 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 12800 laguna aqoonsaday fadhigii 14-aad ee Guddiga Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. kana ahaa Guddoomiye Inj. Xaashi Axmed Ceydiid taariikhdu markay ahayd 3/9/1977, kuna saabsaneed dhismo guri kuna fadhiya mq. 900 ;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. yahay 5333 ee 8 Jen. 1963 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Cali Maxamed Hiraawe uu bixiyey lacag dhan Sh. So. 900/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1800/= loona tiriyey Cali Maxamed Xiraawe sida ku cad xaashi daay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna 13/5/1963;

ISAGOO ARKAY: Xaqiijintii farsamada Sah. Aadan Xaashi Nuur kana tirsan Waaxda Farsamada dhulka ee W.H.G. taariikh. tahay 26/11/1977 taas oo caddeyneys ain naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Waaxda Dhismaha iyo dhulka ee W.H.G. lamb. 111 taariikhdeeduna ahayd 27/1/1977 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu Guriga waafaqsan tahay — kuna fadhiya mq. 900;

ISAGOO ARKAY: Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada Guriga ku dhisan Xamar Degmada Hodan Jidka 26 Juun laguna siiyey xaashida lamb. 3025 ee 17/10/1977 ee Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lamb. 2547 Rep. taariikh. 1 Juunyo 1974 lagu diiwaan geliyey Xamar — 3/6/1974 lamb. 169, Qoraal Dowladeed Buugga lamb. 20 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Maxamed Xasan Jasti, taas oo Cali Maxamed Xiraawe ka gaday kuna wareejiyey Xaaji Axmed Ibraahim Jaamac wax allaale wix iixuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 900/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Hodan;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lamb. 5988 Rep Taariikh. 15 Jennayo 1976, lagu diiwaan geliyey Xamar, 17/1/1976 lamb. 12 Atti Publici Vol. 22.00 ah caddeynta N taa yada Dr. Muuse Xusseen Saadiq, taas oo Xaaji Axmed Xaaji Ibraahim Jaamac wuxuu ka gaday kuna wareejiyey Xasan Cusmaan Maxamed kana wakiil ahaa Isaaq Cusmaan Maxmed, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabasn cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 900/= kuna yaal Degmada Hodan — iidka 26 Juun;

ISAGOO ARKAY: nI la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladeed (Concenssione e conseguente libera disponsibilita) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, wuxuu soo saaraya

XEER

B) Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsadav Xaaji Xasan Cusmaan Maxamed, dhul k ufadhiya mq. 900/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Hodan — Iidka 26 Juun.

Soohdmaha waa sida hoos ku qoran yahay:-

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo, koonfur waxaa ka xiga Cali Ceydi Cabdi, Galbeed waxaa ka xiga Waddo Bari waxaa ka xiga Cali Maxamed Hiraawe.

T) Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyey, Cali Maxamed Xiraawe, oo ku fadhiya mq. 900/= ku yaal Degmada Hodan — Iidka 26 Juun.

Muq. 15 Feb. 1978

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 7.

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 38 ee 18 Feb. 1978, Qaadid guri dan guud awgeed ee woqti hore uu lohaa M. Maxamed Cali M. Cabdullahi & Bros oo ay la wareegtay Wasaaradda Gaadiidka kuna ag yaal Xarunta Wasaaraddo.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

—WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA—

ANNAGOO ARAGNAY: Warqaddii koowaad, labaad iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ANNGOO ARAGNAY: Sharciyada lamb. yihiin 17,18,19, soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kasaanka Soomaaliyeed;

ANAGOO ARAGNAY: Xeerka Sharcigan dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Settembar 1973;

ANNAGOO ARAGNAY: Xeer Dawladeed lamb. 10612 ee 29.12.1934 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah, lamb. 2 taariikhduna ahayd 15 Jannaayo 1935, taas oo lagu siiyay Jaalle Fernando Brakko, dhul ku fadhiya mq. 1.200;

Qofkii danaynaya Dhulkaas wuxuu Si Fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulkaas oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa mudo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 29 Abr. 1978.

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalooyinka
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Bashiir Xaaji Maxamed Kulmiye uu soo qortay Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 7.1.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar Degmada Yaaq shiid Qaabkiisuna yahay Retangolar Addimihiisuna yihiin 20X30 lana mid ah 600/- Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waeeaa ka xiga : Waddo
Koofur waxaa ka xiga : Dhul lam. 431 Y.
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 430 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 434 Y.

Qofkii danaynaya Dhulkaas wuxuu Si Fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulkaas oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa mudo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 29 Abr. 1978.

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalooyinka
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 314

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Goodax Barre uu soo qortay Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 7.1.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar Degmada Yaaqshiid Qaabkiisuna yahay Retangolar Addimihiisuna yihiin 20X30 lana mid ah 600/- Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koofur waxaa ka xiga : Dhul lam. 525 Y
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 524 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 528 Y.

Oofkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi waraa muddo (Soddon) maamood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 29 Abr. 1978.

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalooyinka
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 315

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA
BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle, Xaaji Maxamed Faarax maalintii 30.4.1951 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada H. Wadaag Qaabkiisuna ahaa Retangolo Addmiihiisuna ahaayeen, 30X40 kuna fadhiya, 1200 Mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid jidka 21 Okt. sidaas aawgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa, WHG/3/23/491 oo ka baxday Xafiiskan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman :-

Dhlka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-shiid Jidka 21 Oktoobar Qaabkiisuna waa Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 40×30 kuna fadhiya 1200. mdh. soohdimihiisuna waa sida hoos ku qorn:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 1068-1069 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 1022 Y.-/=
Muqdisho 2 Maajo 1978

Agaasimaha Waaxda Sahanka & Deg. Magaalaynta
L. 316 In. Cabdikariin C. Guuuuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA
BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle, Xaaji Maxamuud Afrax maalintii 30.4.1951 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada H. Wadaag, Qaabkiisuna ahaa Regtangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X40 kuna fadhiya 1200 mdh looga qaaday danta guud, looguna bed. dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-shiid Jidka 21 Oktoobar sidaas aawgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lamabarkeedu ahaa WHG/3/23/481 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu bedeshay sid ahoos ku tilmaaman:

Dhulka loo bddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid jidka 21ka Oktoobar Qaabkiisuna waa. Retangolar Addimihiisuna yihiin 40X30 kuna fadhiya 1200 Mdh. Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran :-

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam. 1068-1069. Y
Waqooyi waxaa ka xiga : Wadda
Galbeed waxaa ka xiga : Wadda
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 1022 Y.
Muqdisho, 7 Maajo 1978

Agaasimaha Waaxda Sahanka & Deg. Magaalaynta
In. Cabdikariin C. Guuuuleed

L. 317

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA
BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle, Maxamed Faarax Nuur maalintii 3.2.77 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Hodan Qaabkiisuna ahaa Retangola rAddimihiisuna ahaayeen 20X30 kuna fadhiya, 600/- Mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid jidka 21 Okt. sidaas aawgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/121 ee 77, oo ka baxday Xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman :-

Dhulka looga beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid jidka 21ka Okt. Qaabkiisuna waa Retangolo Addimihiisuna waa sida hoos ku qoran :

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 812 Y
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 809 Y
Bari waxaa ka xiga: Dhul lam. 813 Y

Muqdisho, 7 Maajo 1978

Agaasimaha Waaxda sah. iyo Degaanka Magaalooyinka
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 318

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA
BEDDELAAD NAADO DUHL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle, Cumar Shariif Cabdulqaadir Abuukar maalintii 10.9.1961 loona ogolaaday oo uuku yiil Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna ahaa Regtangolaare Adimihiisuna ahaayeen 38.50×50 kuna fadhiyay, 1925 mdh. looga qaaday danta guud, looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-shiid Jidka 21 Oktoobar sidaas aawgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa BF./1201/2047/62 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhul loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-shiid Jidka 21 Oktoobar qaabkiisuna waa Regtangolaare Adimihiisuna yihiin 30×40 kuna fadhiya 1200 mdh. soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa kaxiga: Dhul lam. 1038-1041 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 1938 Y
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 7 Maajo 1978

Agaasimaha Waaxda Sahanka & Deg. Magaalaynta

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA

BEDDELAAD DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle, Abuukar Cusmaan IIbraahim maalintii 17.2.62 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Liido Qaabkiisuna ahaa Trebesiyo Addimihiisuna ahaayeen (45+38) kuna fadhiya 2780 mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid jidka 21 Okt. sidaas aawgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa, 548382/62 oo ka baxday Xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman :-

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid jidka 21 Okt. Qaabkiisuna waa Retangolar Addimihiisuna yihiin, 20X30 kuna fadhiya 600/. Mdh. Soohdimihiisuna waa sida hoos ku tilmaaman :-

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam. 803 Y
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 806 Y

Muqdisho, 7 Maajo 1978.

Agaasimaha Waaxda Sahanka & Deg. Magaalaynta
In. Cabdikariin C. Guuuuleed

L. 320

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

GO'AAN DEG DEG AH LR. 245 EE 14.5.78

UJEEDDO : **Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad**

Go'aan Lr. 245 ee Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Muqdisho, ay ku qaateen deg deg ahaan, ayagoo u cuskanaya qodobka Lr. 12 Xubintiisa 4aad ee Xeerka Lr. 6 ee 19kii Oktoobar, 1968, laguna beddelay Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofeembar, 1968.

Jaalle Maxamuud Jmaaac Axmed — Guddoomiye

Jaalle Maxamuud Maxamed Nuur — Agaasimaha Guud

MARKAY ARKEEN : Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga dibadda ee awood siinaya Bankiga Dheexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna bedelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA: Isbedelka qiimaha lacagta qalaad ee saamaynaya ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta, Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeenna.

MARKII LA HUBSADAY: La,aanta Gudiga Maamulka Bankiga.

MARKII LOO BAAHDAY: Sidaas darteed in la qaato go,aan degdeg ah.

WAXAY GUDDOONSADEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horayna loogu caddeeyay Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 14.5.78 waxaa go,aankan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Lacagta Qalaad		Heerka iibsashada oo Sh. So. ah	Heerka gad. oo Sh. So. ah
US$	1.00	6.2327	6.3573
UK£	1.00	11.7168	11.9511
DM.	1.00	3.0311	3.0917
LIT.	141.44	1.0000	———
LIT.	138.67	———	1.0000
FR. FR.	1.00	1.3658	1.3931
SW. FR.	1.00	3.2340	3.2987
DJ. FR	1.00	0.03525	0.03596
SRI	1.00	1.7576	1.7928
KD.	1.00	21.7521	22.1871
UAE DH.	1.00	1.6068	1.6389

BAN. DH. EE SOOMAALIYA
Agaasimaha Guud

BAN. DH. EE SOOMAALIYA
Guddoomiyaha

L. 321

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA M. G. BANAADIR

HADUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARUU ARKAY :waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

HDDUU ARKAY: qod. 69.D.L.9/9/65 N,2 lumidda Jeeg warcega lam 085496 kuna qoran tahay Sh.So. 419/ Bangiga Ganacsiga iyo kaydka Soomaaliyeed.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeeg wareega ka dib markii ay ka soo wareegato 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegaga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Muuse Ibraahim Cali ama qof isaga ka sita wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo mudo 15 shan iyo toban maalmood ah ee aan ku soo sheegnay.

Muqdisho 18 5 1978

Gudoomiyaha Maxkamada G. Banaadir
(Dr. Axmed Xasan Sheekh)

L. 322

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA M. G. BANAADIR

HADUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogesiiska Bangiga;

HADUU ARKAY: qod 69 D.L.9/9/65 N.2 lumidda Buugga Kaydka L. 13438 oy ku qoran tahay di Sh.So. 250/= Bangiga ganacsiga L.2aad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buuga kaydka ka dib markii ay soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Yuusuf Xasan Geedi ama qof isla isaga ka sita wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay

Muqdisho 21 5 1978

Gudoomiyaha Maxkamada G. Banaadir
(Dr. Axmed Xasan Sheekh)

L. 323

MAXKAMADDA GOBALKA BARI

HADUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran,

HADUU ARAKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogesiiska Bankiga :

HADUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9/9/65 No.2; lumidda Jeegaga lam. yihiin 11612 oo ku qoran Sh. o 750/ waxaana markii hore ku qornaa Abiib Diiriye Nuur iyo Jeeg lamb. 100334 Shs.So. 450/

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo laba Jeeg ee aan kor ku soo sheegnay ka dib markii ay ka soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegaga cusb ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamuud Xuseen Xasan ama qof isla isaga ka sita wakaalada sharci ah, ayadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Boosaaso 10 1 1976

L. 324

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB. BARI

Sh. Axmed Cabdulle Habarwaa

SOCIETA, PER AZIONI «MORODI» SEDE IN MOGADISCIO

Saldhigga: Muqdisho (J.D. Soomaaliya)

Ra, asumaal Shs So 2.000.000,00

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha shirkadda «MARODI» waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Xamar, Xafiiska Rag. Arturo Salvi, maalinta 17ka Juunyo 1978, saacaddu 10ka subaxnimo fadhiga ugu horeeya, hadii taas suura gaiiwaydo, waxaa mar labaad la isu iman doonaa maalinta 18ka Juunyo 78 isla saacadda iyo isla meesha sida kor ku qoran, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda :

BARNAAMIJKA DOODA

1) Warbixinta Gudiga Maamulka iyo Gudiga Baarayaasha;

2) Miisaaniyada iyo Dheef-Daynta la la xiray 31.12.76 iyo 31.12.1977 iyo go'aannada la xiriira ;

3) Magacaabid Guddiga Maamulka, iyadoo la xadidaayo tirada xubinyada :

4) Magacaabid Gudiga Baarayaasha sida uu sharcigu qabo.

waxaa xaq u leh in ay shirkadda ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran Buuga xubnaha shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oo na ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga Shirkadda ee Muqdisho, amase xafiiska Rag. Arturo Salvi ee Muqdisho.
disho, amase xafiiska Rag. Arturo Salvi ee Muqdisho.

GUDIGA MAAMULKA

SOCIETA, PER AZIONI «MORODI» SEDE IN MOGADICIO

Capitale sociale versato Shs. So. 2.000.000

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli azionisti della società per azioni «MORODI» sono convocati in Assemblea Ordinaria in Mogadiscio, presso lo Studio Commerciale Rag Arturo Salvi, in giorno 17 giugno 1978 alle ore 10 prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazioe il giorno 18 giugno 1978 alla stessa ora e nello stessso luogo, per deliberare sul seguente :

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale ;

2) Bilanci e conti Perdite & Profitti degli esercizi chiusi al 31 dicembre 1976 e 31 dicembre 1977 e deliberazioni relative ;

3) Nomina del Consiglio di Amministrazione previa determinazione del numero dei suoi componenti ;

4) Nomina del Collegio Sindacale a norma di legge.

Avranno diritto di partecipazione all'Assemblea gli Azionisti scritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro lo stesso termine abbiano effettuato il deposito delle loro azioni presso la sede sociale - Studio Commerciale Rag. A. Salvi in Mogadiscio.

IL CONSIGLIOI DI AMMINISTRAZIONE

IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQORAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 25 Juunyo 1978 L. 2 R 6

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAADD

SHARCI

SHARCI L. 26 ee 3 Maajo 78, Sharciga habeeyey Dhaqaalaha Xubnaha C.Q.S. iyo Mutodawiciinta Raaciyada ah ee ku geeriyooda ama ku Naafooba Dagaalka . Bogga 394

SHARCI L. 27 ee 1 Juun 78, Midaynta Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Wakaaladda Gaadiidka Badda.- » 397

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 53 ee 6 Abr. 78, Magacaabid La-Taliyaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha.- » 398

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 54 ee 6 Abr. 78, Magacaabid La-Taliyaha Dhanka Sharciga ee Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha. » 399

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 55 ee 2 Maajo 78, Magdhaw Sharikado la Toleeyay.- » 400

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 56 ee 21 Maajo 78, Hoos u dhig hal darajo Cabdullaahi Macallin Maxamed iyo Saddexda kale oo la ganaaxay. » 401

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 57, ee 1 Juunyo 778, Magacaabid Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda.- » 403

XEER WASAARADDA BOOSTA IYO ISG, L. 58 ee 23 Maajo 78, Sameeyn Tacriifa Cusub ee Telekiska Dalka Gudihiisa.- » 404

XEER WASAARADDA BOOSTA IYO ISG. L. 59 ee 23 Maajo 78, Tigidho cusub oo lagu magacaabo Laaji'iinta Falastiin iyo Xuquuqdooda.- » 406

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 17.6.78, Lumid Buug Lamb. 6824, kuna qoran Sh. So. 4070 ay leedahay Xaajiya Faaduma Sheekh Isgow L. 342 » 407

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 22.5.78, Lumid Buugga Kaydka L. 10206 ku qoran Sh. So. 299 uu leeayhay Maxamed Afrax Dhiblawe 343 » 408

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, 1,6.78, Lumid Jeegga War. L. 15283 ku qoran Sh. So. 4502/50 uu leeyahay Qaybta Booliska Gob. Waqooyi Galbeed - Hargeysa L. 344 » 409

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 7.6.78, Lumid Buugga Kaydka L. 12.314 ku qoran Sh. So. ay leedahay Madiina Nuur Cali L. 345 » 410

MAXKAMADDA GOBALKA MUDUG, 21.6.78 lumid Buugga kaydka L. 1685 ku qoran Sh. So. 302/60 u leeyahay Maxamed Kulmiye Barkhadle L. 346

OCEANTRAC S.p.A. - SHIRKAD CUSUB OO LA DHISAY, L. 347 » 411

OCEANTRAC S.P.A. - CONTITUZIONE DI SOCIETA SHIRKADDA MORODI, Ogaysiis Isu yeerid fadhi Caadi ah iyo mid aan caadi ahayn. » 412

SHARCI L. 26 ee 3 Maajo 78, Habeeyey Dhaqaalaha Xubnaha C.Q.S. iyo Mutadawiciinta Raaciyada ah ee ku Geeriyooda ama ku Naafooda Dagaalka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada Lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1dii Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARAKAY : Sharciga Lambarkiisu yahay 8, ee soo baxay 30 Maarso 1965 ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay lagama maarmaan tahay in la soo saaro Sharci habeeya Xuquuqda Dagaalyahaannada iyo dadka iyaga dhaxla ;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aanka Guddgia Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA :

Qodobka 1aad

DHAQAALAHA CARRUURTA YAR-YARKA AH EE XUBINTA C.Q.S. KA MID AH EE KU GEERIYOODA

DAGAALKA

Carruurta yar-yarka ah ee ay ka tagaan Xubnaha C.Q.S. kuna Geeriyooda Dagaalka, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo bil walba, hadba midka ay ka mutaystaan Hawlgabyada soo socda, ilaa ay ka gaaraan 16 Sannadood.

— 60% Gundhigga Mushaharkii ugu dambeeyey ee uu qaadan jirey la dhaxluhu haddii uu Hawsha Ciidammada hayey muddo ka yar 10 (Toban) Sannadood.

— 70% haddii la dhaxluhu Hawsha Ciidammada hayey muddo ka yar 20 (Labaatan) Sannadood ;

— 80% haddii la dhaxluhu Hawsha Ciidammada hayey

Qodobka 2aad

DHAQAALAHA DHAXLAYAASHA XUBINTA C.Q.S. KA MID AH EE KU GEERIYOODA DAGAALKA OO AAN KA TEGIN CARRUUR KA YAR 16 SANNADOOD

1) Dhaxlayaasha Xubinta C.Q.S. ka mid ah ee ku geeriyooda Dagaalka ee aan ka tegin Carruur yar-ya r(Kuwo aan gaarin 16 Sannadood), waxay xaq u leeyihiin in la siiyo Liiltir dhan Sh. So. 5.000/- (Shan Kun oo Shilin), haddii la dhaxluhu Hawsha Ciidammada hayey muddo ka yar 10 Sannadood; Sh. So. 10.000/- (Toban Kun oo Shilin). Had dii la dhaxaluhu Hawsha Ciidammada hayey muddo dhan Toban Sannadood ama wax ka badan.

2) Xaqa ku xusan Xubinta Kowaad, waxaa mutaysta dhaxalayaasha uu wadarta Liiltirkoodu ka yar yahay kan ku yaal Xubinta Labaad iyo tan Saddexaad ee Qodobka 19aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 6 ee 31 Disheembar 1969. Dhaxlayaasha uu u roon yahay, waxaa lagu xaqsiinayaa Qodobka 19aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 6 ee 31 Disheembar 1969.

Qodobka 3aad

DHAQAALAHA XUBINTA C.Q.S. KA MID AH EE KU NAAFOOBA DAGAALKA (NAAFO DHAN)

Xubinta C.Q.S. ka mid ah oo ay ku gaarto Dagaalka Naafo Culus (Waa marka uusan Shaqayn karin), wuxuu xaq u leeyahay inta uu nool yahay Hawlgab dhan 100% oo ah Gundhigga Mushaharkii uu qaadan jiray marka uu Naafoobay.

Qodobka 4aad

DHAQAALAHA SHAQAALAHA DAWLADDA EE AAN KA TIRSANAYN C.Q.S. KUNA GEERIYOODA AMA KU NAAFOOBA DAGAALKA

1) Shaqaalaha Dawladda ee aan ka tirsanayn C.Q.S., hadday Geeriyoodaan ama Naafoobaan, iyagoo kula jira Dagaalka Ciidammada Qalabka Sida, waxay la mid yihiin xagga Xuquuqda, Xubnaha C.Q.S. ka mid ah waxaana lagu xaqsiinayaa Qodobka 1aad, 2aad iyo kan 3aad ee Sharcigaan

2) Xuquuqda ku taal Qodobka 1aad, 2aad iyo kan 3aad ee Sharcigaan ee ay mutaystaan Shaqaalaha Dawladda ee ku xusan Xubinta Sare ee Qodobkaan, waxay ku leeyihiin Wasaaradda ama Wakaaladda Dawladda oo ay ka tirsan yihiin.

Qodobka 5aad

DHAQAALAHA MUTADAWICIINTA RAACIYADA AH EE KU GEERIYOODA AMA KU NAAFOOBA DAGAALKA

1) Dhaxlayaasha Mutadawiciinta Raaciyada ah ee ku Geeriyooda Dagaalka iyagoo la safan Ciidammada Qalabka Sida, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo Liiltir dhan Sh. So. 5.000/— (Shan Kun oo Shilin).

2) Mutadawiciinta Raaciyada ah oo ay ku gaarto Dagaalka Naafo dhan, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo Liiltir dhan 10.000/— (Toban Kun oo shilin).

3) Mutadawiciinta Raaciyada ah ee ku xusan Xubnaha hore, waxaa la geliyaa Diiwaan gaar ah marka ay aadayaan Goobta Dagaalka.

Qodobka 6aad

GUDDIGA CAAFIMAADKA EE QIIMEYNTA

Qiimeynta Naafada ee Sharcigaani ka hadlaayo, waxaa loo xil saaray Guddiga joogtada ah ee Caafimaadka ee ku xusan Qodobka 11aad Xubinta 3aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 6 ee 31.12.1969.

Qodobka 7aad

B U R I N

Sharci ama Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigaan waa la buriyey.

Qodobka 8aad

DHAQAN GELID

Sharcigani wuxuu Dhaqan gelayaa maalintii uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka:

Muqdisho 3 Maajo 1978

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 27 Midaynta Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Wakaaladda Gaadiidka Badda.

MADAXWAYNAHA
J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 22 ee 23kii Febaraayo 1975 Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;
ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 17,18,19 ee 1dii Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 22 ee 23kii Febaraayo 1975 ee lagu dhisay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 69 ee 12kii Nofember 1977 ee lagu dhisay Wakaaladda Gaadiidka Badda.
ISAGOO TIXGELINAYA: Go,aankii Gudiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S. ee 27-28 Maajo 1978

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Laga bilaabo 1da Juun 1978, labadii Wakaaladood oo la kala oran jiray Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Wakaaladda Gaadiidka Badda waa la mideeyay, waxaana loo baxshay

WAKAALADDA HAWLAHA MARAAKIIBTA IYO GAADIIDKA BADDA.

Wakaaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda waxaa lagu meeleeyay darajada «A»

1- Wakaaladdu waxay la wareegtay Hantida iyo Xilkii maamulka iyo xoolihii (obbligazione attive e passiva) ee labadii Wakaaladood ee la mideeyay.

2- Shaqaalihii labada Wakaaladood ee la mideeyay iyo xuquuqdooda waxaa la wareegtay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Juun 1978, waxaana lagu soo saari doonaaFaafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Juunyo 1978

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxwaynaha J.D.S.

XEER Madaxwaynaha J.D.S. L. 53 ee 6 Abriil 1978 Magacaabid La-Taliye Gudiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. 17,18,19 ee 1.7.1976 ee habka Maamulka Dalka oo loo wareejiyay X.H.K.S.;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 19 ee 10.4.78 ee lagu habeeyey laguna dhisay Gudiga Ibka iyo Houdhigidda Dhaqaalaha ;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha loo magacaabo qof La-Taliye ah oo dhanka Bankiyada aqoon dheer iyo cilmi u leh ;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S.

WUXUU XEERAYAA :

Qodobka 1aad

M A G A C A A B I D

Jaalle Shariif Seyn Abò Imaankiyo oo ahaa Agaasimaha Guud ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay La-Taliye dhanka Bankiyada ee Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha.

XUQUUQDA SHARCIGA IYO DHAQAALAHA

1. Jaalle Shariif Seyn Abò Imaankiyo, wuxuu yeelanayaa dhanka dhaqaalaha xuquuqda ay leeyihiin Guldoomiye Ku-Xigeennada ee X.H.K.S.

Qodobka 2aad

DHAQAN GELID

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.DS.., waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 6.4.1978

Madaxwaynaha J.D.S.
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaan gelinay
Diiwaanka lam. bog. 69.
Ku Simaha Hantidhawrka Guud
Muqdisho 29 Maajo 78

XEER Madaxwaynaha J.DS. L. 54 ee 6 Abriile 1978 Magacaabid La-Taliye Dhanka Sharciga ee Gudiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. 17,18,19 ee 1 Luulyo 1976 ee Habka Maamulka Dawladda oo loo wareejiyey Xisbiga H.K.S.,

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 19 ee 10.4.1978 ee lagu habeeyay iyo lagu dhisay Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha loo magacaabaa qaf La-Taliye dhanka sharciga oo aqoon dheer iyo cilmi u leh qaynuunada,

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee Xisbiga H.K.S.

WUXUU XEERAYAA :

MAGACAABID

Qodbka 1aad

Jaalle Dr. Cabdullaahi Muuse Yuusuf oo ahaa X/s Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta waxaa loo magacaabay La Taliyaha dhanka sharciga Gudiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha.

Qodobka 2aad
XUQUUQDA SHARCIGA IYO DHAQAALAHA

Jaalle Dr. Cabdullaahi Muuse Yuusuf wuxuu yeelanayaa dhanka Dhaqaalaha xuquuqda ay leeyihiin Gudoomiye ku Xegeenada Hogaanada ee X.H.K.S.

Qadobka 3aad
DHAQAN GELID

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta uu saxiixo Jaalle Madaxwaynaha waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda:

Muqdisho 6 4 1978

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaan gelinay
Diiwaanka lam. 3 bogga 70
Muqdisho 29.5.78,
Ku Xigeenka Hantidhawrka Guud

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 55 ee 2 Maajo 1978, Magdhaw Sharikado la toleeyay.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKII UU ARKAY : Sharciga lamb. 61 ee 21kii Oktoobar 1975 kuna saabsanaa la wareegidda ganacsiga dibedda ka keenka baabuurta iyo tolaynta Hoosooyinka waaweyn;

MARKII UU ARKAY : Go'aankii Guddiga Dhaqaalaha iyo Saadka ee 19.11.1977 iyo oggolaanshihii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada;

WUXUU GOOYAY :

Qodobka 1aad

Sharikadaha soo socda oo la toleeyay 21.10.1975 waxaa loo oggolaaday magdhaw mid waliba ku hor qoran :

SICA DI F. BOERO	Sh. So. 2.926.483,28
AMECO	» 6.354.794,19

Qodobka 2aad

Sharikadaha ku qoran qodobka 1aad ee Xeerkan waxa magdhawga loo oggolaaday lagu siinayaa qiraal-qaameedyo oo qiimaheedu ka koobnaan doono magdhawga iyo korsaar 2% laga bilaabo 21.10.1975, laguna gudi doono muddo 10 sanadood ah ;

Qodobka 3aad

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda awood loo siinayaa iney soo saarto qiraal qaamoodyada ku xusan qodobka 2aad ee Xeerkan;

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxu dhaqan galayaa maalinta la saxiixo ;

Muqdisho, 2 Maajo 1978

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka Lam. 1 bogga 119
Muqdisho, 23 Maajo 1978
Ku-Xigeenka Hantidhawrka Guud
Sax. Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 56 ee 21 Maajo 1978, Hoos u dhigid hal Derejo Cabdullaahi Macallim Maxamed saddexda kale la ganaaxay.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO AKRAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada kala ah 1,17,17 iyo 19 ee soo baxeen 1.7.1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga L. yahay 29 ee soo baxay 1.4.70 iyo bedelaadii ka dambeysay.

ISAGOO ARKYA : Sharciga L. yahay 14 ee soo baxay 31.1.71

ISAGOO ARKAY : Xeerka L. 74 ee soo baxay 22.4.1972 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga L. yahay 28 soona baxay 14.2.72 ee lagu dhisay Guddiga Baarista Dacwooyinka Shaqaalaha Dawladda iyo Dadweynaha iyo beeddelaaddii ka dambeysay iyo wareegtada lam. yahay N/SPP/SRC-1-2514 ee 14.2.72 ee faahfaahineyseey hawsha Awoodda Guddiguas.

ISAOGO ARKAY : Go'aanka Guddiga Baarista Dacwooyinka Shaqaalaha Dawladda iyo Dadwaynaha lam. ahaa GB/0076/78 14.5.1978.

WUXUU GUDDOONSHEY IN

Qodobka 1aad

B. CABDULLAAHI MACALLIN MAXAMED hoos loo dhigo hal darajo, isla markaasna laga wareejiyo xilka Waaxda Shaqada ee Wasaaradda Arrimaha Bulshada ee uu isagu Madaxda ka yahay kaddib markii ay caddaatay in uusan wadi karin xilkaas sida ku cad Go'aanka Guddga Baarista Dacwooynka Shaqaalaha iyo Dadweynaha.

T. 1. AXMED JAAMAC AADAN, Ku-Simaha Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Gaadiidka Badda.

2. CISMAAN DHEEL CABDULLE, Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Shaqaalaha.

3. MAXAMED WARSAME KHAYRE, Taarwale R.T. ka tirsan Wakaaladda Gaadiidka Badda, la khasiro 1/3 (saddeex meelood meel) midkasta mushaharkiisa bil kasta muddo lix bilood ah sababta oo ah in ay si sharci darro iyo maamulxumo ah shaqo ugu qoreen Khaliif Idriis Cusmaan.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Jaalle Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 21 Maajo 1978.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka Lamb. 1 bogga 59
Muqdisho, 27 Maajo 1978
Ku-Sime Hantidhawrka Guud
Dr. Axmed Shire Maxamuud

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 57 ee 1 Juunyo 78, Magacaabid Maareeyahay Guud ee Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashda 1aad, tan 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lam. 1 ee 21kii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 17,18,19, ee 1dii Luulyo 1976

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 22 ee 23kii Febaraayo 1975 oo lagu dhisay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta:

ISAGOO ARKAY Sharciga lam. 69 ee 12kii Nofember 1977 ee lagu dhisay Wakaaladda Gaadiidka Badda:

ISAGOO TIXGELINAYA Go,aankii Gudiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S. ee 27-28 Maajo 1978 ee lagu mideeyay labadii Wakaaladood ee kala ahaa Wakaaadda Hawlaha Maraakiibta iyo Wakaaladda Gaadiidka Badda.

ISAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in Wakaaadda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiikdka Badda loo magacaabo Maareeye Guud.

WUXUU XEERIYAY

Qodobka 1aad

In marka laga bilaabo 1da Juunyo 1978, loo magacaabo Jaalle Cabdulaahi Maxmuud Hiirad Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Juunyo 78, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Juunyo 1978

Madaxwaynaha J.D.S.

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA BOOSTA IYO ISGAARSIINTA L. 58 ee 23 Maajo 1978, Samayn tacriifa cusub ee Telekiska Dalka Gudahiisa.

WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA

W A S I I R K A

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 ;

ASGAOO ARKAY: Qodobka 9aad ee sharciga Isgaarsiinta lam. 1 soona baxay 22ka Diseember 1975.

ASAGOO ARKAY: Qodobka 4aad ee Sharciga Telekiska Sharci lam. 66 soona baxay 25.9.1971;

ASAGOO TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in loo sameeyo Tacriifada cusub Telekiska Dalka Gudihiisa;

ASAGOO KALA TASHAADY: Wasiirka Maaliyadda;

WUXUU XEERIYAY

Qodobka 1aad

Qiimaha wacidda Telekiska Dalka Gudihiisa

Qof alla qofkii doono inuu Teleksika u dirsado Dalka gudahiisa — Magaalo Xamar gudahiida ama — Magaalo ilaa Magaalo —waa inuu bixiyaa qiimaha hoos ku qoran;

XAMAR GUDIHIISA	3dii daqiiqo	Daq. dheer.
Ilaa 50 Km.	Sh. So. 1,50	Sh. So. 0,50
51 Km. — 100 »	» 3,00	» 1,00
101 » — 200 »	» 4,50	» 1,50
201 » — 300 »	» 6,00	» 2,00
301 » — 400 »	» 7,50	» 2,50
401 » — 500 »	» 9,00	» 3,00
501 » — 600 »	» 10,50	» 3,50
601 » — 700 »	» 12,00	» 4,00
701 » — 800 »	» 13,50	» 4,50
801 » — 900 »	» 15,00	» 5,00
901 » — 1000 »	» 16,50	» 5,50
1001 » — 1500 »	» 18,00	» 6,00
	» 24,00	» 8,00

Qodobka 2aad

Qiimaha Gelinta Telekiska

Qiimaha Gelinta Telekiska oo iskuduub ah qalabka iyo shaqada la xiriira halkii Telekisba waa Sh. So. 3.400/ (Seddex kun iyo afar Boqol).

Qodobka 3aad

K I R A D A

Kirada istismaalka Telekiska hal makiinaba sannadkii waa Sh. So. 6.000/ (Lixkun oo hormoris loo bixinayo.

Qodobka 4aad

KIRADA LAYMAHA

Kirada joogtada ah oo ku xusan qodo. hore, ku isticmaalka Telekiska waxaa kaloo la bixinayaa:

Qiimaha gelinta laynka	Sh. So.	1.000,00
Kirada bisha ee laynka ilaa 15 WPM	»	2.000,00
Kirada bisha ee laynka ilaa 30 WPM	»	3.500,00
Kirada bisha ee laynka ilaa 60 WPM	»	5.000,00

Qodobka 5aad

DIGNIIN

Hay,adaha ama Wakaaldaha oo ay mar hore ku isticmaalayeen laymanka Telekiska waxaa lagu dabaqyaa oo ay bixin doonaan Tacriifada Xeerkaan ku xusan.

Qodobka 6aad

Dhaqan gelin

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Juun 78 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 23 Maajo 1978

Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta
Dr. Cabdullaahi Cosobla Siyaad

Dr. Maxamuud Yuusuf Wayrax
Wasiirka Maaliyadda

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka L. 1 Bogga L. 125
Muqdisho 1.6.78

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA L. 59 ee 23 Maajo 1978 Tigidho cusub oo lagu magacaabo Laaji'iinta Falastiin iyo Xuquuqdooda.

WASIIRKA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA

W A S I I R K A

ISAGOO ARKAY: Xaashda 1aadi, tan 2aad iyo 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Qodobka 22aad iyo kan 23aad ee Sharciga Boostada lam. 62 soona baxay 22.9.1972;

ISAGOO DHAGAYSTAY: Talada Gudiga Filateliga;

ISAGOO TIXGELINAYO: Baahida loo qabo in la soo saaro tigidho cusub oo lagu magacaabo Laaji'iinta Falastiin iyo Xuquuqdooda.

WUXUU GUDOOMIYEY

Qodobka 1aad

1. In la soo saaro tigidh cusub oo xus ah, laba qiimo ah, midabna leh, laguna magacaabo Laaji'iinta Falastiin iyo Xuquuqdooda. Tigidhada waxaa lagu daabacay Madbacadda (Istituto Poligrafico dello Stato, Roma).

2. Tigidhada waxaa lagu sameeyay xaashiyo aan ahayn Filigaranata qiyaastooduna waxay tahay 30×40 mm. Tigidhada ilkahocda waxay yihiin 14 labadii sentimitirba, tigidhada dhexdoodawaxaa ku yaal Masaajid.

3. Qiimaha iyo tirada tigidhada la daabacay waa:

Sh. So.	0,75	tirada la daabacay waa	100.000
Sh. So.	2,00	tirada la daabacay waa	100.000

Qodobka 2aad

Tigidhada kor ku qoran waxay soconayaan muddo 5 sano ah laga bilaabo 30.4.78 waxayna dhacayaan 30.4.83

Muqdisho 2 3Maajo 1978

Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta
(Cabdullaahi Cosoble Siyaad)

Dr. Maxamuud Yuusuf Wayrax
Wasiirka Maaliyadda

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka L. 1 Bogga L. 125
Muqdisho, 1.6.78
Ku-simaha Hantidhowrka Guud
Dr. Axmed Shire Maxamuud

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran ;

MARKUU ARKAY : Waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga ;

HADDUU ARAKAY : Qod. 69 D.L.9/9/65 N. 2; lumidda Buug. lamb. 6824, kuna qoran tahay Sh. So. 4.070/— Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

WUXUU AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 (Soddon) maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Xaajiya Faaduma Sheekh Isgow ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 (Soddon) maalmood ah aan kor soo sheegnay.

Muqdisho, 17.6.78

GUDDOM. MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 342

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L.9/9/65 N.2; lumidda Buugga kaydka L. 10206 oy ku qoran tahay di Shs. So 299/ Bangiga Ganacsiga L. 2aad

WUXUU A MRAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro wareegatao 30 maalmood maalnta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawlada.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Afrax Dhiblaawe ama qof isaga ka sita Wakaalad sharci ah, iyadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay;

Muqdisho 1 22 5 78

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
(Dr. Axmed Sheekh Xasan)

L. 343

MAXKAMADDA GOBALKA HARGAYSA

Dekreto Lamb. 4/78

Garsooruhu

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku xusan,

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga

HADDUU ARKAY: qodobka 69 D.L.9/9/65 N. 2 iyo lumidda Jeegga wareega Lr. 15283 kuna taallo Sh. So. 4502/50 kuna qoran Qaybta Boliiska G/W/G Hargaysa.

WUXUU A MRAYAA

In 1 oocusboonaysiiyo Jeegga wareega lam. 15283 ka dib markii ay ka soo wareegato 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafnta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga wreega lam. 15283 cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Qaybta Boliiska G/W/G Hargaysa ama qof isla isaga ka sita Wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo 15ka maalmood ee aan kor ku soo sheegnay.

Ku Simaha Guud ee Max. Gobalka Hargaysa
Ibraahim Faarax Maxamed

Hargeysa 1.6.78

L. 344

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADDIGA SOOMAALIYA

GUDDOM. MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

HADDDUARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

HADDUU ARKAY: qodobka 69 D.L.9/9/65 N. 2 lumidda Buugga kaydka lamb. 12.314, kuna qoran tahay lacagta dhan Sh. So. 408/ Bngiga Ganacsiga iyo kaydka L. 2aad.

WUXUU A MRAYAA

In loo cusbboonaysiiyo Buugga kaydka ka dib markii ay soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Madiina Nuur Cali ama qof isla asaga ka sita Wakaalad sharci ah, iyadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 7 6 1978.

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
(Dr. Axmed Sheekh Xasan)

L. 345

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG GAALKACYO

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug Gaalkacyo; haddduu arkay weydiintii MAXAMED KULMIYE BARKHADLE taa riikhdeeduna ahayd 26.4.78 iyo Xaashida Bangiga Ganacsiga Ummadda Laanta Gaalkacyo taariikhdeeduna tahay 20.6.78da iyo markay aragtay Qodobka 69 D/L 1969 N. 2 waxa caddaatay in Buugga Kaydka lambarkiisu yahay 1685 kuna qoran tahay lacag dhan 302/60 (Saddex Boqol iyo laba Shilin) iyo 60 Senti uu ka lumay buuggaas oo ka furnaa Bangiga Ganacsiga Ummadda Laanta Gaalkacyo.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo mar labaad buuga aan kor ku soo sheegay Mudo 30 beri ah gudahood kana bilaabanta marka lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddaan la helin cid kale oo sheegata waxaana la farayaa in gacanta laga saaro Jaallaha Magaciisa kor ku xusan yahay ee baraha ah ama qof sita Wakaalad Sharci ah oo isgu uu siiyay ayadoo la sugaayo muddo 30 Maalmood ah.

Gudoomiyaha M. Gobalka Mudug Gaalkacyo
Dr. Siyidii Sheekh Cabdiraxmaan

Galkacyo 21 6 1978

SHIRKAD CUSUB OO LA DHISAY

Waxaa la dhisay Shrikad sahmi ah ee lagu magacaabo «OCEANTRAC» S.p.A.» saldhigeedu yahay Muqdisho, hantideeduna tahay Sh.So. 10.000/ ujeedadeeduna tahay in ay qabato ayna samayso dhammaan shaqooyinka la xiriira Farsamada makiinadaha iyo dhismaha; Ganacsiga qalabka dayactirka ee Cagafcagafyada iyo Baabuurta; in ganacsi oo cayn kasta ee kale ay ka samayso dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya gudahiisa iyo Dibaddiisaba; in Xiriir ay la yeelato Shirkadaha kale ee Ganacsatada ah; in ayadu ay yeelato, dad kalena ay u maamusho, Bakhaarro; iyo in ay qabato shaqo kasta ee kale oo toos ahaan ama si kaleba xiriir la leh kuwa kor ku kala tilmaaman.

Shirkaddaas kor ku magacaaban, waxaa lagu dhisay qoraalka Rasmiga ah lambarkiisu yahay 9759 Reb. taariikhduna tahay 8.2.1978, oo uuqoray Notaayada Dr. Muuse Xuseen Sadiiq laguna soo Diiwaangeliyay Muqdisho maalintii 11.2.78, laguna qoray lamb. 37, Atti Pubblici, Vol. 22.

Shirkaddaas «Oceantrac S.P.A.» waxaa lagu saxiixay go,-aanka Garsooraha Maxkamadda Gobalka Banaadir taariikhdiidsu tahay 15.2.78, waxaana lagu qoray Buugga Shirkadaha lamb. 1317, maalintii 15.2.78, sida sharcigu uu xusaayo.

Muqdisho, maanta oo ah 15 Juunyo 1978.

WAKIILKA GUUD EE SHIRKADDA
VIRGILIO MARANO

L. 347

COSTITUZIONE DI SOCIETA'

Con atto a rogito del Notaio Dr. Musse Hussen Sadik N. 9759 di Repertorio, in data 8.2.1978, registrato a Mogadiscio l'11.2.1978 ed iscritto al N. 37, Atti Pubblici, Vol. 22, è stata costituita la società per azioni denominato «OCEANTRAC» S.p.A.», con sede in Mogadiscio, e con il capitale sociale di Sh. So. 10.000/-. La società suddetta ha per oggetto: l'esecuzione di tutti i lavori relativi e connessi alla meccanica ed alle costruzioni; il commercio dei ricambi dei trattori, macchinari, ed autoveicoli; l'esercizio del commercio di qualsiasi altra natura e genere nell'ambito del territorio della Repubblica Democratica Somala ed all'estero; l'intrattenimento di rapporti con ditte e case commerciali; la gestione, sia in proprio che per conto di terzi, di magazzini e depositi; e l'esercizio di qualsiasi altra attività direttamente o indirettamente connessa a quelle sopra specifcate.

La società «Oceantrac S.p.A.», è stata omologata con provvedimento del giudice del Tribuanale Regionale del Benadir in data 15.2.1978; ed iscritta nel Registro delle Imprese al N. 1317 in pari data 15.2.1978, ai sensi di legge

Mogadiscio li 12 Giugno 1978.

IL PROCURATORE GENERALE
VIRGILIO MARANO

L. 347

SHIRKADDA «MORODI» — S.p.A.

oo Saldhiggeedu yahay Muqdisho (J.D. Soomaaliya) Ra'asumaalkeeduna yahay Sh. So. 2.000.000,00

OGEYSIIS ISU YEERID FADHI CAADI AH

IYO MID AAN CAADI AHEYN

Sahmiilayaasha Sharikadda «MORODI» waxaa la isugu yeeray shirar caadi ah iyo mid aan caadi ahayn oo lagu qaban doono Xamar, Xafiiska Rag. Arturo Salvi, maalinta 26 Luuliyo 1978, saacaddu markay tahay 9ka subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii fadhigaas suura galiwaayo, waxa mar labaad la isugu imaan doonaa maalinta 27 Luuliyo 1978 isla saacadda iyo isla meesha kor lagu sheegay si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda :

BARNAAMIJKA DOODDA

Fadhiga Caadiga ah :

1) Magacaabidda Guddiga Maamulka, iyadoo la xaddidaayo tiradooda ;

2) Magacaabidda Guddiga Baarayaasha sida oo sharcigu qabo

Fadhiga aan Caadiga ahayn :

1) In la saa'idiyo muddada Sharikadda ay soconeyso. Waxa xaqu leh in ay shirarka ka soo qayb galaan, sahmilayaasha ku qoran buugga xubnaha Sharikadda shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qabanaayo, ama keeno waqtigaas gudihiisa sahmiyaashooda Saldhigga Sharikadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Rag. Arturo Salvi ee Muqdisho.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' PER AZIONI «MORODI» - SEDE IN MOGADISCIO

Capitale Sociale inter. versato Sh. So. 2.000.000.-

AVVISO DI CONVOCAZIONE

Gli Azionisti della società per azioni «MORODI» sono convocati in Assemblea Ordinaria e Straordinaria in Mogadiscio, presso lo Studio Commerciale Rag. Arturo Salvi, il giorno 26 luglio 1978, alle ore 9,00 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 27 luglio 1978, alla stessa ora e nello stesso luogo, per discutere e deliberare sul seguente :

ORDINE DEL GIORNO

Parte Ordinaria :

1) Nomina del Consiglio di Amminstrazione previa determinazione del numero dei suoi membri ;

2) Nomina del Collegio Sindacale a norma di legge.

Parte Straordinaria :

1) Proroga della durata della Società.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro lo stesso termine abbiano effettuato il deposito delle loro azioni presso la Sede Sociale Studio Rag. Arturo Salvi in Mogadiscio.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 348

الجريدة الرسمية

FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQORAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 15 Juunyo 1978 L. 1 R 6

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaye. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Laçagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAADD

SHARCI

W.M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 50 ee 14 Jannaayo 78, Qaabka Dhismaha Maamulka D. Hoose ee Muqdisho.- Bogga 375

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 51 ee 4 Jan. naayo 78, Qaadid Gurì Dan guud awgeed ee waqti hore ay lahayd Faatma Xaaji Xuseen Cumar Garaama ee ay la wareegtay Wasaaradda Warshadaha kuna yaal Muqdisho Waddada Jubbada Hoose.- » 375

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 52 ee 11 Abriile 78, Qaadid Derbi wareegsan dan guud awgeed ee waqti hore lahaa Cabdi Maxamed warfaa oo ay la wareegtay Wasaaradda Wax-Barashada iyo Barbaarinta. » 377

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabdullaahi Yaasiin L. 326 » 379

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Cabdi Xasan L. 327

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Faa'isa Xaaji Cumar Cambarow L. 328 » 380

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Maxamuud Maxamed Jumcaale L. 329

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Xasan Xaaji iyo Xaliima Cabdulle iyo Cabdikariin Xasan L. 330 » 381

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Cusmaan Yuusuf L. 331

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Aadan Cumar L. 332 » 382

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Nuur Ceelaale L. 333

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Xayaad Maxamed Yuusuf L. 334 » 386

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Mako Jaamac Xuseen L. 335

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Khaliil Ibraahim Xaaji L. 336 » 385

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Xuseen Cabdi L. 337

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Cali Cusmaan Nuur L.338 » 383

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Cabdullaahi Axmed Cabdi L. 339

WASAARADDA H. GUUD, 2.5.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Xasan Dayl Sayruuq L. 340 » 384

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 3.6.78, lumid Jeeg War. L. 049549 ku qoran ShS. 2.400 uu leeyahay Cabdulqaadir Caseer Cali L. 341 » 387

IMPRSECO -ISUTAGGA SHIRKADDA (CIEFFE S.P.A.), 14.6.78 Ogeysiis isugu yeerid Shirwaynaha L. 342 » 388

XEER Madaxwaynaha J.D.S. L. 50 ee 14 Jen. 78, Qaabka dhismaha Maamulka Dawladda Hoose ee Muqdisho.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. yahay 21 ee 3.2.77, qodobkiisa 5aad xarafka 2aad

MARKUU ARKAY: Xeerka lamb. yahay 86 ee 23.8.77, kaasoo wax looga toosiyay xeerka Shaqaalaha D. Hoose ee Xamar

MARKUU ARKAY: Xeerka lamb. 28biis ee 21.2.76, ee lagu dhaqo Saqaalaha Dawladda Hoose;

ISAGOO HUBSADAY: In loo baahan yahay in wax laga bedelo qaabka dhismaha Maamulka Shaqaalaha Dawladda Hoose

ISAGOO OGAADAY: baahida loo qabo abuuris Jagooyin cusub iyo toosin jagooyin hore u jiray;

ISAGOO DHAGASTAY: tala jeedinta Xooghayaha Gudiga XHKS ee G/ Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Qaabka dhismaha maamulka D, Hoose ee Muqdisho, waxaa loo toosiyay sida soo socota:

1. Qaybo
2. Waaxyo
3. Xubno
1. Laamo
5. Faracyo

QODOBKA 2aad

Waxaa lagama maarmaan noqotay in wax laga bedelo ama laga toosiyo jagooyinkii hore ugu jiray Xeerka shaqaalaha Dawladda Hoose ee Muqdisho, waxaana loo toosiyey sida soo socota:

JAGO LAMB.	WAAXDA MAAMULKA LACAGTA	
	Faracii Tashiilka ee Waaxda hore u lahaan jirtey, waxaa loo beddelay :	
20037	XUBINTA TASHIILKA	«A5»

WAAXDA CAAFIMAADKA

Faracii hore ee Nadaafadda Guud waxaa loo toosiyey :		
30052	LAANTA NADAFADDA GUUD	«A6»

WAAXDA SUUQYADA

	Laantii Suuqyada ee Waaxda waxaa loo toosiyey :	
20479	XUBINTA SUUQYADA	«A5»
	Laantii Gowraaca Xoolaha ee isla Waaxda, waxaa loo toosiyey :	
20869	XUBINTA GOWRACA XOOLAHA	«A5»

WAAXDA BASASKA IYO GAADIIDKA

	Faracii Kormeerka iyo lacag Ururinta ee Waaxda, waxaa loo toosiyey :	
40365	LAANTA LACAG URURINTA & KORMEERKA	«A6»
	Faracii hoosooyinka ee isla Waaxda waxaa loo beddelay :	
40693	LAANTA FARSAMADA	«A6»

QAYBTA MAAMULKA GUUD

Jagadii Xoghayaha Guddiga Kacaanka ee G/Banaadir, waxaa loo toosiyey sida soo socota :

JAGO LAMB.		DARAJADA
00029	XOGHAYAHA ARRIMAHA MAAMULKA GUUD	«A3»

Jagadii Laanta Xisaabaadka Golaha Gobolka, waxaa loo toosiyey sidatan hoos ku qoran :

20060	LAANTA ARKIIFIYADA EE XISBIGA	«A6»

Jagadii Faraca Buug daabicidda ee Xoghaynta Guud, waxaa loo toosiyey sida soo socota :

10054	LAANTA QORAALLADA & BUUG DAABACAADDA	«A6»

Jagadii Xubinta Sancooyinka kala duwan ee Waaxda Howlaha Farsamada waxaa loo toosiyey sida soo socota:

40183	LANATA BIR QORIDDA	«A6»
41236	LAANTA GEEDA QORIDDA	«A6»

QODOBKA 3AAD

JAGOOYIN CUSUB OO LA ABUURAY

Waxaa Maamulka Dawladda Hoose ee Muqdisho lagama maarmaan u noqotay in qaabkii dhismaha shaqaalaha lagu kordhiyo jagooyin cusub, taasoo ay keentay baahsanaanta iyo ballaarka shaqooyinka D. Hoose jagooyinka cusub e la abuurayna waa kuwa soo socda :

WAAXDA SUUQYADA

41213	LAANTA KORMEERKA SUUQ.	«A6»
41214	LAANTA DHAGAXA & NUURIYADDA	«A6»
41215	FARACA DHUXUSHA	«B2»

XOGHAYNTA GUUD

41216	LAANTA DEGMOOYINKA	«A6»
41217	FARACA SHAQA BIXINTA HOOSE	«B2»

WAAXDA LO'DA & BEERTA

41218	LAANTA MAAMULKA	«A6»

XUBINTA TASHIILKA EE W. MAAMULKA LACAGTA

41219	FARACA DIIWAAN GELINTA.	«B»
41220	FARACA IIBKA ALAABTA	«B2»

WAAXDA CAAFIMAADKA

41221	LAANTA MAAMULKA LACAGTA	«A6»

WAAXDA BASASKA & GAADIIDKA

41222	XUBINTA BASASKA	«A5»
41223	LAANTA FARSAMADA BASASKA	«A6»
41224	LAANTA MAAMULKA	«A6»
41225	FARACA NADAAFADDA, GAADIIDKA & XERADA	«B2»
41226	FARACA MAKAANIKADA & KORONTADA	«B2»
41227	LAANTA FARSAMADA GAAD.	«A6»

JAGO LAMB. WARSHADDA BADARKA SHIIDDA

41227 biis	Laanta Maamulka	«A6»
41228	Laanta Farsamada	«A6»
41229	Faraca Xisaabaadka	«B2»
41231	Faraca Tacabka	«B2»
41232	Faraca Farsamada Warshadda «A»	«B2»
41233	Faraca Farsamada Warshadda «B»	«B2»

WARSHADDA QABOOJINTA & BARAFKA

41234 Faraca Farsamada Warshadda «B2»

WAAXDA SHAQAALAHA

41235 Faraca Qoraalka & Arkiifiyada «B2»

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Qodobka 5aad

Qodobada Xeerkaan cusub ku qoran waxaa lagu kordhin doonaa Xeerkii hore ee lagu maamuli jiray Shaqaalaha D. Hoose ee Muqdisho.

Muqdisho: 14. 1. 1978

Xoghayaha Gudiga Xisbiga ee Gobalka
Banaadir Ahna Duqa Magaalada Muqdisho
(Jaalle Yuusuf Ibraahim («Abuuraas»)

(Jaalle S/Gaas Maxamed S. Barre)
MADAXWAYNAHAJ.D.S.

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 Bogga 104
Muqdisho 8 Abriille 1978

Ku Xigeenka Hantidhowrka Guud
Jaalle Yuusuf Cali Nuur
aSSSSutl-ckaaRkxUyak

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 51 ee 4 Jen. 1978 Qaadid Guri dan guud awgeed ee waqti hore laheed Faatma Xaaji Xuseen Cumar Garaama, oo ay la wareegtay Wasaaradda Warshadaha, kuna yaal Muqdisho — Wadada Jubada Hoose

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

ISAGOO ARKAY: Warqadda 1aad,2aad iyo tan Sadexaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1976 ;

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta

INJ. CABDIKARIIN C. GUULEED

L.477

MAXKAMADDA GOBALKA TOGDHEER BURCO

MARKII AAN ARAKNAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Salaad Maxamed Muuse, oo sheegaya inuu ka lumay Jeegga wareega lambarkiisuna yahay 105314 taariikhdiisuna tahay 20.6.78. lacagtiisuna tahay 10000/- kana soo baxay Bankiga Ganacsiga iyo Kaydak Laanta Hargaysa.

MARKII AAN ARAKNAY: Nuqulka taarkt taariikhdiisu tahay 15.7.78 ee ka yimid Bankiga Ganacsiga iyo Kaydak Laanta Burco, oo ay hubiyeen in Jeegaas aan waxba lagu qaadan.

MARKII AAN ARAKNAY: Dacwoodaha doodiisu run tahay, isla markaana aan araknay qod. 27 ee Xeerka sumadiisu tahay 2 soona baxay9.9.65.

Ayaan gudoominay in jeeg lambarkiisu yahay 105314 in la baa'biyo. Bangiga Ganacsiguna u celiyo Jaalle Salaad Maxamed Muuse lacagta ku qornayd Jeegaas lambarkiisu yahay 105314, 30 casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah:

Gudoomiyaha Max. Gobalka Togdheer Burco

(Dr. Cabdiraxmaan X. M. Ereg)

Muqdisho 18 7 1978

L. 478

OGEYSIIN SHIR

Waxaa la ogeysiinayaa saamilayda Warshadda Marmarak iwm (I.S.M.A. S.P.A.), in uu jiro fadhi aan caadi ahayn ee lagu dhigayo saldhigga Warshadda Marmarak ee Muqdisho maalinta bishu ay tahay 15 Noofember 1978, saacaddu markay tahay 5.00 galabnimo, haduu shirku ku dhamaan waayana mar labaadka bishu 20 Nofember 1978, isku saacada kor ku qoran:

Shirkaa asaga ah waxaa laga hadli doonaa arimaha hoos ku qoran:

1) Kordhin hanti-gelinta Warshadda.
2) Wixii kale ee soo raaca.

Maamulka Idman

Jaamac Gaani Axmed

Muqdishrei, 25.7.78

الجريدة الرسمية

FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 15 Agoosto 1978 — L. 1R8

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 29 ee 29 Luulyo 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Kismaayo. Bogga 539

SHARCI L. 30 ee 29 Luulyo 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa. » 546

SHARCI L. 31 ee 29 Luulyo 78, Canshuur ka Dhaafid Wakaaladda Horumarinta Biyaha. » 553

SHARCI L. 32 ee29 Luulyo 78,Maamulka Laamaha Ceelasha Gobolada. » 554

XEER

QAYBTA LABAAD

W. M.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13.8.78, lumid Buug Kayd Lamb. 3870 ku qoran Shs. 4.609/50 uu leeyahay Maxamed Sheekh Xuseen L. 478 » 555

ISKU YEERIDDA SAAMILEYDA SHIRKADDA MORODI S.p.A. ee Saldhiggeedu yahay Muqdisho L. 478/Bis — 556 —

QAYBTA KOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 29 ee 29 Luuyo 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Kisimaayo.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in Maamulka Biyaha Kismaayo noqdaa Hay'ad iskeed isu maamusha shaqsiyad qaynuun lahaato;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiirada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qodobka 1aad

Abuuridda Wakaaladda

Wakaaladda Biyaha ee Kismaayo ayaa Sharcigan lagu dhisay waxaana hadda ka dib lagu tilmaamay Wakaalad

Qodobka 2aad

Wakaaladdu waxay ka mid tahay Wakaaladaha Dawladda ee Madaxa Bannaan, waxayna leedahay jirid, astaan sharci iyo shaqsiyad qaynuuni ah.

Qodobka 3aad

Wakaaladdu waxay u hogaansami doontaa sharciyada iyo xeerarka saameeya Wakaaaladaha Madax Bnnaan ee Dawladda gaar ahaan:-

b) Xeerkan lam. 16 ee1.4.1970 ee ku saabsan faaqidaadda xisaabaha Wakaaladda Madaxa-Bannaan;

t) Xeerka lam. 58 ee 31 .7.1972 ee Lacagta Wakaaladaha Dawladda;

j) Sharciga lam. 36 ee 22.4.1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa-Bannaan iyo wixii beddelaad ah ee ka soo bxay sharciga sare lagu xusay ka dib.

Qodobka 4aad

MEELAYNTA WAKAALADDA

Wakaalada Biyaha ee kismaayo waxaa lagu meeleeyay derejada ah «C»' Xarunteeduna waxay tahay Magaalada Kismaayo, wxayna ku yeelan doontaa laamo Degmooyinka uu ka kooban yahay Gobolka Jubada Hoose.

Qodobka 5aad

UJEEDAD A WAKAALADDA

Ujeedada Wakaaladda ama xilkeeda wuxuu yahay sida soo socda:-

1.- Inay sahmiso, soo saarto, qaybisana biyo Caafimaad qaba oo ku filan Magaalo Mdaxda Gobalka (Kismaayo);

2.- Inay biyo Caafimaad qaba ka haqab tirto Magaalada Kismaayo ;

3.- Iney u samayso Magaalada Kismaayo Dhuumaha biyha qaada iyo meelo biyo laga dhaansado;

4.- Inay u samayso dhuuman biyaha geeya guryaha iyo meelaha caanka ah iyadoo kor ka qaadanaysa;

5.- Inay ururiso kana faa'iidaysato war ururin ku saabsan biyaha dhulka iyo kuwa sare (undergorund and surfece watar date) ee Gobalka;

6.- Inay si cilmi ah u baarto sida ugu haboon ee biyaha Degmada loogaga faa'iidaysan karo;

7.- Inay yeelato awood Farsamo oo ay ku fulin karto Mashruuc biyood oo Gobol, iyadoo ku talo gelaysa qorshaynta, dersidda, xarardhka, kormeerka, xannaanada, wadidda iyo shaybaarka;

8.- Inay habayso, dibeddana ka dirto alaabta; qalabka iyo, baahitirka hawsheeda la xiriira;

9.- Inay aqoonta shaqaaleheeda kor u dhigto gees kastaba.

Qodobka 6aad

AWOODDA IYO XUQUUQDA WAKAALADDA

1.- Wakaaladdu waxay leedahay awood buuxda oo ay ku fuliso ujeedooyinka loo abuuray, xilkeeda iyo xuquuqdeeda sharciga uu siiyay, iyadoo mar walba dhawraysa kuna dhaqmaysa sharcigan; Sharciyada u degsan Wakaaladaha Madaxa Bannaan iyo mabaa'diida guud ee Maamulka guud saameeya.

2.- Wakaaladdu waxay leedahay xuquuqda soo socoda:-

a) In loo horreysiiyo baahideeda dhulka iyo banaynta meelaha hawshu ka socoto (Public or private right of way or Puplic utility eacement);

b) Inay mariso ama ku isticmaa sho jidadka ee meel kasta dhuumaha biyaha la marinaayo Jidadka.

t) Inay sicirka biyaha iyo qiimaha biyo-gelinta guryaha goyso, isla markaana awood ay socodsiiso xeerka biyo-gelinta yeelato, iyo isticmaalka biyaha (servece conecctions regulations);

j) Hadday lagama maarmaan noqoto mashruuca biyo safeyn ah ku dhisto ceelal ka qodo Degmooyinka deriska la ah Degmada Kismaayo si magaalo madaxda Gobolka J. Hoose biyo ku filan u hesho;

x) Wakaaladdu waxay yeelanaysaa awood oo ah inay saxiixdo heshiisyo la xiriira hawlaheeda oo qodobadiisa ka mid noqon kara canshuur ka dhaafid (tax free charges or lives), iyadoo ay kala tashanayso Wasiirka Wasaaradd Maailyadda oo ogolaanshihiisa ku xiran tahay xuquuqda, awoodda iyo xilka ku tilmaaman sharciga iyo xeerka hoos kusheegan oo ku saabsan Dhismaha Wakaalada hore ee Biyaha Xamar; wixii shrcigan ka soo horjeeda ama la socon mooyee:

I- Sharcga lam. 2 ee 11.12.1967 oo lagu dhisay Wakaaldda hore ee Biyaha Xamar;

II) Xeerka lam. 181 ee 8.8.1968 ee nidaaminaaya lana xiriira fulinta sharciga Dhismah Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar.

Qodobka 7aad

KORMEERKR IYO AWOODDA WASIIRKA

1. Kormeerka Guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

2. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu had iyo jeer siinkato awaamiir iyo talooyin ku saabsan Maamulka sidii hore loogu qaadi lahaa Wakaaladana waxtar ku noqon lahayd;

3. Isagoo tixgelinaayay qod. 1aad ee beddelaadda sharciga lam. 36 ee 22.3.1972, Wasiirku wuxuu ku leeyahay Wakaaladda awood iyo mas'uuliyad buuxda sida ku tafaftiran sharciga lam. 17 ee 21 Abriille 1974.

Qodobka 8aad

DHISMAHA WAKAALADDA

1. Wakaaladu waxaa ka Madax noqon doona Maareeye Guud;
2. Wakaaladdu waxay yeelanaysaa:Maaraya Guud. waaxyo.

Qodobka 9aad

MAGACAABIDDA IYO XILKA

1. Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Biyaha Kismaayo waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saxiixo Madaxwaynaha J.D.S., isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo go'aanka Guddiga siyaasadda XHKS. iyo Golaha Wasiiradda;
2. Maareeyaha Waaxyaha, waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha, isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Macdanta iyo Biyaha ;
3. Madax kasta wuxuu ka mas'uul yahay wanaagga iyo xumaatada Qaybtiisa ka timaada, dhan hawleed, dhan dhaqaale iyo dhanka asluubta shaqaalaha, iyadoo mar walba la raacayo habka kala sarreeynta xilka Xafiisyada.

Qodobka 10aad

XILKA MAAREEYAHA GUUD

1. Maareeyaha Guud wuxuu leeyahay awood iyo mas'uuliyad la siman tan uu leeyhay Agaasimaha Guud ee Wasaarad, sida ku qeexan qod. 3aad ee Xeerka lam. 316 ee 7.12.1975;
2. Maareeyaha Guud Xilkiisu wuxuu yahay:-

b) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay isagoo oggolaansho ka haysta Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

t) Inuu mas'uul ka yahay habka Maamulka shaqada Wakaaladda, wuxuuna awood u leeyahay inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan Maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda;

j) Inuu ku dhaqaaqo wixii qaraar oo deg-deg ah, isagoo isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

x) Inuu bixiyo wixii amaah lagama maarmaan ah si hawsha Maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;

kh) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada Wakaaladdu ee caadi ah;

d) Inuu fuliyo wixii hawl Maamulka shaqada ee aan caadi ahayn; isagoo ka haysta ogolaansha qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyah;

3. Markuu ka maqan yahay Maareeyaha Guud shqada ama ay jiraan asbaabo k reebaya shaqada waaa hawsha si, kumeel gaar ahaan u fulinaaya Maareeyaha ugu da,a wayn xagga shaqada.

Qodobka 11aad

XUQUUQDA QAYNUUNIGA IYO DHAQAA.

LAHA EE SHAQAALAHA WAKAALADDA

Xuquuqda Qaynuuiniga ah iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Agsimayaasha, waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona xeerka lam. 36 ee 22.4.72, kuna saabsan shaqaalaha Wakaaladda iyo Wakaaladaha Madax-Bnnaan.

Xuquuqda shaqaalaha oo maalinta sharcigan dhaqan gelaayo ka tirsan maamulka biyaha Kismaayo waxaa lagu wareejiyay Wakaaladda Biyaha Kismaayo, iyagoo loo aqoonsaday shaqadii hore in ay tahay mid sii socota (ricconscimento di continuità di lavoro e di anzianità di servizio della data di assunzione), laga bilaabo maalinta qof kasta la qoray, waxayna la mid yihiin dhanka xuquuqda iyo dhanka dhaqaalaha shaqaalaha Wakaaladdu ay qorato.

Qodobka 12aad

Qaabka *Wakaaladda*

1. Wakaaladdu waxay yeelanaysaa qaab la xiriira dhismaheeda;

2. Qaabka Wakaaladda Biyaha Kismaayo waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxwanaha J.D.S; isagoo tixgelinaya talada uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

Qaabka Wakaaladda waa in lagu dhammeeyaa muddo 6 (lix) bilood, laga bilaabo maalinta sharcigan uu dhaqan galo.

Qodobk*a* 13aad

HANTIDA WAKAALADDA

Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay:-

1. Lacagta u kaydsan maamulka hore ee Biyaha Kismaayo;

2. Lacagta ka soo gelaysa iibka biyaha guryaha meelaha ganacsiga ama Hay'adaha Dawladda ;

3. Wixii lcag ah oo deeq ahaan loo siiyo Wakaaladda iyo wixii dayn ah oo ay ku fulinayaan Mashraariic cusub ee hawshooda la xiriirta.

Qodobka 14aad

AMAAH SHRCI AH

1. Wakaaladu si ay u hirgeliso hawsheeda lacag waxay ka amaahan kartaa Bankiyada Dawladda iyo meelihii kale oo ku habboon, ayadoo haysata guddoonka Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;
2. Marka amaah lagala xaajoonaayo Bankiyada dibadda ah ama Hay'adaha kale Wakaaladuu waxay tahay mid si sharci ahaan Wakiil ka noqon karta Dawladda Soomaaliyeed.

Qodobka 15aad

XISAABTA SANNADKA

Xisaabta sannadka wuxuu ka bilaabmayaa 1da Jannaayo wuxuuna ku dhammaanayaa 31ka Disembar ee sannad waliba.

Qodbka 16aad

MIISAANIYADDA WAKAALADDA

a) Miisaaniyada socota (preventivo):-

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30 Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta, waa inuu isku dubaridaa Miisaaniyadda caadiga ah iyo tan Horumarinta oo ku saabsan sannadka soo socda, isagoo faah-faahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, waxaanu hor dhigi doonaa si loo ogolaado Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda.

2. Sannadka lacagta ee Wakaaladda wuxuu bilaabanayaa 1da Jannaayo, dhammaanayaa 31 Disembar ee sannad waliba.

b) Xiritaanka Miisaaniyadda (Consuntivo):-

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubaridaa xiritaanka Miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo isku hagaajinaya xisaabtii sannadka iyo bandhigii macaashka iyo khasaaraha Wakaaaladda, taana uu u gudbiyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo biyaha iyo kan Maaliydda.

2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay isagoo la tsahanaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyha inuu ogolaado xiritaanka Miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah

Qodobka 17aad

MAAMULKA IYO HORUMARKA XISAABAHA

1. Wakaaladdu, had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa aduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan, iyadoo ilaalinaysa sida haboon ee qawaaniinta iyo xeerarka Qaranka ku xusan.
2. Wakaaladdu waxay hawsheeda ku maamuli doontaa dakhliga ka soo xerooda hawsha ay qabato waana inay lacag u kaydisaa qiimadhaca alaabta, sida ugu habboonna u muumusha kaydkaas.
3. Xisaabaha Wakaaladda Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyha ama cid asaga ka wakiil ah ka sokow waxaa kormeeri doona Laanta goonida ah ee Wakaaladaha Madaxa bannaan.

Qodobka 18aad

KA DHAAFID CHNSHUUR

Qalabka u soo dega Wakaaladda Biyaha ee Kismaayo lana xiriirta soo saarka iyo socodsiinta qaybinta biyaha, waxaa laga dhaafay canshuurta furdada (import duty).

Qodobka 19aad

XEER GUUD

Madaxwaynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu soo saaro xeer nidaamiye oo lagu Faah-Faahinaayo sharcigan laguna hirgelinayaa habka ugu wacan oo hawsha Wakaaladdu ay ku fulin doonto ama looga hortagaayo dhibaatooyinka ka iman kara fulinta xilka Wakaaladda.

Qodobka 20aad

TIRTIRID

Sharci ama xeer kasta oo kasoo horjeeda ama la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 21aad
DHAQAN GELID

1. Sharcigan hore ayuu ka dhaqan gelayaa isla markiiba waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.
2. Sharcigan waa inuu ka mid noqdaa sharciyada Rasmiga ah. J.D.S.;
3. Qof waliba waa inuu dhawraa sharcigan.

Muqdisho, 29.7.78

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 30 ee 29 Luulyo 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa;

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in Maamulka Biyaha Hargeysa noqdaa Hay'ad iskeed isu maamusha shaqsiyad qayuunn lahaato;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Gudiga Siyaasadda ee XHKS, iyo Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qodobka 1aad

ABUURIDDA WAKAALADDA

Wakaalada Biyahaa ee Hargeysa ayaa sharcigan lagu dhisay, waxaana hadda ka dib lagu tilmaamaya Wakaalad.

Qodobka 2aad

Wakaaladdu waxay ka mid tahay Wakaaladaha Dawladda ee Madaxa-Bannaan, waxayna leedahay jirid, astaan sharci iyo shaqsiyad qaynuuni ah

Qodobka 3aad

Wakaaladdu waxay un hogaansami doontaa sharciyada iyo xeerarka saameeya Wakaaladaha Madaxa Bannaan ee Dawlada gaar ahaan:

b) Xeerka lam. 16 ee 1.4.1970 ee ku saabsan faaqidaadda xisaabaha Wakaaladda Madaxa-Bannaan.

t) Xeerkt Lr. 58 ee 31.7.1972 ee lacagta Wakaaladaha Dawladda;

j) Sharciga Lr. 36 ee 22.4.1972 ee shaqaalaha Wakaaladaha Maadxa-Bannaan iyo wixii beddelaad ah ee ka soo baxay sharciga sare lagu xusay ka dib.

Qodobka 4aad

MEELAYNTA WAKAALADDA

Wakaalada Biyaha ee Hargeysa waxaa lagu meeleeyay darajada ah «C» Xarunteeduna waxay tahay Magaalada Hargeysa waxayna ku yeelan doontaa Laamo Degmooyinka uu ka kooban yahay Gobolka Waqooyi Galbeed.

Qodobka 5aad

UJEEDADA WAKAALADDA

Ujeedada Wakaaladda ama xilkeeda wuxuu yahay sida soo soddca:-

1. Inay sahamiso, soo saarto, qaybisana biyo Caafimaad qaba oo ku filan magaalo madaxda Gobalka (Hargeysa);
2. Inay Biyo Caafimaad qaba ka haqab tirto Magaalada Hargeysa;
3. Inay samayso magaalada Hargeysa dhuumaha biyaha qaada iyo meelo biyo laga dhaansado;
4. Inay u samayso dhuumaha biyaha geeya iyo meelaha caanka ah iyo iyadoo kiro ka qaadanaysa ;
5. Inay ururiso kana faa'iidaysato war ururin ku saabsan biyaha dhulka iyo kuwa sare (underground and surface water date) ee Gobalka;
6. Inay si cilmi ah u baarto sida ugu haboon ee biyaha Degmada loogaga faa'iidaysan karo;
7. Inay yeelato awood Farsamo oo ay ku fulin karto Mashruuc biyood oo Gobol, iyadoo ku talo geleysa qorshaynta, dersidda xarardhka ,Kormeerka, xannaanada, wadida, iyo, shaybaarka;
8. Inay habayso, dibeddana ka dirto alaabta, qalabka iyo baahitirka hawsheeda la xiriirta;
9. Inay aqoonta shaqaalaheeda kor u dhigto gees kastaba

Qodobka 6aad

AWOODDA IYO XUQUUQDA WAKAALADDA

1. **Wakaaladdu waxay leedahay awood buuxda oo ay ku fuliso** ujeeddooyinka loo abuuray, xilkeeda iyo xuquuqdeeda sharciga uu siiyay, iyadoo mar walba dhawraysa kuna dhaqmaysa sharcigan, sharciyada u degsan Wakaaladaha Madaxa Bannaan iyo mabaa'diida guud ee maamulka guud saameeysa.
2. Wakaaaladda waxay leedahay xuquuqda soo socda:-
   a) In loo horreysiiyo baahideeda dhulka iyo baneynta meelaha hawshu ka socoto (Pubic or private right of way or public utillty easement);
   b) Inay mariso ama ku isticmaasho iidadka ee meel kasta

t) Inay sicirka biyaha iyo qiimaha biyo-gelinta guryaha goyso, isla markaana awood ay socodsiiso xeerka biyo-gelinta yeelato, iyo isticmaalka biyaha (servece conec-toin regulations);

j) Hadday lagama maarmaan noqoto Mashruuca biyo sa-feyn ah ku dhisto ceelal ka qodo Degmooyinka deriska la ah Degmada Hargeysa si, magaalo Madaxda G. W. Galbeed biyo ku filan u hesho;

x) Wakaaladdu waxay yeelanaysaa awood oo ah inay sa-xiixdo heshiisyo la xiriira hawlaheeda oo qodobbadiisa ka mid noqon karaan canshuur ka dhaafid (tex, fee, charges or livies) iyadoo ay kala tashanayso Wasiirka Wasaa-radda Maaliyadda oo ogolaanshihiisa ku xirantahay xuquuqda, awoodda iyo xilka ku tilmaaman sharciga iyo xeerka hoos ku sheegan oo ku saabsan Dhismaha Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar; wixii sharcigan ka soo horjeeda ama uusan la socon mooyee;

I Sharciga lam. 2 (labo) ee 11.12.1967 oo lagu dhisay Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar;

II Xeerka lam. 181 ee 8.8.1968 ee nidaaminaya lana xiriira fulinta sharciga dhismaha Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar.

Qodobka 7aad

KORMEERKA IYA AWOODDA WASIIRKA

1. Kormeerka Guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Biyaha;

2. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu had iyo jeer siinkaro awaamiir iyo talooyin ku saabsan Maamulka sidii hore loogu qaadi lahaa Wakaaladana waxtar ku noqon lahayd

3; Isagoo tixgelinaaya qod. 1aad ee beddelaadda sharciga lam. 36 ee 22.3.1972, Wasiirku wuxuu ku leeyahay Wakaaladdu awood iyo mas'uuliyad buuxda sida ku tifaftiran sharci lam. 17 ee 21 Abriile 1974.

Qodobka 8aad

DHISMAHA WAKAALADDA

1. Wakaalada waxaa ka madax noqon doona Maareeye Guud;

2. Wakaaladdu waxay yeelanaysaa, Maareyn guud, Waaxyo

Qodobka 9aad

MAGACAABIDDA IYO XILKA

1. Maareeyaha Guud ee Wakaaladd Biyaha Hargeysa waxaa lagu Magacaabi doonaa Xeer uu soo saxiixo Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo go'aanka Guddiga Siyaasadda XHKS. iyo Golaha Wasiiradda;

2. Maareeyaasha Waaxyaha, waxaa lagu Magacaabi doonaa Xeer uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S. isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

3. Madax kasta wuxuu mas'uul ka yahay wanaagga iyo xumaanta qaybtiisa ka timaada, dhan hawleed, dhan dhaqaale iyo dhanka asluubta shaqaalaha, iyadoo mar waliba la raacayo habka kala sarreynta Xilka Xafiisyada.

Qodobka 10aad

XILKA MAAREEYAHA GUUD

1. Maareeyaha Guud wuxuu leeyahay awood iyo mas'uuliyad la siman tan uu leeyahay Agaasimaha Guud ee Wasaarad, sida ku qeexan qod. 3aad ee Xeerka lam. 316 ee 7.12.1975;

2. Maareeyaha Guud Xilkiisu wuxuu yahay:-

   b) Inuu saxiixo hashiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay, isagoo ogolaansho ka haysta Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

   t) Inuu mas'uul ka yahay habka maamulka shaqada Wakaaladda, wuxuuna awood u leeyahay inuu sameeyo wixii qaraar ah oo ku saabsan Maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda;

   j) Iuuu ku dhaqaaqo wixii qaraar oo deg-deg ah, isagoo isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

   x) Inuu bixiyo wixii amaah lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;

   kh) Inuu fuliyo wixii hawla maamulka shaqada Wakaaladda ee caadi ah;

   d) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada ee aan caadi ahayn; isaga oo ka haysta ogolaansho qoraal ah Wa-

3. Markuu ka maqan yahay Maareeyaha Guud shaqada ama ay jiraan asbaabo ka reebaya shaqada waxaa hawsha si, ku meel gaar ahaan u fuliynaya Maareeyaha ugu da'a wayn xagga shaqada.

Qodobka 11aad

XUQUUQDA QAYNUUNIGA IYO DHAQAA.

LAHA EE SHAQAALAHA WAKAALADDA

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha, Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa Xukumi doona xeerka lam. 36 22.4..72, kuna saabsan shaqaalaha Wakaalada iyo Wakaaladaha Madaxa Bnnaan.

Xuquuqda shaqaalaha oo maalinta sharcigan dhaqan gelayo ka tirsan Maamulka biyaha Hargeysa waxaa lagu wareejiyay Wakaalada Biyaha Hargeysa, iyagoo loo aqoonsaday shaqadii hore in ay tahay mid sii socota (riconoscimento di cntinuita, di lavoro e di ansianita, di servizio della data di assunzione), laga bilaabo maalinta qof kasta la qoray, waxayna la mid yihiin dhanka xuquuqda iyo dhanka dhaqaalahaba shaqaalaha Wakaaladdu ay qorato.

Qodobka 12*aa*d

QAABKA *W*AKAALADDA

1. Wakaaladdu waxay yeelanaysaa qaab la xiriira dhismaheeda;

2. Qaabka Wakaaladda Biyaha Hargeysa waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

Qaabka Wakaaladda waa in lagu dhammeeyaa muddo 3 (seddex) bilood, laga billaabo maalinta sharcigan uu dhaqan galo.

Qodobka 13aad

HANTIDA WAKAALADDA

Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay :-

1. Lacagta u kaydsan maamulka hore ee Biyaha Hargeysa;

2. Lacagta kasoo geleysa iibka biyaha guryaha meelaha ga-

3. Wixii lacag ah oo deeq ahaan loo siiyo Wakaaladda iyo wixii dayn ah oo ay ku fulinayaan Mashaariic cusub ee hawshooda la xiriirta.

Qodobka 14aad

AMAAH SHARCI AH

1. Wakaalddu si ay u hirgeliso hawlaheeda lacag waxay amaahan kartaa Bankiyada Dawladda iyo meelihii kale oo ku haboon, ayadoo haysata gudoonka Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;
2. Marka amaah lagala xaajoonayo Bankiyada dibadda ah ama Hay'adaha kale, Wakaaladdu waxay tahay mid si sharci ahaan wakiil ka noqon karta Dawladda Soomaaliyeed.

Qodobka 15aad

XISAABTA SANNADKA

Xisaabta Sannadka wuxuu ka billaabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna ku dhammaanayaa 31ka Disembar ee sannad waliba.

Qodobka 16aad

MIISAANIYADDA WAKAALADDA

a) Miisaaniyada socota (preventivo):-

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta, waa inuu isku dubaridaa Miisaaniyadda caadiga ah iyo tan hormarinta oo ku saabsan sannadka soo socda, isagoo faah-faahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, wuxuuna hor dhigi doonaa si loo ogalaado Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda;
2. Sannadka lacagta ee Wakaaladdu wuxuu bilaabanayaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31 Disembar ee Sannad waliba;

b) Xiritaanka Miisaaniyadda (Consuntivo):-

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa xiritaanka Miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo isku hagaajiyay xisaabtii sannadka iyo Bandhigii macaashka iyo Khasaarahaa Wakaaladda, taana uu u gudbiyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda
2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu ogolaado xiritaanka Miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro Faafin Rasmiga ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixinayso Wakaaladdu.

Qodobka 17aad

MAAMULKA IYO KORMEERKA XISAABAHA

1. Wakaaladdu, had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan, iyadoo ilaalinaysa sida habboon ee qawaaniinta iyo Xeerarka Qaranka ku xusan.
2. Wakaaladdu waxay hawsheeda ku maamuli doontaa dakhliga kasoo xerooda hawsha ay qabato waana inay lacag u kaydisaa qiimadhaca alaabta, sida ugu habboon u maamushaa kaydkaas.
3. Xisaabaha Wakaaladda Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha ama cid isaga ka wakiil ah ka sokow waxa Kormeeri doona Laanta goonida ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 18aad
CANSHUUR KA DHAAFID

Qalabka u soo dega Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa lana xiriiro soo saarka iyo socodsiinta qaybinta biyaha, waxaa laga dhaafay canshuurada furdada (import duty).

Qodobka 19aad
XEER GUUD

Madaxwaynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelininaaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu soo saaro xeer nidaamiye oo lagu Faah-faahinayaa sharcigan laguna hirgelinayaa habka ugu wacan oo hawsha Wakaaladda ay ku fulin doonto ama loogahortagayo dhibaatooyinka ka imanan kara fulinta xilka Wakaaladda.

Qodobka 20aad
TIRTIRID

Sharci ama xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 21aad
DHAQAN GELID

1. Sharcigan hore ayuu ka dhaqan gelayaa isla markiiba waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.
2. Sharcigan waa inuu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah ee J.D.S.
3. Qof waliba waa inuu dhawraa, tixgeliyaa, kuna qasbaa dadka kale inay dhawraan sharcigan;

Muqdisho 29 Luulyo 1978

Madaxwaynaha J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 31 ee 29 Luulyo 78, Canshuur ka dhaafid Wakaaladda Horumarinta Biyaha.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 17,18 iyo 19 ee Habka Maamulka Dalka;

ISAGOO ARKAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiiradda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Qalabka iyo alaabta u soo dega Wakaaladda Horumarinta Biyaha lana xiriiro soo saarka, socodsiinta iyo qaybinta nooc kasta biyaha waxaa laga dhaafay Canshuurada Furdada (import duty);

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jannaayo 1978. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 29 Luulyo 1978

Madaxwaynaha J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 32 ee 29 Luulyo 78, Maamulka Laamaha Ceelasha Gobollada.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee Ka. caanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. kala ah 17,18, iyo 19 ee 1.7.1976;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in maa-Mulka Ceelasha ee Goballada lagu soo celiyo Wakaaaladda Horumarinta Biyaha, lagana wareejiyo Gobolada oo dhi-baato kala kulmaya dhanka Farsamada biyo soo saarka oo awoodaas ka maqnayn Wakaaladda Horumarinta Biyaha;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee XHKS. iyo Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SÁARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Maamulka Laamaha Ceelasha ee Gobollada waxaa lagu soo celiyay Wakaaladda Horumarinta Biyaha, iyadoo laga wareejiyay Dawladda Hoose ama Gobolada oo hayn jiray Maamulka Ceelashaas.

Qodobka 2aad

La wareegidda Maamulka Laamaha Ceelasha ee kor ku tilmaaman waxaa ka reeban Gobolka Banaadir iyo Magaalo Madaxda Gobollada Waqooyi Galbeed iyo Jubbada Hoose.

Wakaaladdu waxay awood u yeelanaysaa dakhliga kasoo gala Ceelasha Gobollada.

Qodobka 4aad

Dhammaan shaqaalaha ka tirsanaan jiray Maamulka Cee-lasha ee Gobollada, waxaa loo wareejiyay Wakaaladda Horuma-rinta Biyaha oo ku yeelanayaan xuquuqdooda dhanka qay-nuunka iyo dhaqaalaha, mudadii ay Dawladdaha Hoose ee Deg-mooyinka iyo laamaha Ceelasha ee Gobollada ay ka tirsanaan jireen.

Qodobka 5aad

Shasrcigan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 1.1.1978.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29 Luulyo 78

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiiska Bangiga

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L.9.9.65, N. 2 lumidda Buugga Kaydka Lam. 3870, kuna qoran tahay Sh. So. 4.609,50/- Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buugga Kaydka ka dib markii ay ka soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Sheekh Xuseen ama qof isla isaga ka sita Wakaalad sharci ah, iyadoo la sugaayo muddo (30) sodon maalmood ah ee aan kor ku s oosheegnay.

Muqdisho 13 8 78.

Gudoomiyaha Maxkamadda Gobalka Banaadir
(Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 478

ISKU YEERID SAAMILAYDA SHIRKADDA MORDI S.P.A.EE SILDHIGEEDU YAHAY MUQDISHO

Saamilayda Shirkadda Morodi S.p.A. waxaa la ogeysiinayaa in ay ka soo qayb galaan shirka guud ee lagu qaban doono Xafiiska shirkadda SO.N.A.S. ee Muqdisho maalinta bisha Nofembar ay tahay 5ta saacadduna tahay 9ka subaxnimo.

Hadduu fadhigaas ansixi waayo, waxaa mar labaad laysu imanayaa maalinta ku xigta ee bisha Nofembar tahay 6/da isla Xafiiskaas iyo isla saacaddaas, si qaraar looga gaaro arrimaha joogtada ah ee kala ah:-

b) Magacawga Guddiga Maamulka iyo cadadka tiradooda

t) Magacaabidda Gudoomiyaha Guddiga Maamulka sida uu qabo qodobka 17 ee Xeerka Shirkadda;

j) Magacaabidda Guddiga Baarayaasha.

Intaan waa arrimaha caadiga ah, arrinta Caadi Dhaafka ah ee shirka qaraar looga gaarayo waxay tahay:-

b) Mudada jiritaanka Shirkadda oo la saa'idiyo lana gaarsiyo 31 Disembar 1992.

Muqdisho 5.1.78

GUDDIGA MAAMULKA

L. 478/Bis

IIB MA GALO

الجريدة الرسمية
RASMIGA AH FAAFINTA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 1 Sebt. 1978 L. 9

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 33 ee 29 Luulyo 78, Sharci Cashuur ka-dhaafid Alaabta lagu isticmaalayo Dhismaha Jidka Medina Nord iyo Farsamada SancaBogga 558

SHARCI L. 34 ee 29 Luulyo 78, Dhismaha Sicirka Sonkorta Warshadda Johar.- » 559

SHARCI L. 35 ee 13 Agosto 78, Meel marin UMA ee ka tirtiridda Dhuuqaatayaasha Afrika - » 561

LAW N. 35 13th August 78, Instrument of Ratification of the OAU Convetion for the Elimination of Mercenarism in Africa.- » 562

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 67 ee 15 Abriille 1978, Xeer Nidaaminta Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed. » 568

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

XEER MADAXWAYNAHA JDS, L. 68, ee 2 Maajo 78, Magdhaw Shirkad la toleeyay. » 585

XEER MADAXWAYNAHA JDS, L. 69 ee 29 Luulyo 78, Ka tirtirid Xisaabtii u ku timid gubashadii Bakhaaradaha Wakaaladda Beeraha (ONAD). » 586

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBALKA HARGEYSA, 18.6.78, Lumid Buug kayd L. 5554/7 kuna qoran Sh.So 380/ u leeyahay Xuseen Aadan Maxamed L. 478 » 587

MAXKAMADDA GOBALKA HIIRAAN, 11.8.1978, Lumid Buug kayd L. 1910 ku qoran Sh. So. 243/ u leeyahy Yuusuf Jaamac Geelle L. 479

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR 14.8.78, Lumid Buug kayd L. 7480 ku qoran Sh. So. 3.863/ ay leedahay Muumina Sheekh Maxa-Med L. 480 » 588

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 8.8.1978, Lumid Buug kayd L. 1299 ku qoran Sh. So. 39.878, u leeyahay Cabdi Faarax Aadan L. 481 » 589

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 12.8.78, Lumid Jeeg war. L. 094369 ku qoran Sh.So. 6.000/ u leeyahay Haashim Cabdul Ghani L. 482 » 590

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 19.8.78, Lumid Buug kayd L. 10220 ku qoran Sh.So. 12.825/ u leeyahay Xasna Maxamed Cosoble L. 483 » 597

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.9.78 Lumidda Jeg Wareega L. 46599 ku qoran Shs. 5.278,50 uu leeyahay Guure Faarax Cusmaan L. 483/Bis.

MAXKAMADDA BOGOLKA BARI BOOS, 13.2.78 Lumidda Buugga kaydka L. 881. ayna ku qaran taray Sh. S0. 613,50 uu leeyahay Yaasiin Weyrax Maxamuud L. 483/Bis.

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 33 ee 29 Luulyo 78, Sharci Canshuur ka dhaafid Alaabta lagu isticmaalayo Jidka Medina Nord iyo Farsamada Sancada.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

MARKII UU ARKAY: Go'aankii Guddiga Siyaasiga iyo Golaha Wasiirada ee 15.6.1978;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa canshuurta keenideeda ee furdada laga dhaafay alaabta hoos ku qoran oo lagu isticmaalayo dhismaha Jidadka Medina Nord iyo Farsamada Sanca oo ay sameeyneysa Dawladda Hoose ee Muqdisho:

Sibir	tan.	1750
Laami caadi ah	»	650
Laami Kut-Bak	»	175

Qadabka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan geli doonaa markii la saxiixo, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 29 Luulyo 1978

Madaxwaynaha J.D.S.

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI 34 ee 29 Luulyo 78, dhismaha sicirka Sonkorta Warshadda Jawhar.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA: Ogolaanshaha Guddiga Siyaasadda iyo Goloho Wasiirada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Shraciga soo socda:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo taariikhda u sharcigani dhaqangalo dhismaha sicirka sonkorta Warshadda Jowhar wuxuu noqonayaa sida ku oran lifaaqa «A» oo sharcigan ka mid ah;

Qodobka 2aad

Sharciyadii kan ka horeeyay ee ku saabsanaa dhismaha Sisirka Sonkorta Warshadda Jowhar waa la baab'yey;

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa 6da Luulyo 1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho 29 Luulyo 1978

Madaxwaynaha J.D.S.

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

LIFAAQA «A»

DHISMAHA SICIRKA SONKORTA WARSHADDA JOWHAR

1.	Qaybta Warshadda SNAI	So. Shs.	210/—
2.	Kaydka Shaqaalaha Warshadda	»	1/—
3.	Cashuurta Dawladda	»	341/05
4.	Kharajka Gaadiidka Wakaaladda ENC	»	18/55
5.	Kharajka kale ee Wakaaladda ENC	»	4/40
6.	Kharajka Gaadiidka ee Dawladda Hoose	»	3/00
7.	Kharajka kale ee Dawladda Hoose	»	2/00
8.	Qaybta Tafaariiqda	»	20/00
		So. Shs.	600/00

SHARCI L. 35 ee 13 Agoosto 78, Meelmarin Axdiga UMA ee ka tirtiridda dhuuniqaatayaasha Afrika.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada Tiradoodu tahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY : Qodobka 13aad ee Axdiga kor ku xusan.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Baahida loo qabo meelmarinta Axdiga UMA ee ka Tirtiridda Dhuuniqaatayaasha Afrika, laguna oggolaaday Shirkii 14aad ee Madaxda Dawladaha UMA, Libreville 5tii Luulyo, 1977.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada 6dii Luulyo, 1978.

Wuxuu soo saarayaa sharciga soo socda :-

Qodobka 1aad

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay meelmarisay Axdiga UMA ee ka tirtiridda Dhuuniqaatayaasha Afrika, laguna oggolaaday Shirkii 14aad ee Madaxda Dawladaha UMA, Libreville 2-5tii Luulyo, 1977.

Qodobka 2aad

Axdigu wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, sida waafaqsan qodobkiisa 13aad,

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dmioqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 13kii Agoosto, 1978.

Madaxwaynaha J.D.S.

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

LAW No. 35 13th August 78, Instrument of Ratification of the OAU Convention for the elimination of Mercenarism in Africa.

THE BRESIDENT

HAVING SEEN : The 1st, 2nd and 3rd. Charter of October 21st. Revolution 1969.

HAVING SEEN : Law No. 1, 17, 18 and 19 of 1st. July 1976.

HAVING SEEN : Article 13 of the foresaid Convention.

CONSIDERING: The necessity to ratify the OAU Convention for the Elimination of Mercenarism in Africa, adopted at the 14th Summit Conference of Heads of States and Governments of the OAU, in Liberville, on 2-5th July, 1977.

TAKINK NOTE: Of the approval of the political Bureau and the Council of Ministers on 6th July, 1978.

Hereby promulgates the following law :-

Article I

The Somali Democratic Republic hereby ratifies the OAU Convention for the Elimination of Mercenarism in Africa, adopted at the 14th Summit Conference of Heads of States and Governments of the OAU, in Liberville, on 2-5th July, 1977.

Article II

The Convention shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic in accordance with Article 13 of the Convention.

This law shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 13th August 1978.

Major General Mohamed Siad Barre

President of the

Somali Democratic Republic

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXYANAHA J.D.S. L. 67 ee 15 Abriille 78, Xeer Nidaaminta Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Ka-Caanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 1, 17, 18, iyo 19 ee soo baxeen 1.7.1976

ISAGOO ARKAY: Sharciga L. 1 ee soo baxay 7.1.1973 ee lagu dhisay Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la soo saaro Xeer raacsan Sharciga kor ku xusan.

ISAGOO TIXGELIYAY: Ra'yiga Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekadaha

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Xeerkan waxyaabaha ku qoran haddii aan si kale loo macnayn waxaa loola jeedaa:

W.D.S.	Waxay tahay Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed ee lagu aasaasay qaynuunka 1aad ee 7dii Jannaayo 1973, ee lagu dhisay Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed
Dharaar	Qorax soo bax ilaa ay dhacdo
Habeen	Qorax dhac ilaa soo bax
Badeecad	Nool iyo Mood degaya ama dhoofaya
Xeerka shilka	Waxaa weeye Xeerarka adduunka ee ku saabsan shilka ka dhaca badda
Badeecad Khtar ah	Waxaa ka mid ah tan qaraxda, tan xoog loo cadaadiyey, dexalka, sunta, kuwa Ho laca soo tuura, kuwa noqda Khatar marka ay biyo ama dabayli gaaraan, kuwa iskood u qarxa.
Naakhuude	Waxaa weeye Naakhuudaha ama qofak markab ka madax ah kolkaas waxaa ka reeban hogaamiye.
Saliid	Waxa weeye nooc kasta oo Saliid ah iyo «Spirt» laga soo saaray saliidda (petrolumka).
Hantilaha	Waa qofka leh markabka, ama in leh, ka soo ijaartay, bedeecad sheegtaha amaba mid dammaanad u haysta

Hogaamiye	Waa qof aan ka shaqayn markabka oo leh awood shaqo xadidan.
Dekad	Waxaa weeye Deekadaha Muqdisho, Berbera, Kismaayo, Marka iyo mid kale oo si gaar ah loogu xusay xeerkan.
Maareeye Dekadeed	Waxaa weey sarkaalka madax ka ah Dekadaha ama madaxda kale ee Dekadda ee isugu wakiishaba.
Vessel	Waxaa ku jira macnaheeda markab ku dhaqaaqa matoor, waxaana weheliya markabka loo yaqaan «hover craft».
Markab	Waxaa weeye marakb kasta, weel badeecad,taag, sahlan, huuri amadoon ha ahaato mid diiq ku socoto ama la jiidaayo mase aha mid seeb ah.
Siidhi Hoon)	Waa hoon ama ci lagu sameeyay qiiq ama wax kale.
Socod ku jira	Waa markabku marka uusan u oolin baroosin, ku xidhnayn meel.
Dhismaha Dekedda	Waxaa weeye meesha wax laga dejiyo oo ay leedahay Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed.

Soo abbaarka Dekadda Waxaa weeye marinka haboon ee Dekaddu leedahay.

IMAATIINNO IYO BIXITIINNO

Qodobka 2aad

Naakhuudaha, Hantilaha ama Wakiilka markabka soo gelaya W.D.S. Dekedeheeda, wuxuu si dhaqso leh ka hor 24 saac ugu sheegayaa Maareeyaha Dekedda iyo Agaasimaha Waaxda

Badda waqtiga imaatinka iyada oo qoraal ah, wuxuuna codsan doonaa dhigaal baroosin ama ku soo xirasho Dekadeed.

Qodobka 3aad

Waxyaabaha loo badan yahay

(I) Ogeysiin imaatin iyo codsi soo xidhasho, waa inay weheliyaan waxyaalaha hoos ku sheegan:

(b) Magaca Markabka iyo Calankiisa

(t) Culayska GRT & NRT

(j) Inta uu badda kula jiro, dhererkiisa iyo ballaarkiisa

(x) Magaca iyo Cinwaanka Hantilaha, Naakhuudaha iyo Wakiilka markabka

(kh) Waqtiga imaatinka lagu wado iyo malaha waqtiga bixitaanka

(d) Inta laga dejinaayo ama inta la saari doono badeecad

(d) Inta laga dejinayo ama inta ea6usneeo,iiinooxciizp

(r) Badeecadda khatarta ah oo waafaqsan sida «IMCO» ay u tilmaantay xataa rakaab haddii aan la dejinayn

(s) Tiro rakaab inta fuulaysa ama ka sii degeysa

(c) Dekadda uu ka diiwaan gashan yahay.

(II) Warka laga helo Naakhuudayaasha, waxaa lagu xadili Diiwaannada imaatinka oo uu hayo Maareeyaha Dekedda, kan Waaxda Badda, si nidaamsan oo isdaba joog ah.

Qodobka 4aad

SOCDAALKA IYO TAKOORKA

(I) Naakhuudaha markab kasta oo ka imanaya Dekad qalaad waa inuu muujiyaa calaamadaha socdaalka, Caafimaadka iyo furdooyinka haddii sida lagu dhaqmo. Tilmaamuhu way ka muuqan markabka ilaa inta amar looga helayo dejinta madaxda ku shaqo leh.

(II) Matoor badeed uma tagi karo markab aan la fasixin, hadduusan ahayn kuwa loo ogol yahay, oo ah matoorka socdaalka, Caafimaadka furdada ama kan hogaamiyaha.

(III) cidna uma bixi karto ama kama soo degi karto markab ka yimid Dekad qalaad, hadduusan ahayn dadka u fasaxan sida socdaalka, Caafimaadka, furdada, Waaxda Badda ama hogaamiye, ilaa inta uu dejinaayo ama hoos uu dhigayo, calaamadaha socdaalka, takoorka iyo furdada.

Qodobka 5aad

Markab Meelaysan

ka hor inta aan la bilaabin hawlaha dejinta saarista ama fuulidda ka degid rakaab, waa in markabka la dhigo ama lagu xidho si hawsha lagu fulin karo, ha ahaato deked ku xirasho ama baroosin dhigasho.

Qodobka 6aad

Xaashida Ambabaxa

(I) Markabka kama bixi karo deked haddii uusan qabin Xaashida ambabaxa oo laga helo Waaxda Badda ka dib markay hubiso inaan markabkaas waxba loo haysan ama ha ahaato Maamulka Furdada ama Hay'ad kale ee Dawladdu leedahay.

(II) Xaashida ambabaxa dekedda lama bixin karo haddii lagu leeyahay markabka Kharash, ama aan laga lahayn ballaan lagu kalsoon yahay.

(III) Marka Khilaaf ku lug leh Kharash bixinta uu yimaado, waa in laga qaado curaar aan ka yarayn lacagta laysku hayo, ka dibna loo gooyo markabka Xaashida amababaxa Dekadda.

Qodobka7aad

Saaridda Calanka Qaranka

(I) Naakhuudaha Markab kasta oo dekedda dhex maaxaya waa inuu tixgeliyo adeecona xeerka dekadaha iyo xeerka Caalimiga ee u dejisan ka hor tagidda shilka badda mar hadii iyaga lagu dhaqmo.

(II) Maraakiibta soo gelaysa ama ka dhoofaysa dakedda J.D.S. waa inay saaraan calanka dalka uu ka qoran yahay iyo calanka Qaranka J.D.S. marka ay soo galaan xadka hogaaminta qasabka ah

(III) Calaamadda ku xusan Xeerka waxaa la saari doonaa dharaarta iyo inta uu markabku joogo dekeadda iyo ilaa uu ka gudbaayo hogaaminta qasabka ah.

Qodobka 8aad

Qadarinta Xirashada

Maraakiibta s oogelaysa dekedda J.D.S. waxaa loo soo xiri doonaa sida ay u kala hor yimaadaan, waxaase tixgelin la siin karaa:

(b) Maraakiibta qaadaysa dejinta badeecadda aan raagin iyo Xoolaha Nool

(t) Maraakiita loo tixgelinaayo nabadgelyada darteed.

(j) Marar aad u yar, Maareeyaha Dekeddu waa bixin karaa amar soo xidhasho markab leh tixgelin isaga oo Xeerinaya arrin la xldhiidhta bani-aadanimo, dan Qaran ama mid dekedeed.

Qodobka 9aad

Ka furashada Dekedda

Maraakiibta waxaa laga furayaa dekedda isla marka ay bogaan Saarista ama dejinta, haddii aan fasax gaar ah oo qoran Naakhuuduhu ka helin Maareeyaha Dekadda.

Qodobka 10aad

Hogaaminta iyo taagagga waqtiga

Soo gelidda iyo bixitaanka

Dekadda Muqdisho, Bebera iyo Kismaayo markabna looma ogola inuu soo galo, baxo, ama meesha uu ku xidhan yahay hadduusan wadan hogaamiye iyo taagag. Hogaamintu waa qasab iyaduna marka baroosinka la dhiganayo marsada.

Marka markab aysan hogaamintu iyo hawl qabadka taaggu waajib ku ahayn, waxaa laga rabaa in uu ogolaansho ku saabsan soo gelid, bixid ama meel bedelasho ka helo Maareeyaha Dekedda.

Qodobka 11aad

Codsashada Hogaamiye ama

Hogaamiye saaran Markabka

Maraakiibta soo geleysa waa inay codsadaan hogaamiye iyagoo saaraya Calanka «G» sida ku cad Xeerarka Caalamiga ah ee Badda. Maraakiibta hogaamiyuhu saaran yahay waxay taagayaan Calanka «H».

Qodobka 12aad

Maraakiibta Baroosinka dhiganaaya

Maraakiibta marsada dhiganaaya baroosinka waa inay kala xiriiraan hogaamiyaha raadiyaha loo yaqaan «V.H.F.».

Qodobka 13aad

Dul-fadhiga V.H.F.

Maraakiibta marsada dhigan ha furtaan hana ka feejignaadaan V.H.F. wadiiqadda 16 «Channel» saacad kasta. Dulfawuxuu ahaanayaa ugu yaraan 10 daqiiqadood saacad kasta.

Qodobka 14aad

V.H.F. wadiiqada «Channel» 12 ayaa Awaamiirta laga helayaa

Maraakiibta soo gelaysa dekedda Muqdisho doonaysa inay dhigtaan baroosin, waxay awaamiirta ka heli V.H.F. wadiiqada 12, halkaas oo saldhigga hogaamintu ugu sheegi meesha baroosinka la dhiganaayo.

(I) Marsada Dekedda Muqdisho waxaa ka reeban baroosin dhigasho ku tooska waqooyi oo ah 310 kuna abaaran nalka cas ee ka sarreeya gidaarka dekedda.

(III) Markada Dekedda Berbera:- Maraakiibta soo gelaysa waa inay ku sugtaa hoggaamiyaha marsada oo ah ½ ilaa hal Mayl kana fog ifka ama faynuuska khooriga oo loo yaqaan Tamaara «Tamara Light House» oo koonfur galbeed kaga toosan.

(Iv) Marsada Dekadda Marka:- Fawaaniista guriga nalka iyo masaajidka oo siman 3275 ka fogna uns Mayl gacanka kabel

Qodobka 15aad

Wargelinta Hogaaminta marka Dhaqdhaq jiro

Maraakiibta ka baxaysa Dekedda, meesha ay fadhiso ama ku xidhan tahay, ama bedelaneyso waa inay u sheegaan saldhigga Hogaaminta ugu yaraan laba saacadood ka hor waqtiga bilowga dhaqdhaqaaqa.

Qodobka 16aad

Hadhaaga Saliidda

Maraakiibta ku xidhan Dekadda ama dhigan marsada ama u dhow dekedda sinaba looguma ogola inay ku sii daayaan saliid ama wax kale oo qurminaaya ama waxyeelo kale gaadhsiinaya Baddda

Qadabka 17aad

Tijaabada Matoorka iyo wixii *la mid* ah

Haddii aan laga helin ogolaansho Maareeyaha Dekedda, markabna ma tijaabin karo matoorkiisa, mana socodsiin karo rafaashadaha isagoo ku xidhan Dekedda. Waxaa kale oo aanu markabna furfuri karin Matoorkiisa haddii aanu helin ogolaansho Maareeyaha Dekedda. Furfuridda halka ku xusan waa

Qodobka 18aad

Hagaajinta Matoorka

Hagaajin qaadanaysa waqti ka badan hal saac laguma samayn karo Matoorada markabka aan oggolaansho qoraal ah laga helin Maareeyaha Dekedda. Marka aan matoorka lagu isticmaali karin waa in laba xirig hore iyo gadaal lagaga xiraa Markabka, diyaarna u ahaadaan si ay u taagagu u jiidaan haddii uu dhaco kedis lama filaan ahi.

Qodobka 19aad

Alxamid, Rinji ka qaadis iyo Garaacid

Alxamid, hagaajin hugan leh iyo renji dib uga qaadis laguma samayn karo Dekedda, haddii aan Maareeyaha dekedda bixin fasax, Haddii laga helo fasax lagu fusho hawlaha Maareeyaha, waa in Naakhuuduhu la yimaad dadaal iyo taxadar iyo feejignaan inaan qashin iyo wax culusi toona ku dhicin Badda.

Qodobka 20aad

Daadinta Qashinka

Maraakiibta joogta Dekedda looma ogola in ay ku daadiyaan Dekedda dusheeda ama badda. Qashinka, hadhaaga, iyo wixii kale oo tuuris ah ama la daadinayo.

Qodobka 21aad

Hawsha Qashinka

Waxa deked kasta caadi u ah inay qabato hawsha qashinka iyadoo qaadanaysa Kharash. Hawsha iyada ahna waa ku qasab Maraakiibta. Haddii aanay Dekaddu toos u qaban hawsha waxaa qaban Wakiillo ama cid lagu siiyo qandaraas oo uu si rasmi ah u ogolaado Maareeyaha Dekedda.

Qodobka 22aad

Xarka Xirka

Naakhuudayaasha Maraakiibta ku xidhan Dekedda, waxaa laga rabaa inay u feejignaadaan mar kasta xarkaha ugu xiran dekedda.

Qodobka 23aad

Madaxa Xarka Xirashada

Awaamiirta madaxa xarka xirayaasha oo ku lug leh sida xarkuhu u xirmayaan, waxaa la soconaya badmaaxada markabka oo kolba shaqada ku jira.

Qodobka 24aad

Waxyeelada loo geysto dekedda

ama qalabkeeda

Waxaa bixinaya magdhawga dhibaatada gaarta dhinaca Dekadda, qalab badeed, qalab dekadeed ama hanti kale oo ay Dekeddu leedahay markabka geysta ama Wakiilkiisa inta uusan ka ambabixin dekedda haddii aa n laga haysan dammaanad kale oo kaafi ah.

Qodobka 25aad

Shaqo Siinta Ilaaliyaasha

Markab kasta oo deked jooga ama fadhiya waa inuu shaqo siiyaa ugu yaraan laba ilaaliye isaga oo ka qaadanaya Waaxda Badda ee Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.

Qodobka 26aad

Badmaaxda Saaran Markabka

Maraakiibta joogta Dekedda waa inay had iyo jeer ku joogaan ciidan ku filan oo leh awood ay ku kaxeeyaan haddii sida loo baahdo ama la soo derso kedis lama filaan ah.

Qodobka 27aad

Tijaabin Hoon IWM.

Haddii aanay jirin sabab macquul ah, maraakiibta dhigan marsada ama dekedda ku xiran ma tijaain karaan hoonka iyo waxyeelah ciya, haddii aan laga helin ogolaansho Maareeyaha Dekedda.

(I) Marka la helo ogolaansho lagu tijaabiyo hoonka, waxaa ogeysiin la siin Saldhigga hogaaminta iyada oo la caddeynayo waqtiga tijaabada.

Qodobka 28aad

Dab ka kacay Markab dushiisa

Marka Dab ka kaco Markab jooga Dekadda Dushiisa, Naa-Khuudaha ama Madaxa markaa ku jooga waa inuu tallaa booyinka soo socda qaado:

b) Waa in uu si deg deg ah ula dagaallamo Dabka.

t) Ha u soo wargeliyo Maareeyayha Dekedda sida ugu toosan ee uguna dhaqso badan.

j) Ha muujiyo tilmaamaha Caalamiga ah ee u gaarka ah Dabka. Tilmaamaha waxay sii joogi doonaan in mudo ah, xataa hadduu dabku damo oo laga adkaado.

x) Waa inuu hubiyaa in shaqaalaha markabkiisu uu ka qayb galo haddii gurmad kale ay u yimaadaan.

kh) Ha u noqdo diyaar in laga furo Dekedda ama lagaga bedelo meesha uu joogo si dhaqso leh.

d) 24saacadood gudahooda waa inuu qoraal ugu soo gudbiyaa Maareeyaha Dekedda Waaxda Badda warbixin ku saabsan sidii dabku u kacay iyo inta ay leegtahay dhibaatada uu geystay si kastaba ha ahaatee. Waa iuu bixiyo warbixin inta uusan codsan dhoof.

Qdobka 29aad

Caari IWM.

Marka markab caariyo ama xanibmo, waxaa laga rabaa Naakhuudaha inuu yeelo sidatan:

b) Waa inuu qaado tallaabooyin uu ku hor joogsanaayo (pollution) wasakhaynta Badda.

t) Waa inuu ku dadaalo in aanu sii xumaan xaalka markabku.

j) Waa inuu soo gaarsiiyaa si deg deg ah Maareeyaha Dekedda iyo Waaxda Badda warkiisa, codsadana kaalmo haddii uu u baahan yahay, isaga oo caddeynaya nooca kaalmada.

x) Waa inuu muujiyaa tilmaamaha caadiga ah ee loo baahan yahay.

kh) Waa inuu hoon ugu digaa maraakiibta soo abbaaraysa ilaa ay khatarta ka ogaadaan.

d) Waa in shaqaalaha Markabka qayb wayn ka qaataan lana shaqeeyaan ciddii u soo gurmata.

r) Waa in la soo wargeliyo Maareeyaha Dekedda iyo Waaxda Badda marka si haboon uu u sabeeyo Markabku mar labaad.

s) Warbixin waa in loo gudbiyaa Maareeyaha Dekedda iyo Waaxda Badda intaanu Markabku codsan dhoofid Warbixintu waxay ku saabsanaan dhibaatada gaartay Markabka iyo sababaha keenay caariga.

Qodobka 30aad

Deqsi IWM

(I) Haddii markab, weel badeed dooni ama qalab kale oo sabbaynaya uu ku dego, xanibmo, ku go,doomo ama dab ku qabsado isaga oo ku jira inta u xadaysan dekedda,oo ay raacsan tahay meelaha laga soo abbaaro, Naakhuudaha ama Hatilaha Markabka ayaa mas'uul ka noqon doona wixii khasaare ka soo baxa, waxaana jid ku ah inuu si deg deg ah uga bixiyo markabka isagoo qaba kharashka oo idil marka uu ku amro Maareeyaha Dekeddu.

(II) Haddii Hantilah ama Naakhuudaha uu ka bixin waayo markabka meesha, Maareeyaha Dekeddu si aan dib u dhac lahayn ayuu hawsha u gelayaa, wuxuuna amar ku bixin in laga bixiyo markabka meesha, wixii kharash ku baxana waxaa qaadi doonaa Naakhuudaha ama Hantilaha.

(III) Haddii loo baahdo Maareeyaha Dekeddu wuxuu ka codsan Naakhuudaha ama hantiilaha dammaanad ugu filan Helitaanka kharashka.

Qodobka 31aad

Lama Filaan

Haddii wax lama filaan ah oon xeerka ku jirin dhaco, Naakhuudaha ama Madaxa markaa goob joog ah ayaa u soo gaarsiin Maareeyaha si deg deg ah, wuxuuna qaadanayaa awaamiirta uu siiyo Maareeyuhu. Naakhuuduhu wuxuu soo gudbinaa warbixin ku saabsan dhibaatada ayadoo aan dib uga dhicin 24 saac markii ay arrintu dhacday ama ka hor inta aanu helin xaashida ambabaxa hadba labada hormari karta.

Qodobka 32aad

Saaris, Dejin, Kaydin iyo Daadgurayn Badeecadeed

Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed, marna kama noqonayso mas'uuliyad xayiraad ama daahida ku timaado markab ama dajin badeecadeed la xayiray, haddii aanay iyadu sabab u ahayn

Qodobka 33aad

Habsamaanta shaqada Maraakiibta

(I) Markab kasta waa inuu ku dejiyo ama ku raro badeecadiisa si fudud iyo waqti macquul ah, ha joogo jaga (berh) ama yaanu ku xirnaanine. Markii baahi lagama maarmaan ahi oo ku lug leh jirto, hala galo shaqo saacadaaha caadiga ah ama kuwa aan caadiga ahayn.

(II) Markii Markabkaasi uu suuragalin waayo sida looga baahan yahay dekedda oo ah shaqo aan lahayn istaagtaag, Maareeyaha Dekeddu wuxuu amar ku siin Markabka inuu banneeyo jagada, Naakhuudaha Markabkuna waa in uu fuliyo amarka.

(III) Markabka ku ubanneeyo jagada amar la siiyay, waxaa dib loo soo xiri doonaa marka meeli u banaanaato uuna shaqayn karo.

(IV) Kharashka ku yimaada iyada oo la fulinaayo qodobkan, waxaa qaadi markabka.

Qodobka 34aad

Furidda, Xiridda Godadka iyo Diyaarinta Wiishashka Markabka

Furidda, Xiridda khaananka iyo diyaarinta iyo shaqo gelinta qalabka markabka waa xilka markabka.

Qodobka 35aad

Ijaar Qalab Badeecadeed

(I) Wax allaale wixii ah qalabka lagaga shaqeeyo badeecad ama qalab kaleba oo ay leedahay W.D.S. ee la ijaaranaayo waxaa lagu ijaaran shuruud ah in wixii dhibaato soo gaara ama ay keenaan ay ka mas'uul tahay cidda ijaaratay, mas'uuliyadina ka saarayn Wakaaladda Dekedaha wixii khasaare ka yimaado halkaas.

(II) W.D.S. waxay ku dadaali in qalabka la ijaaray daryeelkiisu joogo heer macquul ah.

Qodobka 36aad

Badeecadda soo Geleysa

Naakhuudaha, wakiilka markab kasta oo soo gelaaya dekedda,waxaa laga rabaa in ay soo harmariyaan laba nuqul oo ah xaashiyaha loo yaqaan «Manifest» xaashida badeecadda, loona keeno Maareeyaha Dekedda ugu yaraan 24 saac ka hor intuusan iman Marakbu. Labadaa Nuqul waa inay ku qornaadaan Afka Ingeriiska oo ay saxeexan yihiin. Xaashida Badeecadda waa iney si cad oo sax ah u tilmaamaysaa waxyaalaha hoos ku sheegan:

(I) Culayska, Cabbirka, Calaamadaha, Tirad IWM. oo ah halkii xirmo ama intii isleh.

(II) Magaca cidda iska leh sida ku qoran xaashida wax lagu soo dhoofiyo «Sill of lading».

(III) Dekedda ku lug leh arrintaas way diidi kartaa inay siiso Jago Markabka aan sidan xaashida badeecadda «Manifest», una soo gaadhin Dekedda, haddii aanu ahayn mid aan wax dijinayn, qaadaya ama markab ka yimi meel aan fogayn, markaana si deg deg ah waa in Maareeyaha Dekedda loogu soo gudbiyaa laba nuqul oo ah «Cargo Manifes» durba kolka la soo xidho markabka.

(IV) Haddii la sameeyo warbixin lagaga bedelaayo xaashida badeecadda markii si run ah loo sameeyay dib u cabirid ama dib u miimaamid badeecadeed, waa in la soo gaarsiiyaa dekedda.

Qodobka 37aad

Badeecadda Baxaysa

Naakhuudaha markab kasta qaadaya badeecad ama wakiilkiisa, waa inuu u soo gudbiyo Mareeyaha Dekedda laba nuqul oo ah xaashiyaha badeecadda «Cargo Manifest» kuna qoran Af Ingiriis oo si tifatiran u sheegaysa dhammaan badeecadda la saaray. Xaashida badeecadd a waxaa si sax ugu sheeganayaan waxyaalaha soo socda:

(I) Culays, Cabbir, tilmaamo, tiro iyo cadada alaabta gudaha ku jirta ee cudud kasta, xirmo iyo wixii is leh.

(II) Magaca cidda diraysa sida lagu carifay warqadaha wax lagu dhoofiyo

Qodobka 38aad

Faaqiddada xaashiyaha Rasmiga ah

Naakhuudaha markab kasta ama Wakiilkiisa waxaa uu hor keenayaa Maareeyaha Dekedda Diiwaan kasta ama xaashiyaha Rasmiga ah oo ku lug leh badeecadda uu siday Markabku, rakaabka saaraa iyo shaqaalihiisa.

Qodobka 39aad

Kala Saaridda

Dekeddu kama aha mas'uul alaabta lagu baxo qalad sababtiisu thay tilmaamo aan dhammayn, dar aan jirin, waxyaalaha ku qornaa oo aan si fiican loo akhriyi karin, amaba aan la arki karin cidda leh.

Qodobka 40aad

Badeecadda Soo Degtay lana Dhoofiyay

(I) Badeecadda soo degtay ee ay Dekeddu qabatay waxay had iyo jeer kula wareegtaa aragga debedda oo kaliya. Sidaa darteed, W.D.S. mas'uul kama aha dhinaanshaha ka muuqda cududa gudaheed.a

(II) Badeecadda la dhoofiyo waxaa Naakhuudaha markabku siinayaa xaashiyaheeda Maareeyaha dekedda inta ka horaysa dhoofidda markabka.

Qodobka 41aad

Toos ula baxa iyo Toos ula Rarka

W.D.S. dekedeheedu waxay suuragelin toos ula bixid badeecadeed ama u rarka marka la fuliyo shuruudahan:

b) Dhamaan toos ula bixid oo la suurageliyo iyo toos u rarka oo lagu soo geliyo gudaha si habboon, waafaqsanna habka iyo dhaqanka uu u dejiyo Maareeyaha Dekeddu.

t) Badeecadda waa inaan la soo gelin ilaa markabku u diyaar noqdo rarka

Qodobka 42aad

Daahista Badeecadda

Sinaba hayadda Dekeduhu mas'uul ugama aha daahis badeecadeed la dhoofinaayo, mid la soo dejinaayo mid lala badxayo oo ay keentay ciriiri xagga meesha dhigaalka, maraakiibta oo ay keentay ama sabab kale oo aysan hay'addu ku lug lahayn ama waxba ka qaban karin.

Qodobka 43aad
Magdhaw Bakhaar

Hay'addu waxba u magdhabi mayso badeecadda khasaaro gaahdo sabab kasta ha ku gaadho kana mid yihiin hawada oo xumaata, arrin ku lug leh sida roob, iyada oo horay loogu digay oo la gaarsiiyay Hantilaha qofka qabanaayay «Consignee» soo diraha ama wakiilka markabka inaan loo heli karin Bakhaar lagu xareeyo badeecaddaas.

Qodobka 44aad
Badeecad Qaali ah

Wakaaladda Dekdaha Soomaaliyeed, qasab kuma aha inay qabato kana shaqayso badeecadda qiimaha badan. Hase yeeshee haddii badeecadda laga shaqeeyo, Hantilaha, Naakhuudaha ama Wakiilka markabka waa inuu dhiibaa nin ka mid ah shaqaalaha W.D.S. oo si cad loogu xilsaaray, ayada oo isla markaas qiimaha xirmadii wax ku jira. Haddii ay la noqoto markaas in uu qabto badeecadda, isaguna waa inuu ka taxadiraa meesha la dhigaayo iyo sidii loogu wareejin lahaa cidda leh. Badeecadda qiimaha badan wax kasta ha ahaadeen waxa laga qaadi doonaa kharash u khaas ah ama mid ku xiran qiimaheeda «Advalorm» kharshka laga hadlayaa waa ka bakhaardhigga iyo dejinta saaridda.

Qodobka 45aad
Barxadda Dekdda

marka ay badhaarradda dekeddu ku fillaan waayaan amma sadad u tahay nooca badeecaddu, waxa la dhigi badeecadda goobaha bannaan ee dekadda. Sababtaas darteed badeecadda ay dekeddu ku dhigtay meelaha bannaan, hayaddu ma magdhabi doonto wixii dhibaato soo gaara dabeecadda si kasta ha ku timaadee.

Qodobka 46aad
Badeecadda Mas'uuliyadeeda

Dekeddu ma bixin doonto tacwiid haday lunto ama dhibaato ku timaado alaabta shakhsiga ah ee rakaabka haddii aan qofku haysan helis loo qoray xataa marka uu qofku halis haysato, dekeddu waxay bixin doontaa lacag qadarkeedu yahay ugu badnaan 300/ Sh.So. cuddadiiba dhibaatada ha ku timaado si kasta

Qodobka 47aad

(I) W.D.S. iyo dekedeheeda kama aha mas'uul haddii laga helo dhinaasho wax ku jira cududda gudaheeda. Sidaas oo kale xajmi ama culayska oo wax iskabedelaan, qiimaha iyo xaaladda badeecadda ay ku sugan tahay, kama noqon doonto wakaaladda iyo dekadaheeda mas'uul.

(II) D.D.S. iyo dekedeheeda kama noqonayaan mas'uul xumaanta gaarta badeecada nafteeda, waayitaan, dhibaato gaarta badeecadda ama khasaare kale oo gaadha mar haddii khasaaraha, isdhinka iyo xumaanta ku timi sababo aanay Wakaaladdu wax ka qaban karin. Ulajeedada qodobkan waxyaalaha ku xusan waxa ka mid ah haddii dhibaatadu ku timaado idin Eebe iyo badeecadda oo sideeda wax isu yeesha ama waxyeelo ka timaada dhinaca kaydinta.

(III) W.D.S. ama dakadaheeda waa diidi karaan inay dejiyaan ama raraan badeecad jilicsan ama badeecad si xun loo soo xidhxidhay, haddii aan la ballan qaadin wixii ka luma ama ka jaba iyo khasaaraha gaadha.

Qodobka 48aad
La Wareegga

W.D.S. waxy ogolaanaysaa in lala baxo badeecadda marka lala yimaado xaashida loo yaqaan «Delivery Order» xaashida la bixidda. Wakaaladdu marna ka noqon mayso mas'uul wixii qalad loola baxo marka loo raaco xaashida la bixidda «Delivery Order» ee khseysa dhinaca: (I) Lahaansho, (II) Calaamad (III) khalad ku qoran xaashida la bixidda badeecadda.

Qodobka 49aad
Amarka sii Deynta

b) Badeecad waxaa lagu sii dayn karaa marka la helo xaashida la bixidda oo laga soo qaatay wakiilka markabka ama laga soo saxiixay Furdada.

t) Badeecadda laguma sii dayn karo Calaamad waqtiga dekedda laga bixinaayo. Sidaas daraadeed, Hay'addu kama aha mas'uul inay kala saarto oo ay tiriso, haddii aan hantilaha ama wakiilka markabka kharshka qaadin.

Qodobka 50aad
Badeecadda dhibaato soo gaartay

(I) Jawaaniga ama cuddada ay wax gaareen waxa dib u hagaajin doona dekedda iyadoo uu kharashka qaadi doono qofka alaabta leh ama qabanaya haddii uu sidaas codsado iyo hadduusan codsanba xataa.

(II) Sida caadiga ah W.D.S. waxay eegeysaa badeecadda wax gaareen iyo ta si xun loo soo cabeeyay. Hase yeeshee W.D.S.kama noqonayso mas'uul badeecadda wax gaareen ee aan si sahlan looga garan karin marka la dejinaayo. Sida kor ku xusan, badeecadda si xun loo soo xirxiray ama kuu dhibaataysan markabka dushiisa, waxa markabka dushiisa ku indha indhayn dooan Naakhuudaha ama wakiilka markabka. Xataa marka alaabta lagu hubiyo barkabka dushiisa, W.D.S. waa diidi kartaa inay dejiso badeecadda xun ee dhibaataysan iyo ta ku jirta weel xun oo aan xejin karin.

(III) Cidda ay badeecaddu ku qoran tahay ama Markabka wakiilkiisa ayaa kaga bixin doona dekedda badeecadda wax gaareen iyo ta xumaatay muddo kuu siman 15maalmood oo ka tirsan maalintii imaatinka. Haddii badeecadda lagu bixin waayo mudada kor ku xusan, dekedda ayaa ugu talin doonta badeecadda sida la haboonaata ayada oo kharashkaa la saarayo cidda ay badeecadu ku qoran tahay. Dacwaddii ku saabsan badeecad ay dekeddu daadisay ama ay si kale u khaarijisay lama tix gelin karo, cidda badeecaddu ku qoran tahayna wax looma celinaayo, mar haddii ay kula bixi waydo mudada kore.

(IV) Cidda badeecadda xumaatay iska leh waxaa ay bixinaysaa kharashka ku lug leh badeecadda, ama ha kala baxdo dekedda ama yaanu la bixin e.

Qodobka 51*aad*

B*a*deecadd*a* x*u*maatay

Marka dekeddu ay aqoonsato badeecad la hayo inay waxyeelo u geysan karto bedeecadda kale, waxay amar ku siinaysaa Hantilaha inuu kula baxo 48 saacaood gudahooda oo ka bilaabma mark uu helo ogeysiinta. Haddii aan amarka la fulin, W.DS. ayaa ugu bixin doonta badeecaddaas dekedda sida ay ugu noqoto sooragal, ama ugu bedeli doonto Bakhaar ama barxadda dekedda.

Hantilaha badeecadda la khaarijiyay iyadoo la fulinaayo qodobkan wax magdhaw ah ma yeelan karo, waxaaan lagu yeelanayaa kharashka ku baxa daadinteeda ama wareejinta.

Qodobka 52aad

Badeecadda *la* X*a*r*aa*sh*a*yo

W.D.S. waa gadi kartaa badeecada ku raagtay oo taalay dekedda mudo dhan 45 cisho ama in ka badan, iyada oo habka

wax lagu gadayo uu yahay tartan dad badan oo loo yaqaan «Auctien» ama qandaraas amaba sidii kale oo noqon karta suuragal. kharashka qaan dekedeedka waxa laga jarayaa inta lagu gado,, inta soo hartana marka kharashka laga roobo, waxa lagu wareejinayaa Furdada ama wakiilka markabka, haddii aanay ahayn danta gaar ee Dekedda leedahay.

Qodobka 53aad

Badeecad kala Wareejin

Maareeyaha dekedda marka ya timaado baahi dekedeed wuxuu amar ku bixin karaa in badeecad lagu wareejiyo Bakhaar ama meel ka gedisan meeshee ay here u tiilay. Marka badeecad la wareejiyo, kharashka ku baxa dekedda waxa siinaaya qofka badeecad isk leh.

Qodobka 54aad

Badeecad kala wareejin

W.D.S. ama mid ka mid ah dekedaheeda magdhaw ka bixin mayso waxyeelaha ku gaadha badeecad ama hanti kale oo ay u hayso kayd, haddii khasaaruhu ku yimid sababaha soo socda:

(I) Dhibaato ay keentay badeecad oo si xun loo xidhxidhay ama aan si wacan loo dhawrin.

(II) Dhinnaan ama nuqsaan lagu arkay cuddad aan jabnayn

(III) Waxyeelo ama waayitaan oy sabab u yihiin gafafka hantilaha ama sida badeecadda.

(IV) Waayitaan ama waxyeelo ay sabab u tahay siideen (Leakage) ama siyaale kale oo la xiriira badeecadda.

(V) Waayitaan, dhibaato ama badeecad baaba'da oy ugu wacan tahay dab, biyo ama wax kale oo si toos ah ama dadban wax u yeela oo la qaadaayo tallaabo gurmad ah ee lagu badbaadinaayo badeecadda.

Nabad-gelyada Dekedda

Qodobka 55aad

Cabitaanka Sigaarka

(I) Qafna kuma cabi karo sigaar ama dab kuma shidi karo gudaha Bakhaarka, meelaha badeecada la dhigo, barxadda hoosadda, Saldhigga Shidaalka ee dekedda, dheegga ama khanka markabka marka ay socdaan hawlaha dejinta saarista.

(II) Qodobkan waa la tix gelin xataa haddii aysan muujinba Dekeddu Calaamadda joojinaysa cabitaanka Sigaarka.

Qodobka 56aad

Kalluumaysiga

Haddii aan laga helin ogolaansho Maareeyaha dekedda, waa reeban tahay in laga Kalluumaysto biyaha ka tirsan seeraha dekedda, buuntada iyo meelaha kale ee la mid ah.

Qodobka 57

Dabaasha ama Raaxaysiga

Waa reeban tahay in lagu dabaasho ama lagu raaxaysto inta dekedda u xadidan, hadii aan laga helin ogolaansho Maareeyaha dekedda.

Qodobka 58aad

Hantida Dekedda

Dadka loo fasaxay inay dekedda soo galaan, waa ineysan sinnaba shanta ula gelin qalabka dekedda, weelka, dhismaha, badeecadda, Maraakiibta dekedda joogta ama hantida kale oy leedahay W.D.S. iyagoo aan ka helin ogolaansho Maareeyaha Dekedda.

Qodobka 59aad

Xoolaha Nool

Xoolha Nool oo ay ku jiraan eeyaha ama kuwa kale oo loogu tala galay in la dhoofiyo lama soo gelin karo dekedda, haddii ayan ogolaansho gaar ahaaneed laga helin Maareeyaha Dekedda.

Qodobka 60aad

(I) Soo gelidda Dekeddu waa reeban tahay, waxaana loo ogolyahay cidda haysata rukhsad uu bixiyay Maareeyaha Dekedda.

(II) Qof kasta oo ka tirsan shaqaalaha Wakaaladda Dakadaha Soomaaliyeed oo uu ku ilaaliye ama Boliis wuu su'aali karaa dekedda qof ku jira qofkaasna waa inuu sheegaa hawdoono inuu ka baxo dekedda, waa inuu sidaas yeelaa arrintu si kasta ha ahaatee.

(III) Baabuurta lama dhex gelin karo ama laguma dhex kaxayn karo dekedda gudaheeda, haddii aanu waduhu haysan rukhsad uu bixiyay Maareeyaha Dekedda. Xataa haddii uu rukhsad hayso, shaqaalaha iyo ilaaliyaasha dekedda ama Boliiska waa joojin karaan waana baari karaan baabuurka, waxa uu sido iyo ciddda ka mas'uul ah.

(IV) Dadka iyo baabuurta waxay dekedda ka soo galyaan ama ka baxayaan iridyada ay dekkeddu ugu tala gashay oo kali ah.

(V) W.D.S. ama Maareeyaha dekeddu, isaga oon sheegin sabab waa u diidi karaa qof ama baabuur soo gelidda dekedda xataa haddii qofka ama baabuurka uu haysto rukhsad. waxa kale oo ay W.D.S. ama Maareeyaha Dekeddu, isagoo aan sheegin sabab dib ula noqon karaa ama tirtiri ogolaansho uu bixiyay oo la siiyay qof ama baabuur.

(VI) W.D.S. markay ay la haboonaato aan cid wargelin way xidhi kartaa deked, bakhaar ama meelaha kale oo ah dhisqaalaha Dekedda.

(VII) W.D.S. ma qaadayso mas'uuliyadda badeecad waxyeelo gaartay, la waayay ama qof dhaawacmay xataa haddii hantida ama qofku uu haysto rukhsad. Taa waxaa khilaafsan marka si aan shaki ku jirin loo hubiyo in dhibaatada ay ka dhalatay feejignaan iyo taxadar darada shaqaalaha dekedda.

Qodobka 61aad

Xilka Dekedda ka saaran Hawlaha Saaridda Dejinta iyo khananka.

Hawlaha khananka, Saaridda Dejinta waxa u leh, kan mas'uul ah W.D.S. cidda ay u wakiilato ama ku siiso qandaraas oo kali ah. Intaa waxaa dheer in qalabka lagaga shaqeeyo badeecadda ee aan ahayn kuwa ay leedahay W.D.S. aan lagaga shaqayn karin dekedda dhexdeeda, haddii aan oggolaansho qoraal ah laga helin Maareeyaha Dekedda.

Qodobka 62aad

Xilka markabka ka saaran diyaarinta Wiishashka

Furidda godadka

Furidda xiridda khananka iyo diyaarinta wishashka markabka waxaa ka mas'uul ah markabka. Marka kaalmo loo baahdo, dekedda waxay fidindoontaa kaalmada looga baahday oo qiyaasan (Assistence at cost), ka dib markii uu si qoraal ah ku soo codsado Naakhuudaha ama wakiilka markabka.

Marka qof ama dad badan ay W.D.S. sidaa kor ku qoran ku sheegaan darteed ugu dirto, waxaa dadka si kasta ha ahaadeen loo qaadanayaa shaqaalaha markabka. Dekeddu kama noqon doonto mas'uul waxa ay dadkaa gaystaan inta ay joogaan markabka dushiisa.

Qodobka 63aad

Amar wiish xumaaday

Waqtiga la sugaayo Furdada khananka, diyaarinta wiishashka

Waqtiga ku luma sugitaanka khnanka la furayo, diyaarinta wiishashka markabka ama wiish markab oo xumaaday ama waxyeelo kale oo dhaliya dib u dhac hawlaha saarista dijinta oo uu sabab u yahay markabka, waxa lagu xisaabin doonaa markabka.

Qodobka 64aad

Badeecad soo qiimaynta (Recivery

Alaab kasta, badeecad ama qalab oo ku dhaca badda ama buuntada, waxaa soo bixinta ay dusha ka saaran tahay Dekedda. Marka dekeddu ay soo caymin karin, waxay u qabanaysaa cid soo caymisa. Kharashka la xiriira wixii waxyeelooba iyo soo cayminta waxaa dhiibi doonta Wakaalada Dekedaha.

Qodobka 65aad

Ka shaqaynta badeecada qaraxda, Shidaalka iyo ta khatarta ah

Maraakiibta dejinta ama qaadaysa badeecadda khatarta ah, tan qaraxda, shidaalka ama waxyaalaha ka soo baxa shidaalka, waxay maalintii markabka xagiisa hore saarayaan calan cas, waxay ilaalinayaan in aan sigaar lagu cabin, waana in ay dusha ku hayaan qalab iyo dad ku filan dab damis, una diyaar ah haddii dab kaco. Marka ay tahay habeen, markabka wuxuu dhan kasta ku muujinayaa nal cas oo laga arki karo ugu yaraan laba (2) Mayl badeed.

Qodobka 66aad

Ma leh alxamid, garaac ama xoqid ama ifaf muruxsan **Maraakiibta qaadaysa ama dejineysa bedeecadda khatarta** ah, shidaalka ama tan qaraxda, sinaba laguma qaban karo dusheeda wax alxan ah, xoqid renji ama isticmaalka ifaf muruxsan.

Qodobka 67aad

Kormeerka Kooxda Dab Damiska Dekedda

Madaxa ka tirsan Kooxka dab damiska dekedda wuxuu Kormeer ku tegi karaa markabka isla markaana eegi karaa qabka la dagaalanka dabka ee markab kasta oo dejinaaya qaadaaya badeecadda khatar ah, shidaalka iyo tan qaraxda. Maareeyaha dekeddu wuxuu karaa inuu diidi ama joojiyo hawlaha dejinta saarista isaga oo ka helay talo Madaxa kooxda dab damiska dekedda oo hore u arkay in qalabka iyo awoodda aysan

(I) iyad oo aan waxba loo xeerinayn arrimo ku xusan meela kale ee xeerkan, maraakiibta aan sidan qalab ku filan la dagaalanka dabka, waxaa loo diidi karaa in la soo xiro ilaa uu Maareeyaha dekeddu ku qanco in qalabka iyo awoodda dab damiska uu ku filan yahay markabka dushiisa. Waxaa uu Maareeyaha dekeddu bixinayaa ogolaansho dib in loo bilaabo hawsha Saarista dejinta kadib marka uu ka helo talo Madaxa Kooxda dab damiska dekedda.

(II) W.D.S. iyada oon waxba xeerin waa diidi kartaa dejinta saarista badeecadda ay la noqoti inay khatar gelinayso dekedda, badeecadada kale ama dadka.

(III) W.D.S. waxay amar ku bixin kartaa bixinta, baabi,inta badeecadda khatarta ah, xataa haddii la soo heli waayo hantilaha ama qofkii lahaa awoodda qabashadeeda. Hantilaha ama qofka qaban lahaa badeecadda xaq uma laha inuu u dacwoodo magdhaw uu ka helo W.D.S.

Qodobka 68aad

Shaqaalaha ku dhaawacma markabka dushiisa

Marka qof shaqaale ah uu ku dhaawacmo markab dushiisa waxaa markabka waajib ku ah in uu u fidiyo qofka dhaawacmay gargaarka ugu horreeya ee caafimaad iyada oon loo eegin sababaha keenay.

Qodibka 69aad

Saacadaha Shaqada

Saacadaha caadiga aha ee lagaga dhaqmo dekedda Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya waa:

Maalmaha toddobaadka (Jimcuhu ka baxsan yahay) 60.00 ilaa 14.00 galabnimo.

Qodobka 70aad

Khidmadda waqtiga shaqada dheeraadka ah

Khidmadda waqtiga shaqada dheeraadka ah ee ka baxsan saacadaha caadiga ah iyo maalmaha fasaxa ah, waxaa lagu caddeeyay xeerka taariifada u degsan hawlaha wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed.

Qodobka 71aad

Maalmaha Fasaxa ah

Maalmaha Fasaxa ah waa:

1da iyo 2da Shawaal	— Ciidda Fatriga ah
9ka iyo 10ka Dul Xija	— Ciidda Xajka
12ka Rabiic Awal	— Dhalashada Nabiga
1da Maajo	— Maalinta Shaqaalaha
26ka Juun	— Xornimada Waqooyiga
Soomaaliya	
1da Juulaay	— Isutagga iyo Xornimada
Koonfur Soomaaliya	
21ka iyo 22ka Oktoobar	— Dhalashada Kacaanka.

Qodobka 72aad

Awoodda Maareeyaha Dekedda

Maareeyaha Dekeddu wuxuu awood u leeyahay:-

(I) U bixidda maraakiibta soo geleysa ama ku xidhan dekedda, kuwa baroosinka u dhegan yahay marsada gudaha ama ta dibadda.

(II) Amar bixinta marsa dhigashada, ku xirashada ama ka furashada mraakiibta.

(III) Amarka kala wareejinta markab jago ilaa jago ee xuduuda dekedda oo ay ku jirto marsada gudaha iyo ta debidda.

(IV) Hubinta in maraakiibta iyo shaqaalaha saaran ay dhawrayaan qawaaniinta nabedgelyada.

(V) In uu amro bilaabidda iyo joojinta hawlaha saarista dejinta.

(VI) In uu hormood u noqdo hawsha la dagaalanka dabka, marka uu dab ka kaco dekedda gudaheeda.

(VII) Wuxuu amri karaa in aqoonyahanno ay u baxaan maraakiibta ku xidhan dekedda ama baroosinka u yaal inta ku siman seeraha dekedda.

VIII) Ka qayb galka hawl kasta oo la xiriira nabadgelyada, tacab dhalinta iyo dhaqdhaqaaqyada maraakiibta iyo badeecadda ee dekedda gudaheeda.

Qodobka 73aad

Baabuur

Wadayaahsa Baabuurta marka ay ku dhex jiraan dekedda

(b) Si quman inay u wadaan, eegaanna haddii ay jiraan orod xadidan iyo xeerar kale oo dekedda dejisay waqti ilaa waqti.

t) Fuliyaan amarka uu bixiyo maareeyaha dekedda ilaaliyaasha ama Boliiska ku shaqo leh nidaaminta socodka dekedda gudaheeda.

(j) Ka dhawridda ku wadida baabuurta qarka dekedda, bakhaarka dhexdiisa ama meelaha ka'e oon loo ogolayn, Baabuurta. Wadaha wuxuu baabuukiisa ku wadi karaa meelaha aan baabuurta loo ogolayn, marka uu ogolaansho gaar ahaaneed ka helo Maareeyaha dekedda.

x) In uu san dhigin baabuurka salaamada wadiiqooyinka iyo wadooyinka la maro.

kh) In uu la joogo baabuurkiisa inta uu dekedda dhex yaalo

(d) In uu markasta ka taxadaro inaysan iskuu dhicin qalabka socda ee dekedda iyo baabuur ka'e.

Qodobka 74aad

Xadidaada Magdhawga

Wixii ka baxsan ama ka gedisan sida Xeerkan ku sheegan magdhawga la xiriira badeecad waxyaalo gaaraan, mid dhammaan baaba'da mid guud ahaan u lunta, qof dhaawacma ama dhinta sinaba ugama badnaan karo inta hoos ku xadidan:

(b)	Masiibo dhacday hal mar	Sh.So. 500.000/
(t)	Dhimasho halkii qof	« 20.000/
(j)	Badeecad ama alaab ay ku jiraan kuwa qaaliga ah, hashii cuddo	« 10.000/

Qodobka 75aad

GANAAX

Qofkasta oo ku xad gudba ama jabiya Xeerka guud ee Daakhiliga ah, xeer-hoosaad ama awaamiir oo ay soo saartay W.D.S. waxaa uu mutaysanayaa ganaax, u dhaxeeya Sh. So. 5.000/ oo ku xidhan halista ama dhibaatada uu qofku geestay.

(I) Ganaaxa kor ku sheegan waxaa awood u leh Maareeyaha dekedda.

(II) Ganaaxa ku sheegan Qodobka 3aad ee Xeerka Daakhiliga ah lama dhaafi karo mana hoos imanaayo qodobkan.

Qodobka 76aad

Xeer Hoosaad (Bye-Laws)

Marka ay haboonaato, W.D.S. waxaa lagu awood siiyay in ay soo saarto awaamiir iyo xeerar Daakhili ah oo la mid noqon kara Xeer-hoosaad ama Xeer.

Qodobka 77aad

BURIN

Sharci ama xeer kasta oo lid ku ah Xeerkan waa la buriyay

Qodobka 78aad

Dhaqan Gelin

Xeerkan waxaa qadarin doona qof kasta, wuxuuna dhaqan galayaa ka dib marka uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S.

Muqdisho 15 Abriile 1978.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

J/lle Maxamed Syaadi Barre

Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekedaha

S/Guuto J/lle Maxamuud Geelle Yuusuf

Xeer Madaxwaynaha J.D.S. L. 68 ee 2 Maajo 1978, magdhaw sharikado loo toleeyay.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKII UU ARKAY: Sharciga lam. 61 ee 21.10.1975 kuna saabsanaa la wareegidda Ganacsiga dibad ka keenka baabuurta iyo toleeynta hoosooyinka waawayn;

MARKII UU ARKAY: Go'aankii Gudiga dhaqaalaha iyo Soodka ee 19.11.1977 iyo ogolaanshihii Gudiga Siyaasadda iyo golaha Wasiirada;

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1aad

Shirkadaha soo socda oo la toleeyay 21.10.1975 waxaa loo ogolaaday magdhawga mid waliba ku hor qoran:

SCIMAIR	Sh.So. 1.802.625,48
F.LLI LEANDRI	« 1.336.835,98

Qodobka 2aad

Lacagta magdhawga waxaa laga bixin doonaa Miisaaniyadda Wasaaradda Maaliyadda ee sanadka 1978, madax-xigaha 1.2.8 (r);

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa maalinta la saxiixo.

Muqdisho 2 Maajo 1978

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Madaxwaynaha

Waan aragnaw ee Diiwaanbelinay
Diiwaanka lam. 1 Bogga lam. 131
Muqdisho 22 Agoosto 1978
Ku-Xigeenka hantidhowrka Guud

Sax Yuusuf Cali Nuur

Xeer Madaxwaynaha J.D.S. L. 69 ee 29 Luulyo 78, Ka tirtirid Xisaabtii ku timid gubashadii Bakhaarka Wakaaladda Beeraha (ONAT).

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-Caanka 21ka Oktoobar 1969;
MARKUU ARKAY: Sharciyada kala ah 1, 17 18 iyo 19 ee soo baxeen 1.7.1976;
MARKUU ARKAY Sharciga L. yahay 11 ee 15kii Jannaayo 73, ee lagu dhisay Wakaaladda CagafCagafyada iyo Hawlaha Beeraha.
MARKUU ARKAY: Warqadda Sum. tahay 676 kuna taarii khaysan 4.5.1978 ee uu soo qoray Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Warqadda lam. yahay LBD/B/DAC/1910/77 kuna saabsan warbixinta Gubashada Bakhaarka (ONAT) ee Xamar
ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in bixinta Khasaarihii ka soo gaaray Wakaaladda Gubashadii Bakhaarka loo xilsaaro Wasaaradda Maaliyadda.

WUXUU XEERAYAA
Qodobka 1aad

In Wakaaladda CagafCagafyada iyo Hawlaha Beeraha (ONAT)laga tirtiro Xisaabteeda wixii khasaare ahaa ee ku yimid gubashadii Bakhaarka oo gaarsiisan lacag dhan Sh.So. 3.491.127,52 (Seddex malyan afar boqol sagaashan iyo kaw kun Boql labaatan iyo todoba iyo konton iyo laba sinti).

Qodobka 2aad

Wakaaladda Cagaf Cagafyada waxay amar u qabtaa inay iska daadiso qashinkii ama dabmaskii ka haray alaabta gubatay

Qodobka 3aad

Wasaaradda Maaliyadda waxaa loo xilsaaray inay la wareegto bixinta qiimaha alaabta oo ku xusan Qod. 1aad ee Xeerkan iyo khasaarihii Bankiga, laga bilaabo taariikhada bakhaaroo ay ahayd 14.12..1977

Qodobka 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa durbadiiba.
Muqdisho 29 7 79

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)
Madaxwaynaha

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka Lam. 1 Bogga lam. 120
Muqdisho, 23 Maajo 1978

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBALKA HARGAYSA

Garsooruhu hadii uu arkay; Dacwadda kor ku xusan,
MARKUU ARKAY: Waxay ku saaban tahay iyo ogeysiiska Bangiga;
HADDU ARKAY: Qod. 69 D.L. 65 N.2 iyo lumidda Buug Kayd Lam. 5554/7 kuna taalo lacag dhan Sh.So. 380/ kuna qoran magaca Xuseen Aadan Maxamed.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonasiiyo Buug Kayd ka dib markii uu ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buug Kayd cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Xuseen Aadan Maxameed ama qof isla asaga ka sita Wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo 15ka maalmood ee aan kor ku soo sheegnay.

Hargaysa 18.6.78

Guddoomiyaha M. G. Hargaysa
Xasan Cali Yuusuf

L. 478

MAXKAMADDA GOBALKA HIIRAAN

MARKAY ARAGTAY: Arjigii uu soo qortay D/le Yuusuf Jaamac Geelle ee ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Beledwayne, Markay ogaatay waxa uu ku saabsan yahay, aragtayna ogeysiiska Bangiga Ganacsiga Ummadda kuna soo qoray warqad L. 000197 T. 6.8.78,
MARKAY ARAGTAY: Qodobka 69 ee soo baxay 9.9.1965.

WXAXAY CADDAYSAY

Lumidda Buugga Kaydka lacagta (Libreto Rispamio) L. 1910 ee ku qoran Sh.So. 243, kana lumay Yuusuf Jaamac Geelle,

WAXAY AMRAYSAA

Markii lagu Faafiyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda in nuskaas loo sameeyo buug cusub oo ah kii lumay badelkiisii mudo 30 bari gudahood ah.

WAXAANA KALE EE LA CODSANAYAA

Ka dib markii la sameeyo buugaas in gacanta laga saaro Yuusuf Jaamac Geelle oo ah ninkii uu ka lumay buuggaasu oo ka tirsan Ciidanka X.D.S. ee Beledwayne.

Beledwayne, 11.8.1978

Gudoomiyaha Maxkamadda G. H.
Dr. Cabdiraxmaan Sseekh.Maxamed

L. 479

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBALKA BANDDDIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga

HADUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 N. 2 lumidda Buug kayd L. 7480, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 3.863/ Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 3aad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Baagg kayd ka dib markii ay ka soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Muumina Sheekh Maxamed ama qof isla asaga ka sita wakaasharci ah, ayadoo la sugaayo muddo 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 14.8.78

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax-

L. 480

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 N. 2 lumidda Buugga Kaydka L. 1299, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 39.878/ Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buugga Kaydka ka dib markii ay ka soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Cabdi Faarax Aadan ama qof isag ka sita Wakaalad Sharci ah, iyadoo lasugaayo muddo 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 8.8.78

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax-

L. 481

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 N. 2 lumidda Jeeg wareega L. 094369, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So.6.000/ Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeeg wareega ka dib markii ay ka soo wareegato 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Haashim Cabdul-Gani ama qof isaga ka sita Wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo muddo 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 2.8.78

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax-

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 N. 2 lumidda Buugga Kaydka L. 10220 kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 12.825/ Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. 2aad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buugga Kaydka ka dib markii ay ka soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Xasna Maxamed Cosoble ama qof iyada ka sita Wakaalad sharci ah,iyadoo la sugaayo muddo 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdsiho 19.8.78

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax-

L. 483

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU RRKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed

WUXUU AMRAYAA

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 N. 2 lumidda Jeeg Wareega L. 46599 oy ku oran tahyay di Shs.So. 5.278,50

In loo cusboonaysiiyo Jeeg wareega ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeega cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Guure Faarax Cusmaan ama qof isla isaga ka sita Wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddo 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 1.9.78

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax-

L. 483/Bis

MAXKAMADDA GOBALKA BARI BOOSAASO

DEGRETO KU SAABSAN BUUGGA KAYD LUMAY

BANGIGA GANACSIGA UMMADDA LAANTA BOOSAASO

OG YAASIIN WAYRAX *M*AXAMUUD

HADAAN ARKAY: Dacwadda Yaasiin Wayrax Maxamuud ee 3.1.78; taasoo uu ka lumay buugga kaydka lam. 881 ayna ku qoran tahay lacag dhan Shs. 613 iyo 94 lix boqol iyo sedex toban shilin iyo sagaashan iyo afar senti, Harayna uga qaatay Bangiga Ganacsiga Laanta Boosaaso.

HADDAAN ARKAY: Warqadda Bangiga ee 12.2.78 lam. yahay 000108 ayna nuqul ogaysiinayaan lumidda buuggaas.

HADDAAN ARKAY: Qod. 69 D.L.9.9.65 N. 2, waxaan caddeynayaa lumidda buuggaas kaydka ee uu leeyahay Yaasiin Wayrax Maxamuud.

WAXAAN AMRAYAA

In loo sameeyo hal buug oo kayd oo cusub Jaalle Yaasiin Wayrax Maxamuud, oo markii hore buuggu ku qornaa, markii ay ka soo wareegato 30 maalmood maalnta lagu Faafiyo Dekereetadaan Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Boosaaso 13.2.1978

Gudoomiyaha Maxkamadda G/ Bari
Axmed Cabdulle Habarwaa

L. 483/Bis

IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

RASMIGA AH

FAAFINTA

JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 15 Sebt. 1978 — 1 R 9

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudcheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 36 ee 5 Sebt. 78, Dib-u-Habaynta Machadka Maamul-Horumarinta iyo Maareynta «SIDAM».- Bogga 598

SHARCI L. 37 ee 3 Okt. 77, Gunno gaar ah la xiriirsan hawlaha Injeyeeriyadda. » 604

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 70 ee 2 Sebt. 78, Magac Wasaaradda Isboortiga oo loo Beddelay Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortiga.- » 605

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 71 ee 5 Sebt. 78, Xeer dib u habaynta Machadka Maamul-Horumarinta iyo Maareynta Soomaaliyeed SIDAM. » 606

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

QAYBTA SEDDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 15.6.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Sheekh Axmed Kaahiye L. 484 » 613

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 17.6.78, Bed. Naado Dhaado Dhul Jaalle Caasha Maxamed Geele L. 485

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 17.6.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Sahra Cabdiraxmaan Cali L. 486. » 614

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaashi Cigaal L. 487

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Cabdullaahi Warsame Ciise L. 488 » 615

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Luul Cali Mataan L. 489

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhu Jaalle Faaduma Cabdullaahi Cali L.490 » 616

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul J.le Qamar Cismaan Ibraahim L. 491

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Cali Haybe Maxamed L. 492 » 617

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Aamina Abuukar Cali L. 493

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Cali Abuukar Cali L. 494 » 618

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Seynab Ibraahim Axmed L. 495

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Duhl Jaalle Faarax Ciise Cabdi L. 496 » 619

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Farxiya Faarax Guuleed L. 497

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaashi Gani L. 498 » 620

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul J.le Jaamac Warsame Jaamac L. 499

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Yuusuf L. 500 » 621

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Maryan Tahliil Warsame L. 501

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.6.78, Naado Dhul Jaalle Cusuba Cabdi Caalin L. 502 » 622

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Sheekh Muuse Jaamac L. 503

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Kltuuma Sheekh Maxamed L. 504 » 623

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdiraxmaan Cali Mire L. 505

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Ibraahim Cabdi Mooge L. 506 » 624

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Dahaba Mooge Jaamac L. 507

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Aamina Cabdi Axmed L. 508 » 625

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul J.le Abdirisaaq Yuusuf Maxamed L. 509

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Faaduma Jaamac Good L. 510 » 626

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Xasan Muuse Sheekh L. 511

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Mursal Aadan Cigaal L.512 » 627

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdulle Maxamed Cali L. 513

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Cabdow Cali L. 514 » 628

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Faarax Maxamed Jaamac L. [illegible] » [illegible]

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Yuusuf Cáliyow L. 516

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Sahra Xaaji Cusmaan L. 517 » 630

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3.7.78, Naado Dhul Jaalle Aadan Cilmi Axmed L. 518

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 2.9.78, Lumid Buug Kayd L. 7108 ku qoran So. Sh. 4.206 uu leeyahay Xeeuns Maxamed Axmed L. 519 » 631

MAXKAMADDA GOBOLKA BANNADIR, 6.9.78, Lumid Jeeg War. L. 24530 ku qoran So Sh. 1.000/- uu leeyahay Cabdullaahi Yaasiin Maxamed L. 520 » 632

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 7.9.78, Lumid Jeeg War. L. 176918 ku qoran So. Sh. 3.6000/ uu leeyahay Axmed Ashkir Cabdi L. 521 » 633

MAXKAMADDA GOBOLKA HIIRAAN 11.9.78, Lumid Buug Kayd L. 1441 ku qoran So. Sh. 16.262/ uu leeyahay Cabdullaahi Maxamed Faarax » 634

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 19.9.78 lumid buug kayd L. 13026 ku qoran Sh.So. 279/ u leeyahay Saciid Cubayd Axmed L. 523

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 21.9.78, Lumid Buug kayd L. 8214 ku qoran So.Sh. 14.09 u leeyahay Axmed Faarax Cilmi L. 524 » 635

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 23.9.78, Lumid Buug kayd L. 11076 ku qoran So.Sh. 1.700 u leeyahay Mukhtaar Maxamed Rooble L. 525

Società Romana in Somalia S.p.A. Sede Kisimaio (Rep. Dem. Somala. Avviso di Convocazione, » 636

QAYBTA KOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 36 Dib-u habaynta Machadka Maamul-Horumarinta iyo Maareynta «SIDAM».

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaankii 21kii Oktoobar, 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada Tiradoodu tahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY: Dekereetada Madaxwaynaha Jamhuuriyadda ee lam. 16 ee 25kii Juun 1968 qodobka 1aad.

MARKUU AQOONSADAY : Baahida loo qabo in la dejiyo habka Maamulka iyo Nidaamka ee salka u ah socodsiinta hawlaha Machadka Maamul-Horumarinta iyo Maareynta Soomaaliyeed «SIDAM»

MARKUU TIXGELIYEY : In dib u habaynta Machadka suuragelin doonto Horumarinta kartida Maareynta iyo Maamulka, taas oo la socota majaraha siyaasadda horumrinta ee Dawladda Kacaanka ;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada.

Wuxuu soo saaray Sharciga soo socda :

Qodobka 1aad

Dhismaha habka iyo awoodda Machadka Maamul-Horumarinta iyo Maareynta Soomaaliyeed «SIDAM».

1. Machadka-Horumarinta iyo Maareynta Soomaaliyeed «SIDAM» ee hoos ku magacaabmi doona «Machadka», ayaa la dhisay. Wuxuuna yeelanayaa jiritaan sharciyeed.

2. Machadka hadda ka dib waa Wakaalad Madaxbannaan ee leh shaqsiyad sharciya.

Qodobka 2aad

B A A X A D D A

1. Machadka waa xarun Dawladda Soomaaliyeed u abuurtay kor u qaadidda habka Maamulka Dawladda iyo Tabarrada aqoonta Maareynta iyadoo ujeeddadu tahay dedejinta dhaqdhaqaaqa Horumarinta kaasoo u baahan cilmiga kor-uqaadka kartida iyo Maareyayaal iyo Maamulayaal aqoon sare leh.

Ujeeddooyinka Machadka

2. Si loo helo, waa in Machadku si gaar ah ugu kacaa waajibaadka soo socda :

b) Waa inuu Machadku soo saaraa ciidan darban oo sita darajooyinka aqoonta sare oo kala ah dibloomayaal iyo Shahaadooyin kale, oo buuxiya baahida dalka dhinaca Maareynta iyo Maamulka.

t) Waa inuu u qabta Dawladda Dhexe, Maamulidda Hoose iyo qaybta bulshada ee dhaqaalaha, hawlo talobixin ah oo saamaynaya dhammaan habka dhismaha iyo shaqada xubnaheeda kala duwan.

j) Waa inuu qorsheeyaa fuliyaa dheerigeliyaana baaristа cilmiga ee ku saabsan Maamul-Horumarnta iyo Maareeynta ayadoo hagaajinta socodsiinta hawluhu tahay bartil-maameedka baaristaasi.

x) Waa inuu faafiyaa, kaalmeeyaana faafinta qoraalka la xiriira Maamul-Horumarinta dhinaca aqoonta (theory) iyo dhinaca waxqabashada. Waa inuu soo saaraa wargeys xilli-wareegta ah (Periodical) oo ku saabsan arrimaha maamulka iyo maareynta.

kh) Waa inuu abaabulaa, hoggaamiyaa, qabanqaabiyaa, Kaalmeeyaana shirarka iyo aqoon-iswaydaarsiyada qaranka iyo kuwa caalamiga ahba.

Qodobka 3aad

Xisaab*aadka* Machadka

1. Machadka wuxuu ku yeelan doonaa Miisaaniyadda Dawladda qayb u gaar ah sannadkii.

H*a*nt*i*da Mach*a*d*k*a.

2. Machadku wuxuu la wareegi karaa hantida iyo qaanta Machadka Maamul-Horumarinta iyo Maareynta ee hadda jira.

3. Dakhliga Miisaaniyadda Machadku wuxuu ka kooban yahay qaybaha soo socda :-

b) Qaybta Dawladda ee ka imanaysa miisaaniyadda dhexe ama/iyo kaalmooyin kaleba.

t) Kaalmada dibadda ee gaar ahaan u suntan Machadka.

j) Wixii dakhli kale ah ee ka soo baxa dhaqdhaqaaqa Machadka.

4. Wax allaale wixii lacag Machadku leeyahay, maamulaha xubinta maamulka guud ayaa ku kaydinaya Bangiga J.D.S. ka furan, isagoo Hormoodka oggolaansho ka qaba.

5. Baaridda Xisaabaadka Machadka waxa loo raacayaa sharciga Wakaaladaha Madax-bannaan.

Qodobka 4aad

A w o o d a h a

Machadku wuxuu leeyahay awood buuxda iyo madax bannaani uu ku qorsheeyo kuna fuliyo barnaamijka hawlihiisa sida waafaqsan siyaasadda dawladda. Wuxuu awood u leeyahay inuu habeeyo arrimaha lama-huraanka u ah siduu u gudan lahaa waajibaadkiisa iyo nidaaminta xubnihiisa, isagoon ka gudbin tixaha Sharcigan.

Qodobka 5aad

K o r m e e r k a

Machadku wuxuu hoos imanayaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyadoo si toos ah Wasiirka ku leeyahay kormeerka. Wasiirka wuxuu awood u leeyahay amar bixinta ujeeddada dhaqangelinta sharcigankan.

Qodobka 6aad

Dhismaha Habka Maamulka iyo Waaxaha

1. Xubnaha Maamulka Machadka waxay ka kooban yihiin kuwa soo socda :

b) Guddiga Guddoonka (Governing Body)

t) Agaasinka Guud

j) Guddiga Maareynta

2. Waaxyaha Machadka waxay ka kooban yihiin inta soo socota :

b) Waaxda Horumarinta Maamulka

t) Waaxda Maareeynta Dhaqaale Maamulka.

j) Waaxda Iskaashatooyinka iyo Horumarinta reer Miyiga

x) Waaxda Afafka

kh) Laanta Maamulka

3. Waxaa Machadka ku xidhiidhsan xarunta Tababarrada Karaaniyada iyo Xoghaynta.

Qodobka 7aad

Guddiga Guddoonka

1. Guddoonku wuxuu ku dhisanyahay sidan hoose :

i)	Wasiirka Shaqada iyo Arr. Bulshada	Guddoomiye
ii)	Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda	Xubin
iii)	Agaasimaha Guud, Qorsheynta Qaranka	»
iv)	Agaasimaha Guud, Wasaaradda Maaliyadda	»
v)	Agaasima Guud, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	»
vi)	Agaasimaha Guud, Bangiga Dhexe	»
vii)	Agaasimaha Guud, Wasaaradda Waxbarashada & Barbaarinta	»
viii)	Agaasimaha Guud, Dawladaha Hoose & Horumarinta Miyiga	»
ix)	Agaasimaha Guud, Hiddaha & Tac. Sare	»
x)	Hormoodka, Machadka SIDAM	Xoghaye

2. Xilka saaran guddoonka wuxuu yahay:-

i) Falanqaynta iyo guddoominta barogaraamka shaqada sannadka xagga cilmi baarista tabarrada, talabixinta, iyo horumarinta Afka.

ii) Inuu qiimeeyo hawl-qabadka Machadka iyo,

iii) Inuu ku kaalmeeyo Machadka sidii uu waxqabadka u kordhin lahaa oy u dhib yaraan lahayd socodsiinta hawlaha Machadka, iyo sida wada shaqeyn qumman Machadka ugu heli lahaa laamaha kale ee Dawladda ee u baahan shaqada Machadka.

Qodobka 8aad

Agaasinka Guud

1. Machadku wuxuu leeyahay aqoonsi guud oo uu ka madax yahay Hormoodka Machadka. Waa in uu ahaado aqoonyahan sare ee Machadka ka tirsan. Dhinaca Maamulka wuxuu hoos imanayaa awoodda Wasiirka Shaqada.

Waxay darajadiisu la siman tahay tan Hormoodka yadda Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

2. Wuxuu ka mas'uul yahay fulinta ujeeddooyinka hadka.

3. Wuxuu sharci ahaan u meselayaa Machadka

4. Waa inuu si daacad ah uga socdaa tusaalooyinka sadeed ee Wasiirka Shaqada, hubiyaana inay si daaca dhaqan geliyaan shaqaalihiisu.

5. Inuu fuliyo hawl-maamulka Machadka.

6. Isaga ayaa ka jawaabaya heerka kartida waaxaha hadka oo dhan .

7. Isaga ayuu saaran yahay xilka iyo maamulka saabsan xisaabaha, lacagta Machadka sida waafaqsan yada Wakaadaha madax bannaan.

8. Markuu shaqada ka maqnaado hormoodka Ma ama ay jiraan sabab ka reebeysa shaqada, waxa xilka meel gaar ahaan u qabanaya qofka ugu sareeya ee n waaxaha.

Qodobka 9aad

Guddiga Maareynta

1. Guddiga Maareynta Machadka wuxuu ka koc hay :

b) Hormoodka Machadka oo Guddoomiye ka ah.

t) Madaxda Maamulka Waaxaha Machadka xu ah.

Waa inuu isla markaa guddiga wada-shaqeyn la shaqaalaha aqoonyahaannada ah ee ku hawlan taba talabixinta iyo cilmi baarista.

2. Guddiga Maareynta wuxuu awood u leeyahay ujeedda gaara yeesho inuu isugu yeedho guddiyo haw hoose iyo kooxo hawleed kuwaas oo ay ka soo qayb geli xildhibaano ka wakiil ah Wasaaradaha/Wakaaladaha inta khusayso, si ay uga qayb qaataan qorsheynta iyo mij dejinta.

3. Xilka saaran guddiga Maareynta waxa weeye :-

b) Diyaarinta barnaamijka hawsha ee sannadka horgeeynayo guddoonka.

t) Raacdaynta iyo gorfeynta barnaamijka haw la guddoomo afarta xilli ee sannadka.

j) Tilmaanta arrimaha u baahan in la horgeeyo

x) Qabanqaabada kooxo-hawleedka tababarrada, talabixinta iyo cilmi baarista magacaabidda hoggaamiyayaasha kooxo-hawleedyada.

kh) Tixgelinta codsadyada gaar ka ah ee ka yimaada Wasaaradda ama Wakaaladaha ee saameyn kara in isbeddel ku dhaco barnaamijka hawsha Machadka.

d) Tixgelinta arrintii kale ee walba ee uu soo jeediyo guddoomiyuhu.

Qaybta Afaraad

Qodobbada ku meel-gaadhka iyo dhammaystirka

Qodobka 10aad

Ka Qayb galka Jamciyadda Qaruumaha

1. Muddada uu soconayo kaalmada wada-shaqaynta taknikada Qaruumaha ka-dhexeyaa u fidiso Machadka waa in loo tixgeliyaa xeerarka ku dhigan qorshaha socodsiinta ee qayaxaya shuruudaha xukumaya wada-shaqaynta si toos ah lagala heshiiyo dawladda J.D.S., sidii oo qodobo ku meel-gaadh ah oo sharcigan ka tirsan.

2. Sidoo kale waa in loo tixgeliyo wixii isbeddel laga heshiiyo ku dhaca xeerarka Qorshaha socodsiinta ee kor ku xusan faqradda (1).

Qodobka 11aad

Wax allaale wixii aan sharcigan lagu xusin kuna saabsan tacliinta iyo asluubta waxa la raacayaa sharciga Jaamacadda Ummadda ee lamb. 72 ee Sebtember 1977.

Qodobka 12aad

Haddii baahi timaado Madaxweynuhu wuxuu soo saari karaa xeer hoosaad lagu faah-faahinayo sharciga, isagoo tixgelinaya talada uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Qodobka 13aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo taariikhda uu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah.

Sharcigan wuxuu ku biirayaa sharciyada dalka ka-dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 5 Sebtember, 1978

Jaalle Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA J.D.S.

SHARCI L. 37 Gunno gaar ah la xiriirsan hawlaha Injeyeeriyadda.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo kuna saabsanaayeen Habka Maamulka Guud ee Dawladda ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lagu dhisay Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed ;

ISAGOO TIXGELINAAYA : In wax soo saarka hawlaha la xiriirsan Injiyeeradda uu ku xiran yahay xirfadda iyo isxilqaanka farsamo-yaqaannada Soomaaliyeed :

ISAGOO TIXGELINAAYA : In ay farsamo-yaqaannada Wakaaladda Hindiisaha Soomaaliyeed ay shaqeeyaan saacado dheeraad ah ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay lagama maarmaan tahay in la siiyaa farsamo-yaqaannada Wakaaladda gunno gaar ah taasoo lagu dhiirigelinaayo fulinta hawlaha Injeyeeriyadda oo ay qabtaan ;

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee Xisbiga H.K.S. iyo Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

Qodobka 1aad

Kooxo farsamo-yaqaannada ee Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed oo ka qayb qaata fulinta hawlaha Injeyeeriyadda ee mashaariicda, waxaa loo siinaayaa gunno ahaan lacag oo dhan 20% dakhliga Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed ka soo gala hawshaas.-

Qodobka 2aad

Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud wuxuu soo saari karaa isagoo tixgelinaya talada u soo jeediyo Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed Xeer-kaabe oo ku faahfaahinaayo habka ku dhaqanka iyo qaybinta gunnada ku tilmaaman sharcigan.-

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta u saxiixo Jaalle Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 3 Oktoobar 1977

MADAXWEYNAHA J.D.S.

QAYBTA LABAAD

X E E R

L. 70 Magaca Wasaaradda Isboortiga oo loo beddelay Wasaaradda Dhallinyarada & Isboortiga —

MADAXWEYNAHA J.D.S.

) ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-nka 21kii Oktoobar 1969 ;

) ARKAY : Sharciyada L. 17, 18 iyo 19 ee 1da Luulyo 6 ee ku saabsanaa la wareegidda Xisbiga H.K.S. Xukun-iyo Maamulkii dalka ;

) ARKAY : Sharciga L. 12 ee 3 Juunyo 1962 ee Maa-ulka Guud ee Dawladda iyo beddelaadii ka dambeeyay ;

) ARKAY : Sharciga L. 15 ee 3dii Luulyo 1977 ee lagu say Wasaaradda Isboortiga.

) TIXGELIYAY : Talada uu soo jeedíyay Wasiirka saaradda Isboortiga oo la xiriirtay beddelaadda magaca saaradda.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

gaca Wasaaradda Isboortiga ee ku dhisnaa Sharciga L. lii Luulyo 1977 waxaa loo beddelay Wasaaradda Dhallin-& Isboortiga.

Qodobka 2aad

erkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo aafinta Rasmiga ah ee Dawladda.-

qdisho, 2. 9 1978.

RKA WASAARADDA ISBOORTIGA

r. Cabdiqaasim Salaad Xasan

Jaalle Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER L. 71 dib u habaynta Machadka Maamul-Horumarinta iyo Maareynta Soomaaliyeed «SIDAM».

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ASAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 ;

ASAGOO ARKAY : Sharciyada tirsigoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee 1dii Luulyo 76.

ASAGOO ARKAY : Sharciga Lam. yahay 36 ee 5.9.78 ee ku saabsan dhismaha Machadka Maamul-Horumarinta iyo Maareynta Soomaaliyeed.

2) Modifica degli articoli da 2 a 6; 8; da 10 a 13; da 15 a 16 da 18 a 20; da 22 27 dello Statuto Sociale:

Avranno diritto di partecipare alla Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la sede sociale in Kisimaio o gli Uffici di Recapito della SAIS in Milano, piazza degli

Affari n.3 oppure presso le seguenti casse:
— Banca di Roma per la Svizzera Italiana di Lugano;
— Credito Italiano, Sede di Milano;

— Lemanik — Corso Elvezia n. 10 Lugano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

. 600/bis

IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 1 Nof. 78 — L. 11

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo geoyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 42 ee Okt. 78, Xoojnta Afka Carabiga iyo wax ka badalid Sharciga Waxbarashada. Bogga 710

SHARCI L. 43 ee 1 Nof. 78, wax ka badalid Sharci lam. 15 ee 25ka Jennaayo 1969. Sharciga badbaadada Ugaarta iyo Dhirta. » 713

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWAYNAHA JDS, L. 77 ee 15 Okt. 78, Magacaabid ku meel gaarka ah (Reggente) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Max. Bad. Dalka » 715

XEER MADAXWAYNAHA JDS, L. 78 ee 15 Okt. 78, Ka noqosho Beddel. » 716

XEER MADAXWAYNAHA JDS, L. 79 ee 15 Okt. 78, Ka noqosho Beddel. » 717

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 80 ee 17 Okt. 78, Habka Qaybinta gunnada gaarka ah ee hawlaha Injiyeeradda Wakaaladdda Hindisaha Soomaaliyeed. Bogga 718

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 81 ee 6 Maajo 78, Dhul Dowladeed gatay gacantana loo geliyaya (Libra Disponibilita') Jaalleyaasha Maxamed Jaamac Axmed iyo Cabdi Xaaji Faarax Maxamed ku yaal Kismaayo kuna fadhiya mq. 321. » 723

QAYBTA SEDDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Saciid Maxamed Cabdulle L. 601 Bogga 725

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdiraxmaan X. Daahir L. 602

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdikariin Canshuur Cabadalla L. 603 » 726

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Aadan Maxamed L. 604

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Xasan Maxamed Cumar L. 605 » 727

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cismaan Yuusuf Cabdullaahi L. 606 [redacted]

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdi Aamin Cali L. 607 » 728

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Xuseen Kooshin L. 608

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdi Xaaji Yuusuf L. 609 » 729

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Cabdi Cabdullaahi L. 610

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Suleymaan Cali Nuur L. 611 » 730

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Shariif Cumar Maxamed L. 612

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cibaada Maxamed Maxamuud L. 613 » 731

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Dr. Muuse Maxamed Cabdikariin L. 614

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 2.8.78 Bed. Naado Dhul Jaalle Sha; Axmed Xasan Cabdulle Cabdi Daahir Axmed iyo Cabdisalaam Axmed L. 615 » 732

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 1.11.78 Lumid jeeg wareega L. 062917 ku qoran Sh.So. 4.000, ay leedahay Canab Xuseen Weyal » 733

MAXKAMADDA GOBALKA HARAGEYSA, 30.10.78 Lumid Jeeg wareega L. 698151 ku qoran Sh.So. 4.500 u leeyahay Cabdi Xasan Cali L. 615/Bis L. 616/Bis

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 42 ee 31 Okt. 78, Xoojinta Afka Carabiga iyo wax ka beddelid sharciga waxbarashada

Madaxweynaha J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciga am. 17,18 iyo 19 ee Luulyo 1976 ee Habka Maamulka Guud ee Dawladda.

ISAGOO AQOONSADAY : Baahida loo qabo in Afka Carabiga ee wax lagu barto laga dhigaa heer kasta ee Dugsiyada, Jaamacadda Ummadda iyo Machadka Macallimiinta taasoo loola danleeyahay in la xoojiyo barashadiisa iyo wax ku baridiisaba, waxna lagu kordhiyaa iyo laga beddelaa sharciga Waxbarashada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Xoojinta Afka Carabiga

Afka Carabiga ee Dugsiyada lagu dhigto waa in la xoojiyo ayada oo la raacayo nidaamka soo socda:

1. Dugsiyada

   b. Barashada Afka Carabiga waa ku Khasab arday walba heer kasta ha dhigtee,

   t. In heerak Waxbarashada Asaasiga ah iyo heerka Sare lagu barto Af Carabi Maadooyin kale, hadba sida Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarintu u Qorsheyso

   j. Afka Carabiga waxa uu ka mid yahay maadooyinka Asaasiga ah xagga Imtixaanka Naqliga ah,

2 Machadka Macallimiinta

   b. In Macallimiita lagu tababaro Macallimiinta Khasab looga dhigo iney baraan Af Carabiga, kuna bartaan Afka Carabiga, kuna bartaan Afka Carabiga Maadooyinka kale qaarkood, sida Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarintu u qorsheyso, si Macallinku karti ugu yeesho wax-ku baridda Afka Carabiga.

Qodobka 2aad

SANOOYINKA WAXBARASHADA

Qodobka ee sharciga Waxbarashada amb. 25 ee 22.1.1976. waa la bdelay waxaana loo akhriyi doonaa sida soo socota:

1. Qaybaha Waxbarashada

Qaybaha Waxbarashada waxay u kaal baxaan laba heer

1. Heerka Waxbarashada Asaasiga ah.
2. Heerka Waxbrashada Sare.

2. Sanooyinka Waxbarashada

b. Sanooyinka Waxbaashada ee Heerka Asaasiga ah iyo kan Sare waa laba iyo toban sano (12)

t. Waxbarashada Asaasiga ah; waa sideed sano (8) sano oo khasab ku ah ilmaha gaara da'da lix jir ilaa iyo 14 jir Waxbarashada heerkani waa isku bixis hal heer ah.

Qodobka 3aad

Qod. 13aad ee Shacga Waxbarashada lamb. 25 ee 22.1.76, waa la beddelay, waxaania loo akhriyi doonaa sida soo socda:
Qodobka 13aad
Asluubta Ardayda:

Ardayda ku xad dhaafta waajbaadka iyo nidaamka Dugsiga, Sharafta iyo Cisaynta barayaasha iyo madaxda kale ama u gefta asluubta toosan waxay mutaysanayaan edbis.

EDBINTA:

Waxay noqon kartaa sida socota iyadoo ay mar waliba la tixgelinayo hadba in uu leeyahay fal xumada ardayga ku kacay:

b. Canaan oo afka ah,

t. Canaan qoraal oo loo gudbiyo Waalidka Arydaga,

j. Ka joojinta hal cashar ama wax ka badan ee hal maalin

x. Ka joojin Casharo oo socon kara ilaa 15 maalmood,

kh. Ka joojin dersi muddo hal sanno ee Waxbarasho ah.

HABKA EDEBTA

Waxaa lagu caddeyn doonaa xeerkaabe ay soo saari doonto Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, oo uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

Qodobka 4aad

XEERKABE

1. Wasiirka Wasaaradda Tacliinta Sare wuxuu soo saari karaa xeer-kaabe oo faahfaafin ka bixinaya habka ugu wacan oo loogu dhaqan gelinaayo sharciga Jaamacadda Ummadda.

2 Wasiirka Wasaaradda Waxbaashada iyo Barbaarinta isna wuxuu soo saari karaa xeer-kaab oo faahfaahin ka bixinaya habka iyo barnaamijka loogu talo gali doono dhaqangalka sharcigan inta ku saabsan Dugsiyada Hoose, dhexe iyo Sare iyo Machadka Macallimiinta.

Qodobka 5aad

1. Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa sannadka Waxbarashada ee 1977/1978
2. Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Dowadda

Muqdisho 31 Oktoobar 1978

Madaxweynaha J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 43 ee 1 Nofembar 78, Wax ka beddelid sharci lamb. 15 ee 25ka Jennaayo 1969; sharciga badbaadada Ugaarta iyo Dhirta.

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad, tan 2aad iya tan 3aad

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. 15 ee soo baxay 25kii Jennaayo 1969 iyo sharciga lambarkiisun yahay 68 ee 31ka

MARKII LA TIXGELIYAY: inay lagama maarmaan tahay in la nabad geliyo ugaarta iyo bahalada Waddanka ku nool oo Dhaqaalaha Dalka qiimo wayn ugu fadhiya;

MARKUU ARKAY: In loo baahan yahay in dib loo habeeyo shaciga ugaarta iyo Dhirta ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY : Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ;

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Iyadoo Sharciga lamb. 15 ee 25ka Jennaayo 1969 uu sidiisii u taagan yahay, dilka Ugaarta iyo bahalada ku xusan Qodobka 2aad iyo Qod. 3aad ee soo socda iyo haysashada wixii ka yimaada naflaydaas waxaa lagu dhaqayaa shacigan.

Qodobka 2aad

Qof kasta oo si sharc darro ah u dila maroodi, Wiyil, lo'gesi Shabeel, Muqshabeel, haramcad dameer farow, geri iyo Jeer ama lagu helo asagoo si sharci darroah ku haysta ilko, harag, gees, ama wixii kaloo ka yimaada naflaydaas waxaa lagu ciqaabayaa shan (5) sano ilaa toban (10) sano oo xarig ah, iyo shs. 10.000 (tobankun) ilaa 20.000 (labaatankun) oo ganaax ah

Qodobka 3aad

Qof kasta oo si sharci darro ah ku dila: dabataag, Biciid, goodir, dameer dibadeed, cawl ama gata ama lagu helo asagoo si shaci darro ah ku haysta harag, gees ama wax kastoo ka yimaada Ugaataas, waxaa lagu Ciqaabayaa 2 (laba) sano ilaa 5 (shan) sano oo xarig ah, ama Shs. 3.000 (saddexkun) ilaa Shs. 15.000 (shaniyotobankunn) oo ganaax ah ama labada oo laysugu daro.

Qodobka 4aad

Ciqaabta ku xusan Qodobka 2aad iyo Qodobka 3aad ee Sharcign waxaa lagu kordhinayaa seddex u dhig meel ilaa seddex u dhig laba meelood (da un terzo a due terzi) haddii:

1. Danbiga ay wada galeen seddex qof iyo wixii ka badan;
2. Ugaarta lagu laayo xirmooyinka ugaarta dhexdooda;
3. dadka danbiga lagu helay ay ka hortagaan ama u hogaansami waayaan Ciidamada Nabadgelyada ama Ciiamada ugaarta ilaaliya;
4. waxaa ugaarta ka yimid ee lagu qabtay qiimahoodu ka badan yahay Shs. 20.000 (labaatankun).

Qodobka 5aad

Qofkii asagoo ugaarsanaya, gala denmbi ka weyn ama ka duwan kuwa sharciganu sheegayo, waxaa lala aadayaa xeerarka kale ee Ciqaabta.

Qodobka 6aad

Sharcigani wuxuu la soconayaa mabaadii'da guud ee ku xusan Buugga 1aad ee xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Qodobka 7aad

Dambiyada sharcigaan laga galo waxaa awood qaadistooda leh Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laamaha Gobollada.

Qodobka 8aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama la socon karin shargaan waa la baa'biyay.

Qodobka 9aad

1. Shaciganu wuxuu dhaqan galyaa 15 maalmood ka dib marka la saxiixo, waxaana lagu daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

2. Cid kasta waxaa waajib ku ah inuu dhawro Sharcigaan, u fuliyana sida sharciyada Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 1 Nofember 1978

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Madaxwaynaha J.D.S.

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 77 ee Okt. 1978, Magacaabid ku meel gaarka ah (Reggente) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka.

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad, iyo 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO CUSKADAY: Sharciyada L. 17,18,19 ee 1da Luulyo 1976 oo soomaynayaan in Maamulka Guud ee Dowladda la Wareegay XisBiga H.K.S. lalana Akhriyo Sharci L. 3 ee 10kii Jannaayo 1970 iyo Beddelaaddii ka dambeeysay ee ku saabsan Dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Xeer Ilaalinta Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka;

ISAGOO GARTAY: In ay lagama maarmaan tahay in la Magacaabo si ku meel gaar ah (Reggente) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka, Maadaama kan hore ku Magacaawnaa uu meesha ka maqan yahay;

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

eiiyahE

Waxaa la Magacaabay inuu ku meel Gaarka (Reggente) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka Soomaaliyeed, Jaalle G/le Sare Dr. Cusmaan Maye Macalin, oo ka tirsan Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta la saxiixo waxaana lagu faafinayaa Xaashida Rasmiga ah (Bollettino Ufficiale) ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed.

Muqdisho 15 Okt. 1978

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
Madaxwaynaha J.D.S.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
Diiwaanka Lamb. 5 Bogga Lamb. 177
Ku Xigeenka Hantidhowrka Guud
Sax. Xusseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 78, ee 15 Okt. 78, Ka noqosho Beddel.

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY: Warqaddii 1aad tii 2aad iyo tii 3aad ee Kacaankii 21 Oktoobar

MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 17,18 iyo 19 ee soo baxay 1.4.70 iyo Beddeaaddii ka dambeeysay (Sharciga Shaqaalaha Dawladda).

MARKUU ARKAY: Xeer L. yahay 18 ee 29.1.1976 oo lagu dhisay xafiiska Garyaqaanka Guud ee Doladda.

MARKUU ARKAY: Go'aankii uu gaaray Madaxweyne ku xigeenka J.D.S. ahna Kaaliyaha Madaxwaynaha Arrimaha Maamulka Dawladda.

Qoobka 1aad

In Jaalle Cabduraxmaan Sheekh Nuur oo ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda laga noqday beddelkii uu u joogay Bankiga Horumarinta Soomaalida, waxaana lagartay inuu ku soo noqdo Xarunta Xafiiska Garyaqnaaka Guud.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla markuu uu saxiixo Madaxweysaha J.D.Sii waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Oktoobar 1978

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 79 ee 15 Okt. 1978, Ka noqosho Beddel.-

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY : Warqaddii koowaad, tii labaad iyo tii saddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969.

MARKUU ARKAY : Qodobbada kala ah 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1.7.1979.

MARKUU ARKAY : Sharciga L. yahay 20 ee soo baxay 1.4.7 iyo beddelaaddii ka dambeeyay (Sharciga Shaqaalaha Dawladda).

MARKUU ARKAY : Xeerka L. yahay 18 ee 291.1976 oo lagu dhisay Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

MARKUU ARKAY : Go'aankii uu gaaray Madaxweyne Ku Xigeenka J.D.S. ahna Kaaliyaha Madaxweysaha Arrimaha Maamulka Dawladda.

WUXUU XEERAYAA :

Qodobka 1aad

In Jaalle ILIYAAS XAAJI MAXAMUUD oo ka tirsan

fiihka Garyaqnka Guud ee Dawladda laga noqday beddelkii uu u joogay Wasaaradda Hawlaha Guud, waxaana la gartay inuu ku soo noqdo Xarunta Xafiiska Garyaqaanka Guud.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Oktoobar 1978

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha J.D.S.

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 80 ee 17 Okt. 78 Habka Qaybinta gunnada gaarka ah ee Howlaha Injiyeeriyadda Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed.-

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY : Xaanshada 1aad, 2aad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga 1.14 ee 3 Juunyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeeyay kuna saabsanaa Habka Maaf ulka Guud ee Dawladda ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga 1.28 ee 16.6.1978 ee Dhismaha Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo xeerka tir. yahay 62 ee 25 Maajo 1978 oo ku saabsan Nidaamka Khidmadda ee Wakaaladda ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga tir. yahay 37 ee 3 Oktoobar 1977 ee Gunnada Gaarka ah oo ay yeelanyaan Farsamayaqaannada ka qayb qaata fulinta howlaha Injeyeeriyadda ee Wakaaladdu qabato ;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in la habeeya lana xeereeya habka qaybinta gunnada qaybinta gunnada gaarka ah ee la siinaayo Kooxda Farsamoyaqaannada ka qayb qaata howlaha Injiyeeriyadda oo ay Wakaaladdu qabato ;

ISAGOO TIXGELINAAYA : Talada u soo jeediyay Maareeyahay Guud ee Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed.

WUXUU XEERAYAA :

Qodobka 1aad

Gunnada gaarka ah oo ku tilmaaman Sharciga tirsigiisu yahay 37 ee 3 Oktoobar 1977 waxaa yeelanayaa kaaliye qofka farsamayaqaanka ah iyo shaqaalaha kalee oo si buuxda ah uga qayb qaata fulinta howlaha Injiyeeriyadda oo Wakaaladdu qabato uguna timaada dakhli sida u qoraayo Xeerka Madaxweynaha 1.62 ee 25 Maajo 1978 kuma saabsan Nidaamka Khidmadda ee Wakaaladda.-

Qodobka 2aad

Inta lacag ahaan oo qofka yeelanaayo gunnada gaarka ah ee kor lagu soo xusay, waxay ku xirnaanaysaa fulinta shuruudaha socda :

i — Inuu qofka si buuxda iyo si toosba uga qayb qaato fulinta howlaha Injiyeeriyadda oo ay Wakaaladdu qabato ugana timaada dakhli ;

ii — Inta ay la egtahay howsha u qabtay iyo nooca nowsha oo qofka qabtay.-

Qodobka 3aad

Habka qaybinta gunnada gaarka ah oo lagu soo tiimaamay Sharciga 1. 37 ee 3 Oktoobar 1977 iyo xeerkan, waa sida ku lifaaqan isla xeerkan. waxaana loo aqoonsanayaa Lifaaqa «A». — oo koobaya seddex warqadood.-

Qodobka 4aad

Maareeyahay Guud ee Wakaaladda isagoo tixgeelinaaya Xeerkan iyo talada u soo jeediyo Maareeyaha Waaxda ay Fulinayso Howlaha Injiyeeriyadda wuxuu ka talinayaa qiimeynta shaqada qof kasta qabtay iyo inta lacag ahaan qof kasta qabtay iyo inta lacag ahaan of kasta ku yeelanaayo gunnadaas.

Gunnadaas gaarka ah waxaa la bixinayaa seddexdii bilood mar, ama wax ka yar muddadaas haddii uu Maareeyaha Guud ee Wakaaladdu ay la noqoto in ay jiraan dakhli oo mudan qaybinteeda.-

Qodobka 5aad

Gunnada gaarka ah waxaa kalee la siin karaa farsamoyaqaanno kale iyo shaqaale kale oo ka qayb qaata fulinta howlaha Injiyeeriyadda oo Wakaaladdu qabato oo aan ka tirsanayn Wakaaladdu haddii ay Wakaaladdu u baahato shaqadooda.-

Qodobka 6aad

Gunnada gaarka ah ee xeerkan lagu soo sheegay waxaa dulsaaran canshuurta bollada.-

Qodobka 7aad

Xeerkan wuxuu la dhaqan galayaa Sharciga 1. 37 e 3 Oktoobar 1977 oo lagu dhisay Gunnada gaarka ah.-

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.-

Muqdisho, 17 Okt. 1978

WASIIRKA

WASAARADDA HOWLAHA GUUD
(Inj. Maxamed Xawaadlee Madar)

PROGETTI EDILI TIPO A

I - Progetto Architettonico	36%
1 - Progettisti	16%
2 - Disegnatori	17%
3 - Topografi	3%
II - Progetto Struttuhe	26%
1 - Progettisti	15%
2 - Disegnatori	9%
3 - Laboratoristi	2%
III - Progetto Impianto Elettrico	8%
1 - Progettisti	4,8%
2 - Disegnatori	3,2%
IV - Progetto Impianto Idrico	5%
1 - Progettisti	3%
2 - Disegnatori	2%
V - Preparazione Documenti	25%
1 - Computisti	4%
2 - Preparatore dei Capitolati	2,5%
3 - Dattilografi	4%
4 - Personale Ausiliario	10%
5 - Spese Vari	1,5%

PROGETTI EDILI TIPO B

I - Progetto Architettonico	26%
1 - Progettisti	14%
2 - Disegnatori	9%
3 - Topografi	3%

II - Progetto Strutture	36%
1 - Progettisti	16%
2 - Disegnatori	17%
3 - Topografi	3%
II - Progetto Strutture	36%
1 - Progettisti	16%
2 - Disegnatori	17%
3 - Topografi	3%
III - Progetto Impianto Elettrico	8%
1 - Progettisti	4,8%
2 - Disegnatori	3,2%
IV - Progetto Impianto Idrico	5%
1 - Progettisti	3%
2 - Disegnatori	2%
V - Preparazione Documenti	25%
1 - Computisti	7%
2 - Preparatore dei Capitolati	2,5%
3 - Dattilografi	4%
4 - Personale Ausiliario	10%
5 - Spese Vari	1,5%

PROGETTI INFRASTRUTTURE

I - Rilievo Topografico	26%
1 - Topografo	26%
2 - Disegnatori	16%
II - Rilievo Geotecnico	12%

1 - Geotecnico	8%
2 - Laboratoristi	4%
III - Progetti Infrastrutture	23%
1 - Progettisti	15%
2 - Disegnatori	8%
IV - Progeetto Strutture	16%
1 - Progettisti	10%
2 - Disegnatori	6%
V - Preeparazione Documenti	25%
1 - Computisti	7%
2 - Preparazione Capitolati	2,5%
3 - Dattilografi	4%
4 - Personale Ausiliario	10%
5 - Spese varie	1,5%

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUR L. 81 ee 6 Maajo 78, Dhul Dowladeed gateen, gacantana loo geliyey (Libera Disponibilità) Jaalleyaasha MAXAMED JAAMAC AXMED iyo CABDI XAAJI FAARAX MAXAMED ku yaal Kisimaayo kuna fadhiya mq. 321.-

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ISAGOO ARKAY : Warqaddii Koowaad, labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soo maaliyeed ;

ISAGOO ARKAY : Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Seebteembar 1973 ;

ISAGOO ARKAY : Xeer Dowladeed lamb. 291 Rep. taariikhda markay ahayd 11 Sebt. 1968, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah J.D.S. N. 7 al N. 12 ee 30.12.1968, taas oo lagu siiyeey Jaalle MAXAMED CABDALLA CISMAACIIL cad dhul ah ujeeddadiisu tahay dhis kuna fadhiya mq. 743/- kuna yaal Kisimaayo ;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda, taariikhdeeduna ahayd 3.7.1968, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga W.H.G. Waaxda W.H.G. Waaxda Farsamada dhulka ee Xamar kana ahaa Guddoomiye Inj. Abuukar Maxamed ;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijintii Farsamada ka tirsan W.H.G. ee Gobolka Kisimaayo, taariikhdeeduna ahayd 11.3.78 soo qoray Agaasimaha Hawlaha Guud Jaalle AADEN MAXAMED QAALIB taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismamaha oo ay oggolaatay Laanta Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud ee Xamar, laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsantahay, kuna fadhiya mq. 321 ;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Kisimaayo laguna siiyey xaashida lamb eber taariikhdeeduna ahayd 1.9.1977 oo siisay Xafiiska Caafimaadka Guud Gobolka Jubbada Hoose oo caddeyneysa in guriga lagu noolaankaro ;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (Atto) lamb. 1232 Reb. taariikhdeeduna ahayd 6.8.1968 lagu diiwaan geliyey Xamar 11.8.1968, al n. 582 Atti Pubblici Vol. 18 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali, taas oo MAXAMED CABDALLA CISMAACIIL ka gaday kuna wareejiyey MAXAMED JAAMAC AXMED iyo CABDI FAARAX MAXAMED wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismahii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 321/- kuna Yaal Kisimaayo.

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsanaa siismada iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaal Kisimaayo oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis wuxuu soo saaraayaa ;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday MAXAMED JAAMAC AXMED iyo CABDI XAAJI FAARAX MAXAMED, dhul ku fadhiya mq. 321/- kuna yaal Kisimaayo.-

Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :-
Waqooyi waxaa ka xiga : dhismaha Wasaaradda Boosaha & Isgaarsiinta.

Koofur waxaa ka xiga : guri uu iska leeyahay Jaalle Maxamed Cabdalla Ismaaciil.

Galbeed waxaa ka xiga : guri uu lahaa Ex Rosi Francesco.

Bari waxaa ka xiga : Waddo.-
Muqdisho, 6 Maajo 1978.-

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Inj. Maxamed Xawaadle Madar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 21
Muqdisho, 14 Maajo 1978
Ku Simaha Hantidhowrka Guud
Dr. Axmed Shiree Maxamuud.-

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO LA MID AH

WAAXDA HAWLAHA DUUD WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA —NAADO DHUL—

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sacdiya Maxameed Cabdallaa ay soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 22.3.78 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangolaare Addimihiisuna yihiin 30X20 Kuna fadhiya 600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 72 B.
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 70 B
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 74 B.

Qofkii daneynayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu qoray Buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalnaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 601

WASAARADDA HAWLAHA GUUD WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdiraxmaan X. Daahir uu soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 28.5.78 uu ku weeydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangolaare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam. 100 B
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 97 B.
Bari waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalnaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 602

WASAARADDA HAWLAHA GUUD WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdikariin Canshuur uu soo qortay Arji Waada Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalinii taariikhdu ahayd 28.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul dhiya Dowladeed oo ku yaal Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 95 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 94 B.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 98 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

—AGAASIMAHA WAAXDA SH. DEG. MAGAALAYNTA—
INJ. CABDIKARIIN C. GUULEED

L. 603

WASAARADDA HAWLAHA GUUD WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Aadan Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 9.1.78 uuku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdm.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 81 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa —a xiga: Dhul lam.80 B.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 84 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & MAGAALAYNTA.
INJ. Cabdikariim C. Guuleed

L. 604

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa lacaddeynayaa in Jaalle Xasan Maxameed Cumar uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 3.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Adimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 79 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa kā xiga: Dhul lam. 78 B.
Bari waxaa xa xiga : Dhul am. 82/B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 605

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
—NAADO DHUL—

Waxaa la caddynaaa in Jaalle Cismaan Yuusuf Cabdullaahi uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 8.12.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaaladatan Xamar Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 17 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 16 B.
B a r i waxaa ka xiga: 20 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 606

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Aamin Cali uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 12.12.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Adimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 43 B.
Koofur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 42 B.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 46 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 607

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
—NAADO DHUL—

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmeed Xuseen Kooshin uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 28.12.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X3 0kuna fadhiya 60 mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 41 B
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 40 B
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 44 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEGAANKA MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN C. GUULEED

L. 608

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Xaaji Yuusuf uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 3.5.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladtan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

— SOODHIMISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 609

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Cabdi Cabdullaahi uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, Maalintii taaiikhdu ahayd 28.5.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiiuna yihiin 20X40 kuna fadhiya1200 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 5 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Wadada Balcad
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 13 B. iyo 14 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 610

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Suleeybaan Cali Nuur uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 28.5.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Addimhiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 1200 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 12 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 6 B. iyo 7 B.
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 611

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shariif Cumar Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 16.6.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladata nXamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Addimihiisuna yihiin 60X40 kuna fadhiya 2.400 mq.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Wadad Balcad
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cibaada Maxamed Maxamuud uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 2.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare, Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 78 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 79 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 613

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Dr. Muuse Maxameed Cabdikariin uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 28.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul Doladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Addimihiisuna yihiin 60X20 kuna fadhiya 1200 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhunl lam. 97 B. iyo 99 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 96
B a r i waxaa ka xiga: Jid

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddenayaa i ndhulkii uu soo wadydiistay Jaalle SHA. Axmeed Xasan Cabdulle, Cabdi Daahir Axmed iyo Cabdisalaan Axmed maalintii 21.10.67 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore qaabkiisuna ahaa Afar Geesis-le ceg addimihiisuna ahaayeen 100X100 kuna fadhiya mq. 10.000 sababtoo ah Qorshaha dhulka oo is beddelay.

Sidaas aawgeed Naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1541/2381 ee Taar. 30.11.68 kana baxday xafiiskaan, waxay isu bedeeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaallayaashaas Qaabkiisu waa Regtangolaar Addimihiisuna yihiin 60X40 kuna fadhiya mq. 2.460

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 51-52 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a ri waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 615

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDII ARKAY : dacwadda kor ku qoran ;
MARKUU ARKAY : waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga ;
HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L.9-9-65, 2; lumidda Jeegga wareega L. 062917 ay ku qoran tahay di Sh. So. 4.000, Bangiga Ganacsiga L. 3aad.

WUXUU AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Jeeg Wareega ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Jeega cusub ee a sameyn doono gacanta laga saaro Canab Xuseen Weyd ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudda 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegna .-

Muqdisho, 1-11-78.

GUDDOOM. MAX. GOBOLKA BANAADIR
(W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 615/Bis.

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA
Dekreeto Lamb. 12/78

Cabdi Xasan Cali . . . . . Dacwoode Garsooruhu,

Haddii uu arkay Dacwadda kor ku xusan,
MARKUU ARKAY waxey ku saabsan tahay iyo Ogeysiinta Bangiga ;
HADDUU ARKAY : Qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2 lumidda Jeega War. Lamb. 698151 kuna taalo 4500/ Sh. kuna qoran Cabdi Xasan Cali.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Jeegga War. Lamb. 698151 ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Jeegga War. Lamb. 698151 cusub ee la sameyn doono gacasta laga saaro Cabdi Xasan Cali ama qof isla ka sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugayo 15ka maalmood ee aan kor ku soo sheegnay.

Hargeysa, 30.10.78

Guddoomiyaha Max. Gobolka Hargeysa
Yuusuf Xaaji Cabdi

L. 615/Bis.

HB MA GABO

الجريدة الرسمية



RASMIGA AH FAAFINTA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — 30 Nof. 78 L. 1 R. 11

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadkii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 82 ee 6 Nof. 78, Xeer dib u habeyn dhismaha Xarunta Wasaaradda Dawladda Hoose iyo H. Miyiga.- Bogga 731

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul Jaalle Aamina Cilmi Yaasiin L. 616 /
WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul Jaalle Xabiiba Cismaan Nuur L. 617 » 743

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul Jaalle Sahra Axmed Yuusuf L. 618
WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul Jaalle Nuur Maxamed Ugaas L. 619 » 744

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaale Xaaji Maxamuud Cabdi L. 620

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Xaliima Maxamed Shire L. 621 » 745

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Xaashi Cabdi Barre L. 622

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Cabdi Barkhadle Cabdikariim L. 623 » 746

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Maxamuud Cabdi Maxamuud 624

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Maxamed Maxamuud Sabban L. 625 » 747

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Maxamuud Xuseen Cigaal L. 626

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Cabdullaahi Jaamac Maxamed L. 627 » 748

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Muuse Xaaji Xasan Warsame L. 628

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Faaduma Xuseen L. 629 » 749

WASAARADDA H. GUUD, 25.7.78, Naado Dhul
Jaalle Axmed Weyrax Maxamuud L. 630

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle Xaawa Saciid Maxamuud L. 631 » 750

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle Axmed Xuseen Cashuur L. 632

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle Xaliima Abuukar Xaaji Aadan L. 633 » 751

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle Ismaaciil Xaaji Jaamac L. 634

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle Axmed Maxamed Afrax L. 635 » 752

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle XabiibaCabdikariim Cali L. 636

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle Maxamuud Aadan Cali L. 637 » 753

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle Cabdullaahi Cabdi Xuseen L. 638

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul
Jaalle Axmed Maxamed Cigaal L. 639 » 754

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul Jaalle Luul Maxamed Barre L. 640

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul Jaalle Aadan Cumar Caraale L. 641 » 755

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul Jaalle Xaawa Muuse Cali L. 642

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul Jaalle Ismaaciil Cabdi Cabdullaahi L. 643 » 756

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdi Calasow Nuur L. 644

WASAARADDA H. GUUD, 30.7.78, Naado Dhul Jaalle Hindow Jeylaani Malak L. 645 » 757

WASAARADDA H. GUUD, 29.7.78, Naado Dhul Jaalle Warshadda Alluminiyamka Dhismaha L. 646

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 12.11.78, Lumid Jeeg War. L. 100009 kuna qoran Shs. 4.000/- uu leeyahay Jaamac Yuusuf Bahnaan L. 647 » 758

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 12.11.78, Lumid Buug Kayd L. 367 ku qoran Shs. 40.710/- ay leedahay Cawrala Jimcaale Maxamed L. 648

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 12.11.78, Lumid Buug Kayd L. 1360/4 ku qoran Shs. 14.337 uu leeyahay Macallin Cali Maxamuud L. 649 » 759

MAXKAMADDA G. GALGADUU, 12.11.78, Lumid Jeeg L. 282765/78 ku ooran Shs. 1920 uu leeyahay Saciid Xirsi Cawaale L. 650

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 5.11.78, Jeeg War. L. 106460 ku qoran Shs. 16.000/- uu leeyahay Xasan Maxamed Ismaaciil L. 651 » 760

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13.11.78, Lumid Buug Kayd L. 1302 ku qoran Shs. 7.000/- uu leeyahay Ciise Cali Faarax L. 652

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13.11.78, Lumid Buug Kayd L. 10/827, ku qoran Shs. 3.144/-uu leeyahay Yaxye Cumar Mardauuf L. 653

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 82 ee 6 Nof 78,
— Xeer dib u hobeyn dhismaha xarunta Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGCO ARKAY : Xaashida 1aad, tan 2aad yo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969; iyo sharciga lambarkiisu yahay1, ee soo baxay 1dii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambaradoodu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 14 ee 3 Juunyo 1962 iyo beddelaadii ka dambeeyey kuna saabsan nidaamka Dawladda (Ordinamento Governo).

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 62 ee 10.10.77 ku saabsan dhismaha Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga ;

ISAGOO ARKAY : Xeerka lambar 316 ee 17.12.1962 kuna saabsan nidaamka xafiisyada dhexe ee Dawladda (Organisation of Government);

ISAGOO DHEGEYSTAY : Golaha Wasiirrada ;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha Guddiga Siyaasadda ;

ISAGCO AQOONSADAY : In loo baahan yahay in dib loo habeeyo dhismaha cusub ee xarunta Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga

WUXUU SOO SAARAY :

Qodobka 1aad

Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga iyadoo raaceysa awaamirta iyo talooyinka Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Hiyiga waxay ku shaqeyn doontaa hawlaha loogu xilsaaray sharciga lambar 62 ee 10.10.1977 ee ku saabsan dhismaha Wasaaradda iyo hawlaha kale ee sharciga iyo xeerarku u xilsaarayaan :

Qodobka 2aad

1. — Agaasimaha Guud iyo Agaasimayaashu waxay noqon karaan Saraakiil ka tirsan shaqaalaha maamulka ee Dawladda.

2. — Agaasimaha Guud ee Wasaaraddu wuxuu ku camal fali doonaa qodobka 3aad ee xeerka dhismaha Maamulka Dawladda Dhexe (DPR n. 316 del 17.12.1962) oo ah sida soo socota :

I) - Agaasimaha Guud wuxuu toos u fuliyaa ama u xil saaraa Saraakiisha isaga hoos yimaada maamulka arrimaha Wasaaraddu u xilsaarantahay wuxuuna mas'uul u yahay Wasiirka. Markuu arrimo maamulayo, wuxuu si daacadnimo ah u dhaqan geliyaa awaamirta Wasiirka isagoo hubinaya shaqaalaha hoos yimaadaan ina si daacadnimo ah u dhaqangeliyaan ;

II) - Agaasimaha Guud wuxuu mas'uul ka yahay wax ku oolnimada Waaxyaha iyo Qaybaha, Laamaha iyo Xafiisyada Agaasinkiisa Guud hoos yimaada.

III) - Gaar ahaan isagu waa :

a) inuu diyaariyaa dokumentiga la hordhigayo Golaha Wasiirrada ;

b) dokumentigii la hordhigayo Golaha Wasiirrada waa inuu marka hore xaajoodaa Wasaaradaha arrintaasi khuseyso, si loo hubiyo in aan keli ahaan la gaarin go'aan sharciga iyo xeerarku sidaas farayaan amase ku habboon marka hore Wasaaraddu iney wadajir uga xaajoodaan ;

c) inuu fal ahaan u dhaqan geliyo go'aanka Golaha Wasiirrada ee khuseeya Wasaaradda ;

d) inuu maamulo arrimaha shaqaalaha uu madaxa u yahay kana metelo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada horteeda iyo «Guddiga Shaqaalaha Dawladda».

3. — Waxaa kale ee uu ku camal falayaa awaamiirtii kale ee sharciyada iyo xeerarka Dawladdu ay farayaan.

Qodobka 3aad

Wasaaraddu waxay yeelaneysaa 7ba Waaxood; Qaybo iyo Laamo.

1. Waaxda Dawladaha Hoose ;
2. Waaxda Horumarinta Miyiga iyo Qorshaynta ;
3. Waaxda Isuduwidda Gobollada ;
4. Waaxda Arrimaha Shaqaalaha ;
5. Waaxda Kormeerka ;

6. Waaxda Miisaaniyadda, Xisaabaadka iyo Maamulka Xarunta Wasaaradda ;

7. Waaxda Maamulka iyo Isuduwidda Cuntada Deeqda ah.

Qodobka 4aad

Waaxda Dawladaha Hoose

Waaxda kor ku tilmaaman iyadoo raacaysa awaamiirta Wasiirka iyo Agaasimaha Guud waxay mas'uul ka noqon doontaa hawlaha ku saabsan :

1. Habeynta iyo Iskuduwidda Miisaaniyadda Dawladaha Hoose.

2. La socodka cashuuraha Dawladaha Hoose.

3. Ilaalinta dakhliga iyo kharashka Dawladaha Hoose.

4. Qorshaynta iyo horumarinta iyo dhaqaale ee Gobollada iyo Degmooyinka.

5. Maamulka korontada ee Degmooyinka.

6. Maamulka hawlaha (anagrafe) ee dhalashada, dhimashada, nikaaxa, furidda iyo tirakoobka.

7. Maamulka iyo xisaabaadka Laamaha Ganacsiga Degmooyinka oo ka kooban: cunno, daawo dad iyo xoolaba iyo wixii kale ee ganacsi oo ku soo biiro Dawladaha Hoose.

8. Xiriirka ka dhexeeya Dawladaha Hoose iyo Wasaaradaha dhinaca khuseeya hawlaha kor ku dhigan.

9. Talo bixinta habka dhismaha magaalooyinka iyo Tuulooyinka.

10. Waaxdu waxay yeelan doontaa saddex Qaybood oo kala ah :

b) - Qaybinta Maamulka Dawladaha Hoose iyo Miisaaniyadda ;

t) - Qaybta Laamaha Ganacsiga ;

j) - Qaybta Laamaha Farsamada iyo Nalka (Servizio Tecnico).

Qodobka 5aad

Waaxda Horumarinta Miyiga iyo Qorshaynta

Waaxda kor ku tilmaaman iyadoo raacaysa awaamiirta Wasiirka iyo Agaasimaha Guud waxay fulineysaa hawlaha ku saabsan :

1. Fulinta barnaamijka Joogtaynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga ;
2. La socodka iyo dersi ka sameynta (Research) baahida horumarinta ee dhaqaalaha beelaha miyiga ;
3. La socodka qorshaha iyo tirakoobka (statistics) maahariicdaa kala duwan lana xiriira horumarinta Miyiga;
4. La socodka xisaabaadka Iskaa wax-u-qabso ;
5. Fulinta go'aasnada Guddiga Dhexe ee JOHRM.;
6. Waaxdu waxay yeelaneysaa laba Qaybood oo kala ah :

b) - Arrimaha Bulshada iyo Dhaqaalaha, sida xarumaha Dhallinta Kacaanka, Dugsiyada Dhaqaalaha Guriga, Golayaasha Xannaanada Carruurta iyo Hooyooyinka ;

t) - Qaybta Qorshaha iyo Deraasida (Research and Planning).

Qodobka 6aad

Waaxda Isuduwidda Gobollada

Waaxda kor ku tilmaaman iyadoo raacaya awaamiirta Wasiirka iyo Agaasimaha Guud, waxay mas'uul ka noqon doontaa hawlaha Wasaaradda loo xilsaaray ee ku saabsan :

1. Habeynta Soohdimaha Gobollada iyo Degmooyinka ;
2. Isuduwidda Warbixinnada iyo go'aannada Gobollada ;
3. Arrimaha la xidhiidha amniga iyo nabadgelyada iyo arrimaha saameeya xadbeenaadka ;
4. Talo bixinta iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka dhulka iyo beeraha ;
5. Iney la socoto waxna ka qabato arrimaha la xiriira gargaarka abaaraha iyo dhibaatooyinka guud ee bulshada ;
6. Maamulka, bixinta iyo ka qaadista Jinsiyadda Soomaaliyeed.
7. Waaxdu waxay yeelan doontaa saddex Qaybood oo kala ah:

b) - Qaybta Isuduwidda Maamulka Gobollada ;
t) - Qaybta Arrimaha Nabadgelyada ;
j) - Qaybta Jinsiyadda.

Qodobka 7aad

Waaxda Arrimaha Shaqaalaha

Waaxda kor ku tilmaaman iyadoo raaceysa awaamiirta

1. Habeynta iyo Isuduwidda Maamulka Shaqaalaha Dawladda Dhexe iyo Dawladaha Hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka;
2. Xannaanada Shaqaalaha iyo Daryeelkooda.
3. Talo ka bixinta dallacaaddooda iyo asluubtooda ;
4. Talo ka bixinta kala beddelkooda iyo fasaxyadooda ;
5. Xogwarranka sannad walba laga qoro shaqaalaha iyo kan gaar ahaaneed ;
6. Tababarka shaqaalaha, mid farsamo, xafiisyada iyo Xisaabaadka ;
7. Waaxdu waxay yeelan doontaa saddex Qaybood oo kala ah :

b) - Qaybta tababarrada, shaqaalaha iyo qaabka.

t) - Qaybta Kaydinta, qiimaynta iyo warbixinnada.

j) - Qaybta kala beddelka shaqaalaha iyo fasaxyada.

Qodobka 8aad

Waaxda Kormeerka

Waaxda kor ku tilmaaman iyadoo u hoggaansan amarka Wasiirka iyo Agaasimaha Guud, waxay mas'uul ka noqon doontaa hawlaha hoos ku qoran :

1. Kormeer xisaabeed guud iyo mid gaar ahaaneed, si loo hubiyo in Gobollada iyo Degmooyinka ay fuliyeen sharciyada iyo wareegtooyinka hab xisaabeedka dalka ;
